
UNSOM
UNITED NATIONS ASSISTANCE MISSION IN SOMALIA

UNITED NATIONS HUMAN RIGHTS
OFFICE OF THE HIGH COMMISSIONER



# CODADKA AAN LA MAQAL:

## KA-QEYBGALKA BARAKACAYAASHA EE GEEDI-SOCODKA NABADAYNTA IYO DOWLAD-DHISIDDA SOOMAALIYA

Sebtember 2019



# Tusmo


Habka Cilmi Baarista 3

Nuxurka Qoraalka 5

1. Mowduuca 5

2. Ka-qaybgalka Barakacayaasha ee Arrimaha Danta Guud 13

    2.1 Natiijooyinka ugu muhiimsan ee la xiriira xuquuqda ka-qeybgalka arrimaha danta guud 13

    2.2 Natiijooyinka ugu muhiimsan ee la xiriira xuquuqda ka-qeybgalka siyaasadda 21

3. Xuquuqda xorriyadda ra'yiga iyo afkaarta 29

    3.1 Xogta ugu muhiimsan ee la helay 29

4. Xaqa xorriyadda ka-mid-noqoshada iyo xorriyadda kulanka 30

    4.1 Xogta ugu muhiimsan ee la helay 30

5. Caqabadaha ku hor-gudboon ka-qaybgalka Dadka Barakacayaasha ah ay ka-qaybgalaan arrimaha khuseeya bulshadooda 33

    5.1 Caqabadaha ku hor-gudboon ka-qaybgalka Dadka Barakacayaasha ah ay ka-qaybgalaan arrimaha khuseeya bulshadooda , loona sababeeyo in ay yihiin barakacayaal 34

    5.2 Caqabadaha ugu waaweyn ee ka hor taagan Barakacayaasha Ragga ah inay ka-qaybgalaan arrimaha khuseeya bulshadooda 35

    5.3 Caqabadaha ugu waaweyn ee ka hor taagan Barakacayaasha Haweenka ah inay ka-qaybgalaan arrimaha khuseeya bulshooda 36

6. Gunaanad 38

7. Talo soo-jeedin 39

    Hab-shaqo Sharciyadeed 45

    Xuquuqda Dadka Barakacayaasha ah 45

    Xaqa ka-qaybgalka arrimaha danta guud iyo xaqa ka-qaybgalka siyaasadda 46

    Xaqa xorriyadda aragtida iyo hadalka 48

    Jawaababaha ay ka bixiyeen Maamulada 48

# HABKA CILMI BAARISTA

Xogta barakacayaasha ee geedi-socodyada nabadeynta iyo dowlad dhisidda waxaa lagu soo aruuriyay foomka su'aalaha oo si gaar ah loo diyaariyay muddadii u dhexeysay April iyo Agoosto 2018.[1] Foomka su'aalaha ayaa diirada lagu saarayey shan xuquuqood oo uu damaanad qaaday Dastuurka Kumeelgaarka ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, oo kala ah: xaqa ka-qeybgalka siyaasadda; xaqa ka-qaybgalka arrimaha danta guud ; xaqa xorriyadda aragtida iyo hadalka; xaqa xorriyadda ka-mid-noqoshada; iyo xaqa kulanka.

Foomka su'aalaha wuxuu ka koobnaa 30 su'aalood oo loogu talagalay raadinta jawaabaha iyadoo la adeegsanayo hab-cabbirka loo yaqaan Likert[2]. Saddex su'aalood oo dheeri ah ayaa iyagana loogu talagalay in lagu helo jawaabaha la xiriira caqabadaha ay la kulmaan barakacayaasha iyo qaababka looga gudbi karo, Intaa waxaa sii dheer, si loo helo xog tayo leh, afar su'aalood ayaa lagu weydiyay tusaalooyin ku saabsan tallaabooyin ay qaadeen barakacayaasha oo khuseeya arrimaha bulshada ama tallaabooyin lagu horumarinayo ka-qeybgalkooda arimaha danta guud.

Kooxda Badbaadada iyo Xuquuqul Insaanka (HRPG) ee Hawlgalka Kaalmaynta Qaramada Midoobay ee Soomaaliya (UNSOM), hay'adaha shaqooyinka la fuliya, iyo Saraakiisha qaabilsan Xiriirinta Bulshada ( hay'adaha la shaqeeya Hay'adda Qaramada Midoobay u qaabilsan Miino Saarista ee UNMAS) ayaa qaaday wareysiyada. UNHCR iyo mid ka mid ah hay'adaha la fuliya howlaha ayaa sidoo kale iska kaashaday mashruuca aruurinta xogta lagasoo ururiyay hal deegaan oo ka tirsan Galgaduud, Galmudug.[3]

Sideed boqol iyo soddon iyo laba (832) wareysi ayaa loo sameeyay sida soo socota: 222 wareys ayaa laga sameeyay gudaha Somaliland, 119 gudaha Banaadir, 105 Jubaland, 104 Hirshabelle, 102 Puntland, 100 Galmudug, iyo 80 Dowlad Goboleedka Koonfur Galbeed. Jawaab-bixiyeyaashu waxay ahaayeen 386 haween ah iyo 446 rag ah; 657 ka mid ah waxay ahaayeen Barakacayaal, inta soo hartayna waxay iskugu jireen mas'uuliyiin dowladda ka tirsan, xubnaha bulshada rayidka ah, kooxaha haweenka, dad u dhaqdhaqaaqa arrimaha dhalinyarada iyo siyaasiyiin. Sideed boqol iyo soddon iyo labada (832) jawaab-bixiyeyaasha, ayaa 419 ay kamid ah waxay doorteen in aysan bixin xog ku saabsana beelaha ay kasoo kala jeedaan. Tani waa in la tixgaliyaa marka xogta lagu soo bandhigayo warbixinta ay tilmaamayso jawaabaha ay bixiyeen jawaab-bixiyeyaasha ee ku salaysan beelaha ay kasoo kala jeedaan. 419 jawaab bixiyeyaal ah oo aan bixin xog ku saabsan beelohooda, ayaa badankood (222) waxay ku sugnaayeen Somaliland.[4]

Jawaab bixiyaasha barakacayaasha ee loo soo xulay wareysigan ayaa ahaa kuwo lagu lagu soo xulay si baqtiyaa nasiib ah, iyadoo la hubinayo in ragga iyo haweenka barakacayaasha ah , barakacayaasha naafada ah, barakacayaasha kasoo kala jeeda qabaa'ilka kala duwan, iyo kuwa u muuqda kuwo nugul

1 Kahor diyaarinta foomka su'aalaha, UNSOM HRPG waxay wadatashiyo ka dhex sameysay xafiisyada kale ee UNSOM, xafiisyada kale ee Qaramada Midoobay (OHCHR, Xafiiska Wakiilka Qaxootiga ee Qaramada Midoobay, iyo Xafiiska Isku-duwaha Arrimaha Bani'aadamnimada) iyo Kooxda Ilaalinta. Kaddib markii la diyaariyey foomka xogwaraysiga, UNSOM HRPG waxay qabatey fadhiyo tijaabooyin horudhac ah oo lala yeelanayo xiriiriyeyaal la soo xulay si loo go'aamiyo ku habboonaanta su'aalaha iyo ku-habboonaanta xog-ururinta. Jawaab-celinta ka soo baxday fadhiyadaas ayaa loo adeegsaday dhammaystirka foomka su'aalaha.

2 Likert Scale waa nooc ka mid ah cabirka qiimeynta loo isticmaalo in lagu cabbiro aragtida ama fikradaha. Qiyaastaan, jawaabeyaasha waxaa laga codsanayaa inay qiimeeyaan heerka waafaqsanaanta qodobada laga hadlaayo , https://www.statisticshowto.datasciencecentral.com/likert-scale-definition-and-examples/.

3 Tababar ku saabsan sida loo sameeyo xog-waraysi ayaa la siiyay shaqaalaha xafiisyada UNSOM HRPG. Marka wareysiga ay qaadayaan , shaqaalaha hayadaha kale la shaqeeya UNSOM HRPG, shaqaalaha UNSOM HRPG ayaa warbixin ku saabsan shuruudaha xulushada wareysiyada siiyay shaqaalaha kale ee hay'ada ka qeybgalay xog uruurinta.

4 Intii lagu jiray baaritaanka kahor, qaar kamid ah dadkii la wareystay waxay cadeeyeen inaysan ka qeyb qaadan doonin cilmi baarista hadii ay tahay inay bixiyaan macluumaadkaas. Sidaa daraadeed, UNSOM HRPG waxay go'aansatay inay ka saarto su'aasha qabiilka su'aalo weydiinta ee laga fuliyo Somaliland.

ayaa lawareystay; Barakacayaasha ay hore isku garanayeen wareysi qaadayaasha ama horay u lahaayeen xiriir; Barakacayaasha u soo dhowaaday ama isugu soo aruuray dadkii la wareystay; ama barokacayaasha ay soo xuleen hogaamiyaasha xeryaha dadka soo bara kacay. Tusaalaha jawaabeyaasha loo soo xulay cilmibaaristan waxaa loogu talagalay in lagu bixiyo macluumaad laga helo tiro badan oo la-wareystayaal ah (832, oo isugu jira barakacayaal iyo kuwa aan barakacayaal ahayn) oo aqoon u leh arrimaha barokacayaasha, kuwaas oo bixin kara fikrado  iyo aragtiyaha laga qabo arrimahan. Ujeeddadiisu ma aha in si ahaan loo matalo tirada dadka Soomaaliyeed ama tirada dadka soo bara kacay.

Natiijooyinka ka soo baxa warbixinta waxay ku saleysan yihiin 832 wareysi.. Intaa waxaa sii dheer, doorsoomayaasha loo adeegsaday falanqaynta xogta la soo ururiyey waxaa ka mid ah: goobta ay ku suganyihiin jawaab-bixiyeyaasha; xaaladdooda barakaca; jinsigooda; iyo beesha/bulshada ay sheegteen. Jawaab-bixiyeyaasha waxaa laga codsaday in ay bixiyaan ogolaanshahooda si faallooyinka ay dhiibeen loogu daro warbixinta iyadoo aan la sheegeynin magacyadooda. Tirada/saamiga la doortay waxaa si aad saameeyay culeysyada ammaanka  iyo gaaritaan la'aan la gaari waayay meelaha qaar.

Ma jirin gundhig hore oo diyaarsan lana adeegsan karay  kuna saabsan mowduucyada loogu kuur galay cilmi baaristan. Sababtaas awgeed, suuragal ma ahayn in natiijooyin lagasoo dheehdo ama la is-barbar-dhigo si loo arko waxa iska bedelay aragtiyada deegaanada kala duwan, waqtiyada iyo qaybaha ay ka kala tirsan yihiin jawaab-bixiyeyaasha. Isla mar ahaantaana, natiijada ka soo baxday cilmi-baaristani waxay aasaas ama gundhig u noqon kartaa dadaallada mustaqbalka loo gelayo raad-raaca ku-naaloonshaha barakacayaasha ay ku naloonayaan xuquuqda la xiriirta ka-qaybgalka geedi-socodyada nabadaynta iyo dhismaha dowladnimada.

# WARBIXINTA OO KOOBAN

Warbixintan oo ku saabsan natiijada sahan la sameeyay, waxaa faafiyay Howlgalka Kaalmaynta Qaramada Midoobay ee Soomaaliya (UNSOM) iyo Xafiiska Ergeyga Sare ee Xuquuqda Aadanaha ee Qaramada Midoobay (OHCHR) waxaana la diyaariyay iyada oo la raacayo waajibka shaqo ee UNSOM ee ku xusan Qaraarka Golaha Amniga ee Qaramada Midoobay ee tirsigiisu yahay 2158 (2014). Warbixintu waxay u kuur-geleysaa xuquuqda barakacayaasha dalka gudihiisa ku barakacay (IDPs) ee la xiriirta ka-qeybgalkooda geedi-socodyada nabadaynta iyo dowlad-dhisidda, aragtida ku aaddan doorka ay ka ciyaarayaan iyo/ama ay ka cayaari karaan saaxada danta guud iyo caqabadaha ay la kulmi karaan.

Waxaa lagu qiyaasaa in qiyaastii shan meelood meel ahaan dadka Soomaaliyeed ay ku nool yihiin xaalado (mararka qaar soo noqnoqda oo daba-dheeraada) barakac gudaha ah, iyadoo ay caqabado kaladuwan kasoo wajahaan ku naaloonshaha xuquuqaadkooda rayid, siyaasadeed iyo weliba dhaqaale, bulsho iyo hiddo ahaan. Warbixintani waxay ka soo baxday natiijadii laga soo saaray warbixinta OHCHR / UNSOM ee ku saabsanayd xuquuqda aadanaha, taas oo la daabacay bishii Agosto 2018 khusaysayna geedi-socodka doorashadii 2016/2017 ee Soomaaliya, taas oo shaaca ka qaaday in barakacayaashu ay la kulmeen faquuqid intii lagu gudajiray geedi-socodkaas.

Xogta lagu muujiyey warbixinta waxaa lagu saleeyay jawaabiha su'aalo si gaar ah loo qaabeeyay oo ay maamushay Kooxda Badbaadinta Xuquuqda Aadanaha ee UNSOM (UNSOM HRPG),[5] su'aalahaas oo loogu talo galay 832 la-wareystayaal ah (386 haween ah iyo 446 rag ah), oo ay ku jiraan 657 Barakacayaal ah iyo 175 aan Barakacayaal ahayn,[6] iyo sidoo kale wareysiyo shakhsiyadeed oo la qaaday intii u dhaxeysay bilihii Abriil iyo Agosto 2018. Warbixintu waxay sahan ku samaynaysaa ka-qeybqaadashada barakacayaasha ee howlaha nabadeynta iyo dowlad dhisidda (laga billaabo heer deegaan ilaa heer qaran) iyo caqabadaha ay la kulmaan.

Foomka xogwaraysigu waxaa diiradda lagu saaray qayb kamid ah xuquuqda ku xusan sharciyada caalamiga ah ee xuquuqul insaanka iyo Dastuurka Kumeelgaarka ah ee Jamhuuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Waxayna kala yihiin xuquuqda: ka-qeybgalka arrimaha danta guud; ka qaybgalka siyaasadeed; xorriyadda ra'yiga iyo afkaarta; iyo xorriyadda kamid-noqoshada, kulanka iyo banaanbaxa.

Natiijooyinka kasoo baxay sahanka ayaa muujinaya in aanay jirin (ama ay aad u yartahay) kaqeyb-qaadashada Barakacayaasha ee geedi-socodyada nabadeynta iyo dowlad-dhisidda, oo ay weheliso dareen kaa dhex jira barakacayaasha oo ah in xuquuqdooda laga hor istaago. Tani waxay tilmaamaysaa in si weyn ay u kala fogyihiin oo aanay iskugu xirnayn barakacayaasha iyo mas'uuliyiinta bulshada Soomaaliyeed, lagasoo billaabo heer xero-deegaan ilaa heerarka sare.[7]
In kasta oo kaqeybgalayaashu ay bixiyeen jawaabo kala duwan oo ku saleysan doorsoomayaal ay ka mid yihiin goobta jawaab-bixiyaha ku suganyahay, ahaanshaha ama aan ahayn barakacyaal, jinsiga, ayaa waxaa ka soo muuqanaya cilmi baaristan sawir guud ee tilmaamaya faquuq iyo gees-u-riixid looga geysto barakacayaasha dhinaca geedi-socodka nabadaynta iyo dowlad-dhisidda.

5 Sida ku xusan Qaraarka Golaha Amniga ee Qaramada Midoobay ee 2158, UNSOM waxaa loo xilsaaray "inuu la socdo, gacan ka geysto baaritaanka iyo inuu warbixin u gudbiyo Golaha, kana caawiyo ka hortagga wixii xadgudub ah ama ku xadgudubka xuquuqul insaanka ama ku xadgudubka sharciga caalamiga ee bini'aadannimada ee la isku raacay ee ka socda Soomaaliya." Warbixintan waxay ka soo jeedaan natiijooyinka baarista ee lagu sameeyay warbixin OHCHR / UNSOM oo ku saabsan xuquuqda aadanaha hanaanka doorashada 2016/2017 ee Soomaaliya, kaasoo daaha ka qaaday in Barakacayaasha ay soo food-saareen xad-gudub ku saabsan hannaanka doorashada, Istiraatiijiyadda Ilaalinta ee 2018-2019 ee ay qaadatay Kooxda Arimaha Baniaadanimada ee Soomaaliya ee la ansixiyay bishii Diseembar 2017.

6 Dadka aan Barakacayaasha ahyn waxaa ka mid ahaa shaqaale dowladeed, xubno ka tirsan bulshada rayidka ah, oday dhaqameedyada, hogaamiyaasha diinta, haweenka, dhalinyarada, shaqaalaha gargaarka iyo siyaasiyiinta.

7 Maqnaanshaha xog hore oo loo adeegsan karo ee ku saabsan mowduucyada lagu baaray warbixinta, suurogal uma aheyn in la sawiro waxyaabaha la soo jeedinayo ama isbarbar dhiga la xiriira beddelka aragtiyaha goobaha, waqtiga iyo qeybaha jawaabeyaasha. Isla mar ahaantaana, natiijada ka soo baxda cilmi-baaristani waxay aasaas u noqon kartaa dadaallada mustaqbalka ee loogu talagalay in lagu sahamiyo dhinacyadaan nolosha barakacayaasha.

Jawaab-bixiyeyaashu waxay tilmaameen in si guud ay u jirto matalaad la'aan ayna iyagu ka maqanyihiin madasha go'aan qaadashada, taas oo sii kordhinaysa dareen ay is weydiin karaan in aanay dalka waxba ku lahayn taas oo sii kala qaybinaysa bulshada. Sahanka wuxuu shaaca ka qaaday in kalsoonida ay barakacayaashu ku qabaan hay'adaha [dalka] ay tahay mid kooban.

Faquuqa iyo gees-u-riixa ka dhanka ah barakacayaasha ayaa sidoo kale horseeday cabsi ay ka qabaan inay ka hadlaan arrinta, iskaba daa inay dhaleeceeyaan, iyadoo shakhsiyaadka barakacayaasha ah ay inta badan ku tiirsanyihiin [hogaanka] dhaqamadooda iyo wadiiqooyinka ku salaysan beelaha. Sidoo kale, barakacayaashu ma dareemaan in ay awood u leeyihiin isticmaalida xuquuqdooda ku aaddan qabsashada kulamo nabadeed, samaysashada ama ku biiritaanka urur.

Natiijooyinkaani waxay u muuqdeen kuwo si muuqata loo calaamadeeyay iyada oo la tixgalinayo aragtiyada ay qabaan bulshooyinka taariikh ahaan lagu hayb-sooci jiray laguna faquuqi Soomaaliya, sida beelaha Soomaali Bantu. Waxay u muuqdaan inay isu biirsadeen labo xaaladood oo kala ah inay gudaha dalka ku barakeceen iyo inay kasoo jeedaan dad la haybsooco. Doorarka dhaqanka ee ku aaddan arrimaha dhedig-labka (gender-ka) ayaa sidoo kale la ogaaday in uu gacan ka geysto sii adkeynta xaaladda markii horeba xaddidnayd ee ka-qaybgalka barakacayaasha ee geedi-socodyada nabadaynta iyo dowlad-dhisidda.

Talooyin ku socda Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo Dowlad Goboleedyada ayaa iftiiminaya baahida loo qabo in la qaado talaabooyin wax-ku-ool ah oo sare loogu qaadayo ku-naaloonshaha barakacayaashu ku naaloonayaan xuquuqda heerarkeeda kala duwan: ka billaabanaysa shakhsiga (laga billaabo bed-qabkooda iyo amnigooda iyo aminga mudada deganaansha meel ) ilaa bulsho weynta guud ahaan (inay ka qaybqaataan geedi-socodka dib-u-eegista dastuurka iyo geedi-socodyada doorasho ee heer federaal iyo heer deegaan intaba).

Geedi-socodyada qaran ee nabadaynta iyo dowlad-dhisidda Soomaaliya waxaa guud ahaan astaan u ah kobnaanta ka-qaybgalka dadweynaha, waxaana asaaskoodu uu ahaa guud ahaan mid jilicsan. Soomaaliya waxay maraysaa marxalad asaasi ah oo ay socdaan doowashooyinka Dowlad Goboleedyada, la iskuna diyaarinayo doorashooyinka qaran ee qof-iyo-cod ah ee 2020-2021,[8] waxaa kale oo socda geedi-socodka dib-u-eegista dastuurka iyo dib-u-qaabayn sharci ee hay'ado kale, taaba-gelinta federaalka iyo marxaladda kalaguurka ah ee qorshaysan ee hawlaha amni ee asaasiga ah loogu wareejinayo hay'adaha iyo ciidamada Soomaaliyeed, iyo qorshaha fulinta ee naqshadda amniga qaran. Marka arrimahaas la eego, waxaan suuto gal ahayn in qayb weyn oo bulshada kamid ah codkoodu sidaas kusii maqnaado iyadoo laga hadlayo geedi-socodyadaan qaabayn doona dastuurka dowladda Soomaaliya tobaneeyada sanadood ee soo socota.

Warbixinta waxaa lala wadaagay Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo Dowlad Goboleedyada mana jiraan khaladaad ka muuqdo oo laasoo ogaaday.

8 Guddiga Madaxa-banaan ee Doorashooyinka Qaranka (GMDQ) wuxuu hadda ku hawlanyahay qorshe lagu diiwaan-gelinayo cod-bixiyeyaasha dorashooyinka dhici doona 2020-21, diiwaan-gelintaas oo qabsoomaysa saddexda bilood ee u dambeysa sanadka 2019. Guddoomiyaha GMDQ oo wareysi muuqaal ah bixisay bishii September 2018, ayaa waxay qiyaastay in dalka laga diiwaan gelin doono saddex milyan oo cod-bixiyeyaal ah . https://goobjoog.com/xaliimo-yarey-oo-ka-hadashay-suurtagalnimada-doorasho-dalka-ka-dhacday-2020/ (markii ugu dambeysay ee la booqday waxay ahayd 15 April 2019).

# 1. MOWDUUCA GUUD

1. Dadka Gudaha Ku Barokacay waxaa lagu qiyaasaa in tiro ahaan ay dhanyihiin ku dhawaad 20 boqolkiiba dadka Soomaaliyeed. Qaarkood waxay barakaceen markii ay burburtay Dowladdii hore 1991 halka kuwo kalena ay dhowr jeer la kulmeen barakac sabab kaliya ama dhowr sababood loo tiiriyo, oo ay ku jiraan colaado, abaaro iyo fatahaado. Diiradda beesha caalamka iyo Dowladda Federaalka ah waxay badanaa ku qotontaa baahiyaha gargaarka bani'aadanimo ee ay qabaan barakacayaasha si wax looga qabto xaaladda nuglaanta ah ee ay ku noolyihiin.

2. Dadka rayidka ahi ayaa weli ku jiraan dhibaatooyin ay kala kulmaan colaadda hubeysan ee joogtada ah ee ka jirta Soomaaliya. Waxaa la qiyaasaa in dalka ay ku suganyihiin 2.6 milyan oo barakacayaal ah;[9] oo u dhigma in ka badan shan meelood hal meel qiyaasta wadarta tirada dadka ku sugan dalka.[10] Qiyaasta tirada dumarka ka tirsan dadka barakacayaasha ah waa 50.63 boqolkiiba.[11] Laga soo bilaabo 1dii Janaayo 2017 ilaa 31koo Luulyo 2019, Kooxda Badbaadada iyo Xuquuqul Insaanka (UNSOM HRPG) waxay diiwaangelisay khasaare soo gaaray 4,821 qofood oo rayid ah kuwaas oo 2,233 kamid ah la diley halka 2,588 kalena la dhaawacay. Tiradaas waxaa ka mid ahaa 96 Barakacayaal ah, oo iskugu jira 25 la dilay iyo 71 la dhaawacay. Tirooyinkani waxay ka turjumayaan kiisaska ay diiwaan-gelisay Kooxda Badbaadada iyo Xuquuqul Insaanka (UNSOM HRPG) mana ahan tiro dhamaystiran oo sheegeysa khasaarah soo gaaray dadka rayidka ah ee ku sugan Soomaaliya muddadii la diyaarinayay warbixintan. Ka sokow xaaladda nuglaanta ah ee ka dhalatay barakaca soo noq-noqday ee daba-dheeraaday, hubanti la'aanta ah inay sii deganaanadaan halka ay degganyihiin, iyo luminta difaacii beesha;[12] barakacayaashu waxay la kulmaan khataro kale oo badan, oo ay ku jiraan xarig aan sharciga waafaqsaneyn iyo xabsi-ku-hayn, dhacdooyin gacan-ka-hadal wata oo dhaca xilliyada la qeybinayo gargaarka bani'aadanimo, ka saarida si Khasab ah looga saaro halka ay degganyihiin, iyo sidoo kale

9 Xafiiska Qaramada Midoobay ee Isuduwidda Arrimaha Bani'aadamnimada (OCHA), Soomaaliya: Xogta Kooban, Agoosto 2018 https://reliefweb.int/sites/reliefweb.int/files/resources/Somalia%20Humanitarian%20Dashboard_August%202018.pdf (kii ugu dambeeyay) helitaanka 3 Oktoobar 2018); Warbixinta Xoghayaha Guud ee Soomaaliya, S / 2018/800, 4 Sebtember 2018, para. 75, https://undocs.org/S/2018/800 (last accessed 14 November 2018). (Markii ugu dambeysay ee la helay 14 Noofambar 2018).

10 Qiyaasta 12,316,895; eeg Sanduuqa Qaramada Midoobay ee Tirakoobka Dadka (UNFPA), Sahanka Qiyaasta Tirada Dadka ee Soomaaliya 2014, p. 18, https://somalia.unfpa.org/sites/default/files/pub-pdf/Population-Estimation-Survey-of-Somalia-PESS-2013-2014.pdf (gelitaanki ugu dambeeyay 11 Nofembar 2018).

11 Qorshaha Wax-ka-qabashada Hawlaha Bani'aadanimo ee Soomaaliya 2019.

12 Dadka Soomaaliyeed waxay u qaybsan yihiin beelo iyadoo tiro-hoosaadyo fara badan qaab dhismeedka beeluhu yahay mid bulsho ahaan iyo siyaasad ahaanba muhiim u ah dhinac kasta oo nolosha Soomaaliya ah. Afarta beelood ee ugu waaweyn waa Daarood, Hawiye, Digil iyo Mirifle (oo marmarka qaarkood loo yaqaan Raxanweyn) iyo Dir. Soomaaliya waxay isticmaashaa habka 4.5, oo ah heshiis awood qeybsi siyaasadeed oo siinaya qoondada siman afartaas beelood ee ugu waaweyn iyo halka bar ama hal qeyb barkeed loo qoondeeyay "beelaha laga tiro badan yahay" oo ka koobnaa beelo tiro yar 'iyo kuwa la yagleelay oo kuwaa la soocay. waxaa loo kala saaraa laba qaybood: kooxo qowmiyadeed (Soomaali Bantu, Banaadiri iyo Carab ah kuwaas oo banaanka ka ah qaab dhismeedka qabiilka Soomaaliyeed ee caadiga ah oo loo arko inay asal ahaan ka soo jeedaan meelo kale) iyo kooxo farsamo xirfadlayaal ah (waa xeelado farshaxanno ah). hal qeyb barkeed (0.5) waxay muujineysaa mala-awaalka ah in loo arkaayo kuwo tiro yar oo aan miisaan culus ku laheyn siyaasad ahaan iyo bulsho ahaanba. Qaaciddada 4.5 waxaa asal ahaan loo soo saaray qaab wadaag awood-wadaagis ah shirkii Sodere, oo ay maalgalisay Itoobiya oo ay ka soo qeybgaleen inta badan kooxahii hubeysnaa ee 1996-7. Markii dambe waxay isu rogtay qaab awood wadaag ah oo ay ku heshiiyeen qabaa'illada Soomaalida iyo hogaamiyaasha siyaasadeed intii lagu jiray Shirkii Nabadda 2000 ee Carta ee lagu qabtay Jabuuti, kaasoo soo saaray Dowladdii Qaran ee Ku-meel-gaarka ahayd (TNG) illaa iyo markaas. Eeg Warbixinta 'Interpeace Report' "Taariikhda Dhexdhexaadinta ee Soomaaliya laga soo bilaabo 1988" p. 67 ee https://www.interpeace.org/wpcontent/uploads/2009/05/2009_Som_Interpeace_A_History_Of_Mediation_In_Somalila_Since_1988_EN.pdf . Qaaciddada 4.5 ma leh saldhig sharciyeed waxaana loo dejiyey sidii xal ku-meel-gaadh ah. Waxaad kaloo eegtaa Xaashida Xaqiiqda ee UNSOM ee hannaanka doorashada Soomaaliya ee 2016, https://unsom.unmissions.org/sites/default/files/fact_sheet_on_somalias_2016_electoral_process.pdf (Markii ugu dambeysay ee aqriyay boggan 17 Oktoobar 2018). Dadka Soomaaliyeed guud ahaan waxaa lagu qeexay inay yihiin isku mid laakiin sida aan kor ku soo sheegnay Soomaalidu waa dad kala jaad ah marka loo eego qowmiyadaha (Soomaali Bantu, Carab) iyo habka nolosha (xoolo dhaqatada, beeraha iyo kalluumeysiga). Heerka siyaasadeed ee Soomaaliya waxaa lagu eedeeyey inuu diidayo ama iska dhego tirayo jiritaanka 'qowmiyado xoog badan' oo leh aqoonsi iyo asal kala duwan oo dalka ka jira. - Eeg Maxamed Trunji, Soomaaliya: Taariikhda Aan La Xusin 1941 - 1969, Looh Press, 2015, p. 432. Intooda badan Barakacayaasha waxaa loo arkaa inay ka soo jeedaan beelaha laga tirada badan yahay iyo kuwa la takooro - eeg Warbixinta Horumarinta Aadanaha ee Soomaaliya 2012: Awoodsiinta Dhalinyarada Nabadda iyo Horumarka, UNDP 2012 ee p. 33.

xadgudub ku salaysan jinsiga iyo in laga reebo ka-qaybqaadashada geedi-socodyada muhiimka ah ee nabdaynta iyo dowlad dhisiidda.

3. Tirada la qiyaasay ee 2.6 milyan ee barakacayaasha ku sugan gudaha Soomaaliya, ayaa 1.5 milyan oo ka mid ah waxaa loo geystay barakac kale oo dheeraad ah – oo inta badan ku khasbay inay kasoo hayaamaan deegaanada miyiga ah una soo hayaamaan magaalooyinka[13] – lagasoo billaabo bishii Nofembar 2016 waxaana barakacaas sabab u ahaa abaaro, colaado iyo fatahaado[14]. Afarta sababood ee ugu waaweyn ee barakaca dhaliya waxay kala yihiin colaad ama cabsi laga qabo colaad (boqolkiiba 22 jawaab bixiyeyaasha sidaas ayay qabaan), abaaro (22 boqolkiiba), la'aanta fursadaha soo saarashada nolol maalmeedka (16 boqolkiiba) iyo guri ka saarid (shan boqolkiiba)[15]. Sababahaas ayaa qayb ka ahaa colaado beeleedyada[16] sababta u ah khasaaraha soo gaaray dadka rayidka ah iyo barakicintooda. Iyadoo ay xaalado jilicsan heysata amniga iyo horumarinta hay'adaha, ayaa haddana maleeshiyo beeleedyadu waxay buuxin waayeen faraaqa ka jira amniga, taas oo dadka tabarta yar iyo kuwa la faquuqo kasii dhigtay dad aad ugu nugul amni darrida iyo barakaca gudaha.[17]

4. Tirada ugu badan ee Barakacayaashu waxay ku nool yihiin ku dhawaad 2,000 goobood; [18] oo badankood ku yaal xarumaha magaalooyinka, maaddaama magaalooyinka laga helo fursado gargaar bani'aadanimo iyo kasbashada nolol maalmeedka. Inta badan goobahan waa aagag deegaan oo aan rasmi ahayn kuna yaala dhulal gaar loo leeyahay oo ku yaal magaalooyinka. Muqdisho waxay marti-gelisay tirada ugu badan ee barakacayaasha, waxaana lagu qiyaasaa inay yihiin 485,731 qofood — taas oo u dhiganta boqolkiiba 19 guud ahaan tirada Barakacayaasha eek u sugan dalka.[19]

5. Barakacayaashu waxay ka mid yihiin dadka aadka ugu nugul marka loo eego cunto helidda;[20] xaaladdooduna waxay kasii liidataa xaaladaha dadka kale ee caadiga ah marka la eego tilmaamaha lagu garto xaaladda liidato sida faqriga[21]. Badbaadada ayaa ah arrin walaac weyn ku heysa guud ahaan barakacayaasha, gaar ahaan gabdhaha iyo haweenka barakacayaasha

13 Warbixinta Xoghayaha Guud ee Soomaaliya, S / 2018/800, 4 Sebtember 2018, para. 96, oo ah https://undocs.org/S/2018/800 (Markii ugu dambeysay ee la aqriyayboggan 14 Noofambar 2018).

14 Isuduwidda Xerada iyo Maareynta Kaamka, Howlgalladda qaybaha Xeryaha IDP ee https://data2.unhcr.org/en/situations/cccm_somalia (Markii ugu dambeysay ee la aqriayay boggan 5 Noofambar 2018).

15 OCHA, Soomaaliya: Gar-gaarka bini-aadamnimada, Agoosto 2018 (oo la soo saaray 17-kii Sebtember 2018), oo ku taal https://reliefweb.int/sites/reliefweb.int/files/resources/Somalia%20Humanitarian%20Dashboard_August%202018.pdf (la soosaaray la soo dhaafay) 3 Oktoobar 2018). Warbixinta Xoghayaha Guud ee Soomaaliya, S / 2018/800, 4 Sebtember 2018, para. 75, at https://undocs.org/S/2018/800 Markii ugu dambeysay ee la aqriyay boggan 14 Noofambar 2018).

16 Isuduwidda Xerada iyo Maareynta Kaamka, Xaaladaha Xeryaha IDP ee Howlgallada, ayaa laga helaa https://data2.unhcr.org/en/situations/cccm somalia (Markii ugu dambeysay ee la aqriyay boggan 5 Noofambar 2018).

17 Kooxda Qalalaasaha Caalamiga ah, Qalabka Xanuunka (III): Colaadda iyo Macaluusha ka jirta Soomaaliya, warbixin kooban oo ku saabsan Lambar 125 / Afrika, 9 Meey 2017https://www.crisisgroup.org/africa/horn-africa/somalia/b125-instruments-pain-iii-conflict-and-famine-somalia (oo la soo dhaafay 3dii Oktoobar 2018); Warbixinta Xog-hayaha Guud ee Arimaha Gargaarka iyo Isuduwaha Gargaarka Degdega ah, S / 2018/896, 8 Oktoobar 2018, para. 4, https://www.un.org/ga/search/view_doc.asp?symbol=S/2018/896 (Markii ugu dambeysay ee la aqriayay boggan 28 Noofambar 2018).

18 OCHA, Soomaaliya: Gar-gaarka bini-aadamnimada, Agoosto 2018 (oo la soo saaray 17-kii Sebtember 2018), oo ku taal at https://reliefweb.int/sites/reliefweb.int/files/resources/Somalia%20Humanitarian%20Dashboard_August%202018.pdf (la soosaaray la soo dhaafay) 3 Oktoobar 2018). Warbixinta Xoghayaha Guud ee Soomaaliya, S / 2018/800, 4 Sebtember 2018, para. 75, at https://undocs.org/S/2018/800 (Markii ugu dambeysay ee la aqriyay boggan 14 Noofambar 2018).

19 Isuduwidda Xerada iyo Maareynta Kaamka, Xaaladaha Xeryaha IDP ee Howlgallada, ayaa laga helaa https://data2.unhcr.org/en/situations/cccm _somalia (Markii ugu dambeysay ee la aqriyay boggan 5 Noofambar 2018).

20 Eeg Warbixinta Xog-hayaha Guud ee Arimaha Gargaarka iyo Isuduwaha Gargaarka Degdega ah, S / 2018/896, 8 Oktoobar 2018, paras. 3-5, at https://www.un.org/ga/search/view_doc.asp?symbol=S/2018/896 (Markii ugu dambeysay ee la aqriyay boggan 28 Noofambar 2018), iyo Unugga Falanqaynta Nafaqada iyo Nafaqada (FSNAU) -FEWS Sii-daynta Farsamaynta ee 'NET 2018 Post Gu Technical, 2 Sebtember 2018, barta internetka ee http://www.fsnau.org/in-focus/fsnau-fews-net-2018-post-gu-technical-release-02-sep-2018 (gelitaanki ugu dambeeyay ee boggan 28 Noofambar 2018).

21 Bangiga Caalamiga ah ee Dib-u-dhiska iyo Horumarinta, Warbixinta Saboolnimada Soomaaliya ee 2016, Warbixinta No: AUS19442, p. 23, oo ah https://reliefweb.int/sites/reliefweb.int/files/resources/Output-P160456-v7_0.pdf (markii ugu dambeysay ee la aqriyay boggan 3-da Diseembar 2018). Natiijooyinka ka soo baxay dhacdooyinka saboolnimada ayaa waxaa loola jeedaa Soomaalida ku nool degsiimooyinka Dadka Gudaha Ku Barokacay.

ah.[22] Xeryaha barakacayaasha ayaa intooda badan waxay ku yaallaan daafaha magaalooyinka iyo caasimadaha, halkaas oo joogitaanka hay'adaha amni ee Dolwaddu uu ku yaryahay.[23]

6. Haweenka iyo gabdhaha Soomaaliyeed waxay la kulman culeys iyo dhibaatooyinka tankooda ka weyn kana dhasha dhaqanka ku salaysan hab-beeleedka kaas oo xoojiya isla markaana sii kaabaya awoodda la kala dhaxlo ee ragga u gaarka ah. Waxaa xaaladdaas sii huriya xaddidnaanta dhaqanka oo aan kaalin muuqato siinayn maqaamka haweenku ku dhex leeyihiin bulshada Soomaaliyeed. Taas waxaa ka dhasha in sinnaan la'aanta jinsiga ay aad usii xididdaysato. Haweenka Soomaaliyeed waxaa laga reebaa go'aan ka gaarista rasmiga iyo milkiyadda hantiyadeed ama waxay soo maraan igmasho ay raggu u igmadaan. Soomaaliya waxaa ka jira heer aad u sarreeya ee dhimashada haweenka, kufsi, gudniinka fircooniga ah, tacaddiyo ka dhan ah hweenka, iyo guurka caruurta[24]. Waxaa xaddidan in haweenku ay cadaalad ka helaan nidaamyada cadaaladeed ee rasmiga ah iyo weliba ka ku salaysan beelaha. Haweenku waxay la kulmaan xaddidaad ka hor-istaagta gaarista ilaha dhaqaale iyo hantiyadeed. Taas waxaa kusii laba laabmaya ka-qaybgalka haweenka ee waaxyada siyaasadda iyo go'aan qaadashada oo hooseeya.

7. Rabshadaha ku saleysan jinsiga, oo ay ku jiraan tacaddiga galmada, ayaa weli ah kuwo baahsan oo haweenka iyo gabdhahaba gudaha ku barakacay ayaa aad ugu nugul, taasoo ay ugu wacantahay ka hortag la'aanta, helitaanka caddaaladda oo xaddidan iyo ilaalinta qabiilka oo taagdaran.[25] Barakacayaasha ayaa ahaa in ka badan boqolkiiba 80 ee dadka ka badbaaday dhacdooyinka xadgudubyada jinsida ku saleysan ee la diiwaangeliyay sanadkii 2018.[26] Warbixinta Xoghayaha Guud ee 2017 ee Rabshadaha Galmada ee Colaaddaha la Xiriira ayaa lagu xusay in nuglaanta barakacayaasha gudaha Soomaaliya ay uga sii dari karto ilaalinta qabiilka ay ka helayaan oo daciif ah iyagoo cararaya ama iyagoo jooga meesha ay u soo barakaceen.[27] Waaxda Xuquuqul Insaanka iyo Ilaalinta UNSOM (HRPG) ayaa diiwaangelisay 32 dhacdo oo kufsi ah oo lagula kacay haweenka iyo gabdhaha barakacayaasha ah (24 ka mid ah dhacdooyinka kufsiga ayaa dhacay sannadkii 2017 siddeedda kalena waxay dhaceen sannadkii 2018). Toddoba iyo toban ka mid ah dhacdooyinka la diiwaangeliyay waxay ka dhaceen Dowlad Goboleedka Koonfur Galbeed;[28] 11 waxay ka dhaceen Puntland; labo waxay ka dhaceen Hirshabelle; mid ka mid waxay ka dhacday Galmudug; midna waxay ka dhacday Jubaland. Labaatan iyo afar ka mid ah dhacdooyinka ayaa dhacay sanadkii 2017, kuwaasoo 22 oo ka mid ah ay dhaceen lixdii bilood ee ugu horeysay sanadkaas, markii uu barakaca guduhu gaaray meeshii ugu sarreysay abaaraha awgood. Kuwa lagu eedeeyay inay geysteen falalkaas waxaa ka mid ahaa: xubno ka tirsan ciidamada amniga; Al Shabaab; dabley aan heybtooda la aqoonsan (oo mararka qaar xiran dirayska ciidamada ama booliska); iyo saraakiisha booliska.

22 Daraasadaha ayaa muujiyey in haweenka iyo gabdhaha gudaha ku barokacay ay xaddidan yihiin adeegsiga caafimaadka galmada iyo taranka. Tani waxay yeelan kartaa cawaaqib xumo, sida uurka aan la dooneyn iyo uurka aan la dooneyn, dhimashada hooyada iyo cudurada, iyo sidoo kale qatarta kale ee caafimaadka hooyada iyo dhallaanka. Haweenka iyo gabdhaha qaangaarka ah waxay sidoo kale khatar weyn ugu jiraan rabshado ku saleysan jinsi, oo ay ku jiraan rabshado sokeeye, kufsi, guur hore, iyo tahriibin. https://www.reproductiverights.org/sites/crr.civicactions.net/files/documents/ga_bp_conflictncrisis_2017_07_25.pdf

23 Sida uu caddeeyay Duqa Magaalada Muqdisho hadal uu ka jeediyay aqoon ku saabsan Isweydaarsiga Xallinta Maxalliga ee barokaca Magaalooyinka Muqdisho 21 Oktoobar 2018. at http://regionaldss.org/wp-content/uploads/2018/12/Exchange-Local-Solutions-Programme-21-Oct-2018-Report-Revised-Final.pdf (Markii ugu dambeysay ee la aqriyay boggan 4-ta Maarso 2019).

24 UNDP, Arrimaha Dhedig-Labka Soomaaliya, https://www.undp.org/content/dam/rbas/doc/Women's%20Empowerment/Gender_Somalia.pdf>.

25 Eeg Warbixinta Xog-hayaha Guud ee Kufsiga La Xiriira Khilaafka Jinsiga, S / 2017/249, 15 Abriil 2017, para. 54, at https://www.un.org/en/events/elimination-of-sexual-violence-in-conflict/pdf/1494280398.pdf (Markii ugu dambeysay ee l aqriyay 6 Noofambar 2018).

26 Warbixinta Xoghayaha Guud ee Soomaaliya, S / 2018/800, 4 Sebtember 2018, para. 70, https://undocs.org/S/2018/800 (Markii ugu dambeysay ee la aqriyay 14 Noofambar 2018).

27 Eeg Warbixinta Xog-hayaha Guud ee Kufsiga La Xiriira Khilaafka Jinsiga, S / 2017/249, 15 Abriil 2017, para. 54, at https://www.un.org/en/events/elimination-of-sexual-violence-in-conflict/pdf/1494280398.pdf (Markii ugu dambeysay ee l galay boggan 6 obtober 20180).

28 Lix iyo toban ayaa ka dhacay magaalada Baydhabo intii u dhaxeysay Janaayo ilaa Maarso 2017.

8. Dhaqanka “Hor-Joogayaasha” ayaa gacan ka geystey jawiga nabadgelyo darrada ah ee ka jira xerooyinka dadka gudaha ku barakacay ee Soomaaliya. ”Hor-Joogayaashu” waa shaqsiyaad iskood isku magacaabay oo ka soo jeeda beelaha waaweyn ee deegaanka degan isla markaana xiriir la leh ciidamada nabadgelyada iyo maleeshiyaadka maxalliga ah, kuwaas oo ka arrimiya dhinacyada muhiimka ah ee nolosha barakacayaasha, oo ay ku jiraan amniga, goobta xerada/deegaanka, iyo diiwaangelinta barakacayaasha si ay u helaan gargaarka bani’aadamnimada.[29] “Hor-Joogayaasha” waxay u dhaqmaan sidii iyagoo ah maamulayaasha dhabta ah;[30] ee xeryaha barakacayaasha, badankoodna waxaa lagu eedeeyaa inay ka faa’iideystaan qaybinta gargaarka la gaarsiiyo deegaanada, inta badan waxay lacag kiro ahaan uga qaataan barakacayaasha ay ku andacoodaan inay ilaaliyaan oo matalaan.[31] Iyadoo la eegayo qaab-dhismeedka awoodaha jira iyo qaababka ay “Hor-Joogayaashu” u dejiyaan una maamulaan xeryaha barakacayaasha, iyadoo ay ayna jirin ama ay koobantahay kaalinta ay dowladdu ku leedahay maareyntooda, barakacayaasha ayaa si weyn loo dayacay lagana dhigay kuwo u nugul ka faa’iideysiga iyo xadgudubka.[32] Haweenka iyo gabdhaha barakacayaasha ah ee horeyba ugu sugnaa xaalad nugul ayaa ay ku dhacdaa dhibaatada dulduleellada ilaalinta la xiriira xuquuqda, xorriyadda iyo amniga qofka.[33]

9. Intii u dhexeysey 1dii Janaayo ee 2017 iyo 30kii Sebtembar ee 2018, Waaxda Xuquuqul Insaanka iyo Ilaalinta UNSOM (HRPG) waxay diiwaangelisay kiisaska 29 qof oo ah dadka gudaha ku barakacay (22 rag ah, saddex haween ah, iyo afar carruur ah) kuwaasoo ay booliiska iyo ciidamada kale ee amniga sabab la’aan isaga soo xireen ayna/ama ku hayeen xabsi dheer. Dhammaan kiisaskaas waxay ka dhaceen Puntland. Sagaal iyo toban qof ayaa la sii daayay ka dib muddooyin u dhexeeya hal toddobaad illaa toddobo toddobaad iyagoon wax dacwad ah lagu soo oogin oo aanamaxkamad la soo taagin. Tobanka hartay ayaa la sii daayay ka dib markii la horkeenay maxkamad in ka badan 48 saacadood ka dib markii la soo xirey, weligoodna laguma soo oogin wax dacwad ah; xarigga ayaa socday inta u dhexeysa 11 maalmood illaa 16 bilood. Tusaale ahaan, hal kiis, nin barakace ah oo Soomaali Bantu ah ayaa la qabtay intii uu hawlgal amni ka socday Waqooyiga Gaalkacyo, 22kii bishii Agoosto 2016. Waxaa xabsiga dhexe ee Gaalkacyo lagu hayay 15 bilood isagoon wax dacwad ah lagu soo oogin.

10. Maalintii 22kii bishii Agoosto 2017, ayaa booliska Puntland waxay xireen haweeney Soomaali Bantu ah oo uur laheyd oo ka mid ah dadka gudaha ku barakacay oo la sheegay inay kufsadeen rag hubeysan oo ku labisnaa dirayska ciidamada milatariga iyadoo joogta gudaha xeradeeda barakacayaasha ee ku taalla magaalada Garoowe, Puntland, 20kii bishii Agoosto 2017 iyagoo ku eedeeyay inay dhibka la shhegay inuu gaaray la wadaagtay warbaahinta maxalliga ah. Maxakamadda degmada Garoowe ayaa amartay in iyada iyo ninkeedaba la sii daayo ka dib shan maalmood oo xabsi lagu hayay. Wax dacwad ah laguma soo oogin dadkii ku lugta lahaa soo xiriddeeda.

11. Kooxda Badbaadinta iyo Xuquuqul Insaanka ee UNSOM waxay diiwaangelisay dhacdooyinka ka dhacay goobaha cuntada lagu qaybiyo oo ay isku dubarideen maamulada maxalliga ah muddadii u dhexeysay bilihii Abriil iyo Juun 2017, markaasoo la arkay tirada ugu badan ee

29 Bal eeg, tusaale ahaan, Xuquuqda Aadanaha, Afduubeyaasha Ilaaladayaasha: Xadgudubyada ka dhanka ah Barakaca Gudaha ee Muqdishu, So-malia: https://www.hrw.org/report/2013/03/28/hostages-gatekeepers/abuses-against-internally-displaced-Muqdisho-somalia (markii ugu dambeysay ee la galay boggan 3 Nofeembar 2018).

30 Eeg Isuduwidda Xerada iyo Kooxda Maamulka Maareynta, Tilmaamaha Guddiga Maareynta Xerada, Soomaaliya, para. 2 ka eeg https://reliefweb.int/sites/reliefweb.int/files/resources/61760.pdf (gelitaankii ugu dambeeyay 14 Noofambar 2018).

31 Machadka Rift Valley / Machadka Heritage ee Daraasaadka Siyaasadda, Arrimaha Dhulka ee Muqdisho: Deegaan,, lahaansho, iyo barokac magaalo la isku heysto, 2017, p. 79, http://riftvalley.net/publication/land-matters-mogadishu#.XawSg-gzbIU (gelitaanki ugu dambeeyay 14 November 2018).

32 Eeg, tusaale ahaan, Qaxootiga Caalamiga ah, Hoorjooge iyo Xoog ku saarid : Dadka Barakacay ee Soomaaliya ee Halista ku sugan, 1 Noofembar 2012, ee at https://static1.squarespace.com/static/506c8ea1e4b01d9450dd53f5/t/56ab83608b38d48c8e279637/1454080864 (markii ugu dambeysay ee la aqriyay 11 November 2018).

33 Qodobka 15aad, Dastuurka Ku-meelgaarka ah ee Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya, Agoosto 2012.

dhacdooyinka sida boobka, toogashada aan kala sooc lahayn, iyo isbursiga, taasoo dhalisay khasaaare gaaraya 48 (15 dhimasho iyo 33 dhaawac). Tan waxaa la sheegay inay ugu wacanayd xakameyn xumo dadka isku soo qamaamay inta lagu gudajiray qaybinta cunnada waxaana suurtagal ah inay la xiriirto tababar xumida booliska maxalliga ah iyo ciidamada nabadgelyada iyo wadashaqayntooda ee hay'adaha bani'aadamnimada oo koobnayd si ay ula wadaagaan dhaqannada ugu wanaagsan ee qaybinta iyo xakameynta dadka isku soo qamaama.

12. Barakacayaashu waxay sidoo kale dhibanayaal u ahaayeen Al Shabaab. 16kii Abriil 2017, wiil 17 jir ah ayaa dhintay, laba wiil oo kale (oo da'doodu kala ahayd 13 jir iyo 14 jir) wey ku dhaawacmeen qarax loo adeegsaday walxaha qarxa ee meelaha fog laga hago oo lala beegsanayay kolonyo uu lahaa Barnaamijka Cunnada Adduunka, kolonyadaas oo dhex mareysay goob ay dagganaayeen barakacayaasha oo ku taal degmada Deyniile, Muqdisho. Al Shabaab ayaa sheegatay masuuliyadda qaraxaas, iyagoo sheegay inay beegsanayeen shaqaale ka tirsan  Qaramada Midoobay.[34]

13. Falalka soo noq-noqday ee saarista khasabka ah ayaa uga sii dartay xaaladdii awalba liidatay ee ay ku sugnaayeen barakacayaasha. Barakacayaashu waxay ku noolyihiin xaalad hubanti la'aan deegaaneed oo joogto ah, sida ay ka markhaati kacayaan falalka Khasab ku-saarista ah ee joogtada ah.[35] Waxaa la diiwaan-geliyay sare-u-kaca Khasab-ku-saarista intii u dhexeysay 2018 iyo 2019. Sida ka muuqato Falanqaynta lagu sameeyay Jihada  ee -saarista khasabka ah , ee ay soo saartay Koox-hawleedka qaabilsan Xuquuqaadka Guriyaynta, Dhulalka iyo Hantida, ee hoos tagta Kooxda Badbaadada ee Soomaaliya, waxaa sanadkii 2018 khasab lagu  saaray 313,964 shakhsiyaad, tiradaas oo ka badnayd tiradii lasoo gudbiiyay sanadkii 2017, iyadoo farqiga u dhexeeyana uu yahay 113,688. Falalka Khasab ku saaristu wey sii socdeen ilaa sanadka 2019, markii lasoo gaaray dabayaaqadii bishii April waxaa laga saaray deegaanadooda  114,295 shakhsiyadood. Cel-celis ahaan, waxaa sanad kasta deegaanadooda  laga saarayay 155,000 barakacayaal oo ku sugnaa Soomaaliya lagasoo billaabo sanadkii 2015, iyadoo ce-celis ahaan in ka badan 11,000 kana mid ah dadkaas laga bixinayay meelihii ay ku noolaayeen bil kasta.[36]

14. Magaalada Muqdisho, intii u dhaxeysay 29 iyo 30kii Disember 2017, ciidamada amniga Soomaaliya oo ka kooban Booliska Soomaaliyeed, Ciidanka Xoogga Dalka (XD), iyo Hay'adda Nabadsugidda iyo Sirdoonka Qaranka ayaa fuliyey mid ka mid ah khasab-ku-saaristii ugu ballaarnayd sannadahan ee barakacayaasha xoog looga saaro meelaha ay ka deganyihiin gudaha iyo hareeraha Muqdisho.[37] Waxaa lasoo sheegay in hawlgalkaasi uu saameeyay ugu yaraan 5,807 qoys (oo lagu qiyaasay inay ka koobnaayeen 34,734 shakhsi) falalkaas oo ka kala dhacay 38 goobood oo deegaan u ahayd barakacayaal kuna yaallay deegaano ka tirsan Kilometre 13 oo saaran Waddada isku xirta Muqdisho iyo Afgoye.[38]

15. Guddi uu dhisay Maamulka Gobolka Banaadir bishii Febraayo 2018 si uu baaritaan ugu sameeyo  ka saarista xoogga loo adeegsado, ayaa warbixin guud soo saaray bishii April 2018 wuxuuna xaqiijiyay in awood aan sharci ahayn la adeegsaday xilli [barakacayaal] laga saarayay halkii ay deganaayeen, lana burburiyay  hanti ay lahaateen barakacayaal iyadoo lasoo sheegay

34 Eeg qoraalka Al Shabaab ee 16 Abriil 2017 sheegashada mas'uuliyadda weerar miinada ah oo lala beegsaday shaqaale Qaramada Midoobay ah kolonyo ku sugnaa agagaarka K13 ee degmada Deyniile) at http://somalimemo.net/articles/6814/Faah-Faahin-Weeraro-Isugu-Jira-Qaraxyo-iyo-Duqeymo-Oo-Ka-Dhacay-Muqdisho-iyo-Duleedkeeda (Markii ugu dambeysay ee la akhriyay 11 Noofambar 2018).

35 See, for instance, Amnesty International, No place like home. Returns and relocations of Somalia's displaced, February 2014, at www.amnesty.org/en/documents/AFR52/001/2014/en/ (Markii ugu dambeysay ee la akhriyay boggan 3 October 2018).

36 Report of the Under-Secretary General for Humanitarian Affairs and Emergency Relief Coordinator, S/2018/896, 8 October 2018, para 23, at http://www.un.org/ga/search/view_doc.asp?symbol-S/2018/896 (Markii ugu dambeysay ee la akhriyay boggan 28 November 2018).

37 kani waxay ahayd saarid ugu weyn ee khasab ah ee barakacayaasha sannadihii ugu dambeeyay. Waxay ka dhacday degmada Kaxda. Ka eeg Golaha Noorwiijiga, barta internetka ee ah: http://reliefweb.int/sites/reliefweb.int/files/resources/back-to-square-one-28post-eviction-assesment-in-somalia29.pdf Tirada saxda ah ee ciidamada amniga ee ku lug leh howlgalka ayaan la ogeyn, laakiin macluumaadka la helayo ayaa sheegaya in ay ku jiri karaan boqolaal qof .

38 Hay'ada Qaxootiga Noorwiijiga, 12ka Diseembar 2018, oo https://reliefweb.int/sites/reliefweb.int/files/resources/back-to-square-one-28post-eviction-assessment-in-somalia29.pdf (Markii ugu dambeysay ee la aqriay boggan 16 Oktoobar 2018).

in 4,220 qoys [25,320 qofood] ay hoy la'aan noqdeen. Guddigu wuxuu intaas sii raaciyay in xuquuqdii xaal-marinta waxtarka leh aan la hirgelin. Guddigu wuxuu warbixintiisa kusoo gabagabeeyay "... in talaabooyin ay qaadeen milkiileyaasha dhulalka iyo maamulada deegaanka iyagoo adeegsanaya hantida dowladda federaalka ah ama dowladda hoose (ciidanka booliska Soomaaliyeed, ciidamo militari ah iyo ciidamo goboleedyo) 29 ilaa iyo 30kii Diseembar 2017 ay ku xad gudbeen xaqa barakacayaashu ay u leeyihiin inay helaan nolol, bed-qab iyo badbaado hantiyadeed. Guddigu wuxuu hoosta ka xarriiqay in falalkaasi ay aad u cuuryaamiyeen adadkeysigii iyo la-qabsigii jawiga ee bulshooyinkaas ay awooddooda iyo dhaqaalohooduba xaddidanyihiin si ay ula tacaalaan xaaladdooda."[39]

16. Dowladda Federaalka ah ee Soomaaliya, iyadoo gacan ka heleysa Qaramada Midoobay iyo beesha caalamka, waxay ku hawlanayd Barnaamijka Xalka Waara ee loogu talo galay Barakacayaasha, barnaamijkaas oo iskugu jira "gargaarka isku dhafan, horumarin, hanaan nabadayn iyo dowlad-dhisid."[40] Waxay dadaallo dhinacyo badan ku bixisaa sidii xalka muddada fog loogu heli lahaa barakacayaasha waxna looga qaban lahaa sugnaanta iyo hubantida deegaaneed, badbaadin iyo horumarinta magaalooyinka.[41] Barnaamijku wuxuu rajaynayaa in la gaaro marxalad barakacayaashu si iskood ah ugu laabtaan deegaanadii ay asal ahaan kasoo jeedeen iyo in uu abuurmo is-dhexgal bulsho.[42] Dowladda Federaalka ah waxaa kale oo ay ku hawlantahay dhamaystirka Siyaasadda Qaran ee Qoxootiga Soo Laabanaya iyo Barakacayaasha (Siyaasadda).[43] Taas oo hadda hor-taallaa Golaha Wasiirada ee Dowladda Federaalka ah si uu u ansixiyo. waxay dhiiri-gelinaysaa ka-qaybqaadashada qoxootiga soo laabanaya iyo barakacayaashu ay ka qaybqaataan arrimaha danta guud iyo dhamaan geedi-socodyada saamaynta ku leh noloshooda, oo ay uga qaybqaataan si lamid ah sida bulshada deegaanka, tallaabtaas oo looga hortegayo takoorka laguna dhisayo is-ogolaansho bulsho. Siyaasaddu waxay taabba-gelinaysaa xaqa ay qoxootiga soo laabanaya iyo barakacayaashu u leeyihiin inay si xor ah u dhexgalaan bulshada oo ay si siman uga qaybqaataan arrimaha bulsho, iyo weliba xaqa ay u yeelanayaan codaynta iyo ka-qaybgalka arrimaha dadweyne iyo kuwa dowladeed.- Siyaasaddu waxaa kale oo ay ugu baaqaysaa hawl-wadeenadeeda inay abuuraan jawi u suurto gelinaya qoxootiga soo laabanaya, barakacayaasha iyo dadka kale ee barakaca uu saameeyay in si loo wada-dhanyahay, lanaga wada qaybqaato loo wargeliyo, lala tashado loona suurto geliyo inay ka qaybqaataan dhamaan go'aannada waaweyn "ee saameynta ku leh noloshooda iyo mustaqbalkooda". Haddii siyaasaddaas la ansixiyo si buuxdana loo dhaqangeliyo, waxay noqon doontaa horumar wanaagsan oo suurto gelin doona in qoxootiga soo laabanaya iyo barakacayaashu ay cod ku yeeshaan hawlaha nabadaynta iyo dowlad-dhisidda ka dhex socota bulshooyinkooda.

17. 22kii Janaayo 2019, Maamulka Gobolka Banaadir ayaa magaalada Muqdisho ku daah-furay Siyaasadda Barakacayaasha oo qayb ka ahayd qorshaha istiraatiijiyadeed ee Maamulka Gobolka Banaadir ee muddada u dhexeysa 2018-23. Maamulka Gobolka Banaadir wuxuu soo bandhigay siyaasaddan oo ah Siyaasad la jaan-qaadaysa Nidaamka Horumarinta Qaran ee 2017-2019, isagoo tilmaamay in loo sameeyay Siyaasaddan sidii ay waxqabad isku-jaan-go'an

39 Maamulka Gobolka Banaadir, 29-30 Disembar 2017, Warbixinta Guddiga sarridda khasabka ah, http://www.globalcrrf.org/crrf_document/29-30-december-2017-forced-evictions-committee-report-april-2018/ (gelitaanki ugu dambeeyay ee boggan 16 Oktoobar 2018).

40 La-Taliyaha Gaarka ah: Xalka waara ee loogu talagalay dadka soo barakacay ee ku nool Soomaaliya waxay u baahan yihiin isku-duubnaan bini'aadannimo, horumar, qaab nabadeed, https://unsom.unmissions.org/special-advisor-durable-solutions-displaced-persons-somalia-require-combined-humanitarian, (markii ugu dambeysay ee la galay boggan 15 Noofambar 2018).

41 Lataliye gaar ah: Xalka waara ee loogu talagalay dadka barakacay ee ku nool gudaha Soomaaliya waxay u baahan yihiin isku-duubnaan bini'aadannimo, horumar, qaab nabadeed, https://unsom.unmissions.org/special-advisor-durable-solutions-displaced-persons-somalia-require-combined-humanitarian (ugu dambeysay ee la galay boggan 6 Noofambar 2018).

42 Qaab-dhismeedka Hay'adda Dhex-dhexaadka ah ee Hay'adda (IASC) Qaab-dhismeedka Xalka Dheeraadka ah ee loogu talogalay Dadka Gudaha Ku Barokacay https://www.unhcr.org/50f94cd49.pdf (gelitaankii ugu dambeeyay ee boggan 13 Noofambar 2018).

43 Qabyo-tirka Siyaasadda Qaranka ee Qaxootiga iyo Dadka Gudaha Ku Barokacay (IDPs), Dowladda Federaalka ee Soomaaliya, Luulyo 2019.

oo isku dubaridan ugu fidin lahayd dhibaatada heysata barakacayaasha ku sugan Muqdisho.[44] Intaa waxaa sii dheer, bishii Janaayo 2019, Maamulka Gobolka Banaadir wuxuu albaabada u furay Xafiiska Xalalka Waara si uu u hirgeliyo siyaasadda barakacayaasha ku sugan Muqdisho iyadoo ujeeddada weyn ee laga leeyahay ay tahay "in la abuuro gobol barwaaqo ah oo laga wada faa'iideysto, halkaas oo dadka baraka uu saameeyay ay ka helayaan adeegyada asaasiga ah, koboc dhaqaale, ayna si buuxda uga qaybqaadan karaan dhamaan heerarka dowladda."[45]

18. Nabadgelyo-xumada kasii jirta deegaanadii ay asal ahaan ka yimaadeen barakacayaasha, iyo weliba gargaagka bani'aadanimo iyo fursadaha soo-saarashada nolol-maalmeedka oo xaddidan, ayaa heerka dib-u-laabashada iskeed ah waxay ahayd mid aad u hooseysa.[46] Fursadda is-dhexgalka ee heer deegaan, ayaa aad u soo jiidaneysa barakacayaasha, sida ay ku tilmaameen 47 boqolkiiba dadka barakacayaasha ah ee ku sugan Muqdisho daraasadda lagu sameeyay sanadkii 2016.[47]Si kastaba ha ahaatee, waxaa caddaatay in arrintaas aan laga miro dhalin karin, sida ay muujiyeen tiro badan oo barakacayaal ah oo soo barakacay sagaashameeyadii welina ku nool xeryaha barakacayasha ee ku yaal Muqdisho.

19. Inkastoo barakacayaashu ay yihiin qayb weyn oo kamid ah bulshada Soomaaliyeed, haddana muddadii u dhexeysay 2016-17, waxay si joogto ah walaac uga muujiyeen faquuqa ay kala kulmeen geedi-socodkii doorasho. Faquuq, takoorid iyo heyb-sooc bulsho ayaa lasoo sheegay inay si gaar ah ugusoo noq-noqdeen barakacayaasha kasoo jeeda beelaha laga tirada badanyahay iyo kooxaha dhaqan ahaan la faquuqo, amaba waayay beel difaacda maadaama ay kasoo hayaameen deegaanadii ay asal ahaan kasoo jeedeen ayna soo degeen deegaano ay ku badanyihiin beelo kale.[48]

44 SiyaasadA Maamulka Gobolka Banaadir ee Dadka Gudaha Ku Barokacay ee Magaalada Muqdisho - ayaa bilaabmay 22 Janaayo 2019.

45 https://dsu.so/about/ (Markii ugu dambeysay ee la galay boggan 4 Marso 2019).


46 Eeg Warbixinta Xog-hayaha Guud ee Soomaaliya, S / 2018/800, 4 Sebtember 2018, para. 96, oo ah https://undocs.org/S/2018/800 (Markii ugu dambeysay ee la galay boggan 14 Noofambar 2018).

47 Barakaca Gudaha ah ee ka soo baxay Warbixinta Muqdisho, Abriil 2016, p. 48, https://www.jips.org/jips-publication/profiling-report-Muqdisho-somalia-2016/ / (Markii ugu dambeysay ee la galay boggan 6 Noofambar 2018).

48 Bangiga Caalamiga ah ee Dib-u-dhiska iyo Horumarinta, Warbixinta Saboolnimada Soomaaliya ee 2016, Warbixinta No: AUS19442, p. 23, oo ah https://reliefweb.int/sites/reliefweb.int/files/resources/Output-P160456-v7_0.pdf (markii ugu dambeysay ee la galay boggan 3-da Diseembar 2018). Natiijooyinka shilalka saboolnimada waxaa lagu tilmaamaa Soomaalida ku nool deegaamada Dadka Barakacayaasha ah.

# 2. KA-QAYBGALKA BARAKACAYAASHA EE ARRIMAHA DANTA GUUD

## 2.1 Natiijooyinka ugu muhiimsan ee la xiriira xuquuqda kaqeybgalka arrimaha danta guud



Creation Date: 30 April 2019 Source: United Nations Assistance Mission in Somalia (UNSOM)

20. Hogaamiyaasha bulshada iyo oday dhaqameedyadu waa udub dhexaadka umadda Soomaaliya marka loo fiiriyo arimo badan oo ay ka mid yihiin xallinta khilaafaadka dhaqanka, nabadeynta iyo dib-u-heshiisiinta, geedi socodka doorashooyinka iyo gaarsiinta kaalmooyinka bina-aadamnimada. Natiijooyinka sahanka ayaa muujinaya jawaab bixiyaasha Barakacayaashu ay u arkaan in uu xaddidanyahay ka-qeybgalkooda wadahadalada ay la yeelanayaan hogaamiyeyaashooda bulshada ee maxalliga ah, arrimahaas oo ay u arkaan inay noloshooda si gaar ah muhiim ugu yihiin. Todobaatan iyo laba boqolkiiba jawaab-bixiyeyaasha waxay sheegeen in Barakacayaashu aysan waligood isku dayin ama mararka qaar ay la xiriirin hoggaamiyeyaashooda bulshada, odayaasha beelohooda iyo hoggaamiyaasha bulshada ee maxalliga ah ee hormuudka u ah bulshada ay martida u yihiin. Tiro xoogaa yar ka badan afar meelood hal meel ee jawaab-bixiyeyaasha (27 boqolkiiba) waxay caddeeyeen in Barakacayaasha inta badan ay ka-qeybgalaan wadahadalada ay la yeeshaan hogaamiyayaashooda maxalliga ah.[49]

21. Sharaxaadda laga bixin karo jawaab-celintaan ayaa noqon karta in haweenku ay tiro ahaan gaarayaan 46.39 boqolkiiba jawaab-bixiyeyaasha oo u dhigma, in haweenka iyo carruurtu ay yihiin boqolkiiba 81.54 (dumarka qaangaarka ah 20.94 boqolkiiba iyo carruurta 60.6 boqolkiiba)

49 Ma jiro kala duwanaansho weyn oo u dhexeeya kooxaha qabaa'ilka, IDPs iyo kuwan IDP-ga aheyn iyo ragga iyo haweenka jawaab bixiyeyaasha ah. Tusaale ahaan, 25 boqolkiiba jawaabeyaasha haweenka waxay sheegeen in barokaceyaasha ay inta badan lug ku yeeshaan wadahadalada ay la leeyihiin hogaamiyayaashooda maxalliga ah.

ee dadka bara-kacayaasha ah;[50] iyadoo dhaqan ahaan bulshada Soomaaliyeed dhexdeeda ay haweenka iyo carruurtu si kooban u helaan fursado ay uga qayb-qaataan geedi-socodyada wada-tashiga iyo go'aan qaadashada ku saabsan arrimaha muhiimka ah ee bulshada. Waxaa kale oo arrimahaas sabab u noqon kara doorarka dhaqanka ee ku aaddan jinsiga iyo kala qeybinta shaqada ee dowladda / waaxda gaarka loo leeyahay–tusaale ahaan: haweenka waxay daryeelaan carruurta waxayna mas'uul ka yihiin howlaha guriga. Ku dhawaad kalabar qoysaska barakacayaasha (47 boqolkiiba) waxaa hormuud u ah haween;[51] taas oo culeys dheeri ah saareysa haweenka oo mar ah hooyooyin marna ah kuwa debera nololsha qoysaska. Sidaa darteed wey adagtahay in barakacayaasha daraasadda lagu sameeyay ay ka qayb-qaataan arrimaha bulshada si lamid ah horjoogayaasha bulshada ay martida u yihiin iyo weliba madax beeleedyadooda.

22. Intaa waxaa dheer, iyada oo la eegayo hab-dhaqanka " Horjoogayaasha ",[52] lagama yaabo in Barakacayaashu ay daraasadda lagu sameeyay ay si firfircoon uga qaybgalaan doodaha ku saabsan arrimaha iyaga khuseeya iyo geedi socodka go'aan qaadashada, maadaama taas ay ku kooban tahay tiro yar oo shaqsiyaad ah, una badan rag kasoo jeeda beelaha ugu badan ee deegaanka martida loo yahay. Kooxda Qaabilsan Maaraynta iyo Isu-diwidda Xeryaha Soomaaliya;[53] waxay xaaladdan guud ku soo koobeen sida soo socota: "Xaaladda Soomaaliya, inta badan waxaan jirin xiriir ka dhexeeya maamulka ka arrimiya goobaha xeryaha iyo dadka Barakacayaasha ah. Intaa waxaa dheer, in dadka ku nool xeryaha ay dareemaan in maamulka goobta xerada aanay dheg u dhigin codadkooda, taas oo dareensiisa shakhsiyaadkaas in la takooro aay ay yihiin rajo la'aan."[54]

23. Si kastaba ha ahaatee, "Ilaalinta Albaabka ama horjoogenimo" ma aha sababta kaliya ee keeneysa in uu yaraado ama daciifo xiriirka ka dhexeeya barakacayaasha iyo hogaamiyaasha bulshada martida loo yahay iyo odayaasha beelaha ay kasoo jeedaan barakacayaasha. Jawaab celiyayaasha magaalada Hargeysa, Somaliland, oo ah meesha albaab ilaalintu u muuqato in aysan ahayn mid muhiim ah, waxay xuseen in ay yartahay ka-qaybqaadashada barakacayaashu ay ka-qaybqaataan wadahadalada ay la leeyihiin hogaamiyaasha bulshada / odayaasha beelaha, iyadoo boqolkiiba 67 ay sheegeen in aysan waligood ka qeyb qaadan falanqeynta/ wada hadalada.[55] Jawaabaha laga bixiyay wareysiyada qaarkood ee hoos lagu faah-faahiyay ayaa sharxaya qodobbada kale ee muhiimka ah.

24. Boqolkiiba sideetan iyo afar jawaab bixiyeyaasha ayaa sheegay in barakacayaasha aysan waligood aanay kala hadalin ama mararka qaar ay kala hadleen dhibaatooyinkooda saraakiisha dowladda.[56] Jawaab bixiyaashu waxay sheegeen hab dhaqanka hogaamiyaasha bulshada iyo maamulada maxalliga ah ee ku wajahan barakacayaasha oo uu u muuqdo mid aan iyaga dan la lahayn waxayna taas u arkeen inay caqabad weyn ku tahay ka-qaybgalkooda ku aaddan

50 Waaxda Falanqaynta Cuntada iyo Nafaqada – ee Soomaaliya (FSNAU) / Qorsheha Jawaabta Aadamiga ee Soomaaliya 2019.

51 Kooxda Bankiga Adduunka / Barnaamijka Caalamiga ah ee Barakaca qasabka ah, Falanqaynta Barakaca Soomaaliya, 2014, farq. 5.4, at http://documents.worldbank.org/curated/en/889591468321538763/pdf/932380WP0P12640t0DC0edits009012014.pdf ( (markii ugu dambeysay ee la galay boggan 12 November 2018)

52 Waxaa lagu macneeyay "nidaam aan la heyn wax isla xisaabtan iyo daah-furnaan ah, oo Barakacayaal loola dhaqmo sidii badeecad yihiin." Eeg Mark Yarnell, When Push Comes to Shove barakacayaasha soomalida ee kusugan hanjabaada, qaxootiga caalamiga ah at https://www.refworld.org/pdfid/528488ac4.pdf ((markii ugu dambeysay ee la galay boggan 23 November 2018).

53 Kooxda isuduwidda Xeradda iyo Maareynta Xerada Soomaaliya waxay taageeraan isku-duwidda, bixinta iyo kormeerka adeegyada aasaasiga ah ee heer goobta, iyadoo la hubinayo ka-qeybgalka Barakacayaasha iyo bulshada martigelisa. UNHCR ayaa ah Hay'adda Hogaanmisa.

54 Isuduwidda iyo Maareynta Xerada (Kooxda Wadaagga Soomaaliya), Tilmaamaha Guddiga Maareynta Xerada ayaa soo saarey 31 Janaayo 2018, Faqr. 1, at https://data2.unhcr.org/en/documents/details/61760 ((markii ugu dambeysay ee la galay boggan 18 November 2018).

55 Dhanka kale, jawaab bixiyeyaasha boqol kiiba ayaa sheegaya in barakacayaasha inta badan ku lug lahaada ay gaarayaan boqolkiiba 56 magaalada Kismaayo, Jubaland, iyagoo soo jeedinaya in aagagaas, sababa aan si dhaqso ah u muuqan oo u qalma sahamin dheeri ah, barakacayaasha ayaa laga yaabaa iney si aad ah ugu hawlan yihiin iney xiriir la sameeyaan hoggaamiyeyaasha bulshada.

56 Boqolkiiba Sideetan iyo lix haweenka jawaab bixiyeyaasha waxay sheegeen in barakacayaashu aysan waligood ama mararka qaar kaliya ay kala hadlaan arrimaha saraakiisha dowladda.

arimaha bulshadooda. Arday jaamacad dhigta oo ku sugan Muqdisho ayaa soo jeediyay oo yiri “Barakacayaasha looma oggola inay la kulmaan [saraakiisha] Dwoladda sababtoo ah [Barakacayaasha] looma tixgaliyo inay yihiin dad muhiim ah.”

25. Jawaabeyaasha qaarkood waxay tilmaameen in mas’uuliyiinta dowladda ay la kulmaan Barakacayaasha keliya marka ay rabaan inay wax ku helaan. Tusaale ahaan, gobolka Awdal, Somaliland, halkaas oo lagu qabtay doorashooyin heerar kala duwan leh, jawaab bixiyeyaasha barakacayaasha ah ayaa sheegay in waqtiga kaliya ee ay arkeen masuuliyiinta dawlada hoose ay ahayd markii doorashadu soo dhawaatay, oo aanay kadib markale arag.

26. Iyadoo aan loo eegin ku lug lahaanshaha dhabta ah ee mas’uuliyiinta, jawaabaha sahankan ayaa tilmaamay in barakacayaashu aysan dareemin baahidooda fiiro loo lahaaday: boqolkiiba 80 dadka jawaabay waxay sheegeen in maamulada ka jira deegaannada aysan dhageysan waxa Barakacayaasha sheegayaan ama ay dhageystaan kaliya mararka qaarkood. Mid ka mid ah dadka u ololeeya arrimaha bulshada Soomaali Bantu oo ku sugan magaalada Muqdisho ayaa arrintan u sababeeyay laba sababood oo isla xiriira, isagoo tilmaamay in “qofna uusan dhageysanaynin bara-kacayaasha maadaama aysan cod lahayn. Sidoo kale fursad looma siiyo iney gaaraan xafiisyada dowladda.” Nin kamid ah barakacayaasha oo ku sugan Muqdisho ayaa raaciyay “Barakacayaasha looma ogola xitaa inay hadlaan fursadona looma siiyo inay hadlaan. Jawaab-bixiyeyaal kale ayaa bixiyay aragti taas kasii rajo xun marka la eego jawaab-bixiyayaasha dadka barakacayaasha ah ee ku sugan gobolka Galgaduud, Galmudug, oo sheegtay “in [maamuladu] uu dhageystaan [Baraakcayaasha] laakiin aanay hadalkooda raacsiinin ficil.”

27. Intaas waxaa sii dheer, waxay u muuqatay in uu jiro dareen guud oo ah maqnaanshaha mas’uuliyadda matalaad ee maamulada: in ka badan kalabar jawaab-bixiyeyaasha (52 boqolkiiba) waxay caddeeyeen in saraakiisha dowladda ee deegaanada barakacayaasha aanay matalin barakacayaasha, halka sedex meelood meel ay sheegeen inay matalaan Barakacayaasha waqtiyada qaarkood.[57] Marka la eego jawaabaha bixiyeen bulshooyinka sheegay beelaha ay kasoo jeedaan, jawaabeyaasha beelaha Bantu ee Soomaaliyeed waxay muujiyeen aragtiyo diidmo u badan marka la barbar-dhigo celceliska jawaab-bixiyeyaasha ay guud ahaan ka bixiyeen arrintan: boqolkiiba 59 boqolkiiba waxay sheegeen in mas’uuliyiinta maamulaada deegaanka aanay matalin barakacayaasha. Inta badan jawaab-bixiyeyaasha beelaha Bantu ee Soomaaliyeed ayaa khibraddoodu waxay ka turjumaysaa inay yihiin koox kamid ah kooxaha aadka loo faquuqo looguna takooro Soomaaliya.[58]

28. Sal-kicinta lagasoo sal-kiciyay deegaanadii ay asal ahaan kasoo jeedeen, waxay cawaaqib ku yeelatay dhinac kasta ee nolosha dadka soo barakacay iyo ku-naaloonshaha ay ku naaloonayaan xuquuqdooda iyo weliba maqaamkooda sharci maadaama ay yihiin muwaadiniin Soomaaliyeed. Taasi waxaa badanaa ka dhasha natiijooyin horseeda heerka badbaadinta uu hooseeyo. Tusaale ahaan, marka uu meesha ka maqanyahay nidaam cadaaladeed oo rasmi ah isla markaasina si buuxda u shaqaynaya, xeer jajabka dhaqanka (*xeer*) ayaa aad loo adeegsadaa kaas oo noqda habka sharci ee ugu muhiimsan ee lagu xalliyo khilaafaadka. Barakacayaasha kasoo hayaamaya qaybaha kale ee dalka waxay kusoo dhici karaan meel eber ah o waxay arkayaan in

57 Kaliya tiro yar (15 boqolkiiba) jawaab bixiyeyaasha ayaa u arkay in saraakiisha dawlada hoose ay metelaan Barakacayaasha.

58 Eeg Golaha Qaxootiga Noorwiijiga, Macluumaadka asalka ah ee Dadka Gudaha Ku Barokacay ee Soomaaliya, 10kii Luulyo 2002, halkan https://reliefweb.int/report/somalia/background-information-idp-situation-somalia (Markii ugu dambeysay ee la galay boggan 26 Noofambar 2018); hey’ada ilaalinta Xuquuqda Aadanaha, La haystayaasha waardiyayaasha: xadgudubyada ka dhanka ah barakacayaasha ee Muqdishu, Soomaaliya, Maarso 2013,faqr. 26, oo ah https://www.hrw.org/sites/default/files/reports/somalia0313_ForUpload.pdf (Markii ugu dambeysay ee la galay boggan 26 Noofambar 2018); Mohamed A. Eno and Abdi M. Kusow, faquuqa iyo iyo heysooca cadaalad darada ah ee soomaliya, Journalka Daraasaadka Soomaaliyeed 1 (2014): https://lib.dr.iastate.edu/cgi/viewcontent.cgi?article=1007&context=soc_las_pubs(Markii ugu dambeysay ee la galay boggan 26 Noofambar 2018). Xubin ka tirsan Aqalka Hoose ee baarlamaanka Federaalka ayaa khudbad ka jeediyay baarlamaanka magaalada Muqdisho 24-kii Sebtember 2018, isaga oo dalbaday in la joojiyo takoorka lagu hayo bulshada Soomaaliyeed ee Bantu. https://www.radiodalsan.com/en/2018/09/24/end-somali-bantu-discrimination-mp-nuur-tells-parliament/ (Markii ugu dambeysay ee la galay boggan 18 Noofambar 2018).

aanay qayb ka ahayn *xeer* dhaqameedka bulshada deegaanka martida loo yahay.[59] Puntland, waxaa la ogaaday in oday dhaqameedyadu ay wajaheen “caqabadda wax ka qabashada arrimo dambiyadeed iyo iska-hor-imaad ka dhashay muran dhexmaray muhaajiriin Itoobiyaan ah iyo Barakacayaal kasoo jeeda Koonfurta Soomaaliya, kuwaas oo aan xeer wadaag la ahayn beelaha Puntland (taas oo macneheedu yahay in Barakacayaashan aanay wada-shaqayn kala dhaxayn beelahaan si go’aan looga gaaro arrimohooda sharci) maadaama Barakacayaashu aanay qayb ka ahayn *xeerka*.”[60]

29. Ka sokow cabashooyinka ku saabsan matalaad la’aanta mas’uuliyiinta dowladda hoose, natiijooyinka ayaa tilmaamaya eexasho iyo u hiilin beelo gaar ah oo ay ku kacaan mas’uuliyiinta dowladda. Wadar ahaan, ku dhowaad seddex meelood labo meel dhamaan jawaab bixiyeyaasha (64 boqolkiiba) waxay aaminsanyihiin in mas’uuliyiinta dowladda ee deegaanada ay ku suganyihiin ay inta badan matalaan ama mararka qaar ay matalaan beelohooda oo kaliya, taas oo guud ahaan iska noqota beesha ugu badan deegaanka martigelliyay Barakacayaasha.[61]

30. Marka la eego jawaabaha ay bixiyeen jawaabbixiyayaasha beelahooda caddeeyay, kuwa ka soo jeeda Beesha Soomaaliyeed ee Bantu waxay muujiyeen aragtiyo aan wanaagsaneyn , iyadoo boqolkiiba 71 ay sheegeen in mas’uuliyiinta dowladda ay matalaan beelohooda oo keliya. Jawaab-bixiye barakacayaasha ka tirsan oo ku sugan magaalada Baydhabo ee Dowlad Goboleedka Koonfur Galbeed, ayaa qaabka awooda dalka loo wadaago xilligan la xiriiryay nin-jecleysi, wuxuuna tilmaamay in “dowladdu ku dhisantahay nidaamka 4.5 sidaas darteedna xubnaha dowladda ay matalaan beelahooda oo kaliya.”[62] Intaa waxaa sii dheer, Barakacayaasha, oo ah koox tilmaan-wadaag iyo xaalad-wadaag ah, ayaa dibad-joog ka ah habkaan awood-qaybsi ee siyaasadeed ee ku salaysan 4.5, taas oo sii fogeysa iyaga. In kasta oo nidaamka 4.5 uu saldhig u ahaa awood-qaybsiga lagasoo billaabo sanadkii 2000, dadka qaarkood ayaa ku dooday in nidaamkaasi aanu ku filanayn dammaanad-qaadka matalaad ballaaran oo matalaysa danaha dhammaan daneeyeyaasha Soomaaliya ee hawsha wada leh, sidoo kale, nidaamkaas ma damaanad qaadayo ka-qaybgal siyaasadeed oo loo dhan yahay.[63] Sida muuqata, tan macnaheedu waa in Barakacayaasha, oo leh xaalad gaar ah maadaama ay yihiin koox dad ah, aanay lahayn cid ku matasha xaaladaha iyo geedi-socodyada heer deeegaan iyo heer dowladeed maadaama hawshu ku salaysantahay heyb beeleed.[64]

31. Eexashadani waxay saameyn weyn ku yeelan kartaa barakacayaasha, maaddaama mas’uuliyiinta dowladda hoose ay yihiin, iyadoo mas’uuliyado kalena ay saaranyihiin, mas’uuliyiinta ugu horreyso ee waajibku saaranyahay, loogana baahanyahay inay si dhexdhexaadnimo leh u bixiyaan adeegyada lagama maarmaanka ah, oo ay ku jiraan gargaarka bani’aadamnimada. Marka barakacayaashu ay ka qaxaan deegaanadii ay kasoo jeedeen, waxay inta badan degaan goobo iyo deegaano ay beelohoodu ku yaryihiin, waxayna ku danbeeyaan nolol ka hooseeysa bulshada inteeda kale, xataa haddii ay tiradoodu badantahay.

32. Aragtida ah in mas’uuliyiinta dowladda aanay matalin barakacayaasha ayaa ah aragti ku badan barakacayaasha ku barakacay deegaanada u dhow halka ay asal ahaan kasoo jeedaan, sida

---

59 Eeg Gundel J. iyo Dharbaxo A. A., Mashaqada ‘Oday’: Doorka Qaab dhismeedka Dhaqameed ee Amniga, Xuquuqda, Sharciga iyo horumarka Soomaaliya, Golaha Qaxootiga deenishka, Noofambar 2006, p. 24, barta https://logcluster.org/sites/default/files/documents/Gundel_The%2520role%2520of%2520traditional%2520structures.pdf (Markii ugu dambeysay ee la galay boggan 22 Noofambar 2018).

60 Isla Tixraacaas. Tani waxay ka dhigan tahay inaysan wax heshiis ah la lahayn qabaa’ilka in arrimaha sharciyeda la xukumo/ la xaliyo.

61 Aragtidaas waxaa leh dhammaan jawaab-bixiyeyaasha marka laga reebo kuwa ku nool gobolka Galgaduud ee Galmudug oo soo bandhigay aragti ka duwan: boqolkiiba 60% waxay caddeeyeen in mas’uuliyiinta dowladda ee aaggooda aysan matalin beelahooda oo keliya.

62 Habka 4.5 ee nidaamka awood qeybsiga siyaasadeed waxaa lagu sharxay sida kor ku xusan(footnote) qodobka 128.

63 Eeg Warbixinta ‘Interpeace Report’ “Taariikhda Dhex-dhexaadinta ee Soomaaliya ilaa 1988” bogga 67 https://www.interpeace.org/wp-content/uploads/2009/05/2009_Som_Interpeace_A_History_Of_Mediation_In_Somalila_Since_1988_EN.pdf (last accessed on 9 June 2019).

64 Barakacayaashu ma laha aqoonsi gooni ah sida barakacayaal, laakiin aqoonsigooda ayaa ah qabiillada ay ka tirsan yihiin.

ka muuqato xaaladda barakacayaasha dadka Bantu ee Soomaaliyeed ee ku sugan agagaarka Jowhar, Hirshabelle. Boqolkiiba sideetan iyo shan jawaab-bixiyeyaasha kasoo jeeda beelaha Soomaali Bantu ee ku sugan agagaarka magaalada Jowhar;[65] ayaa sheegay in mas'uuliyiinta deegaanku aanay iyaga matalin.

33. Xaaladaha qaarkood, farqiga u dhexeeya mas'uuliyiinta dowladda hoose iyo beelaha u badan deegaanka ayaa ah arrin uu mugdi ka jiro. Jawaab-bixiye dumar ah oo kasoo jeedda beelaha Bantu ee Soomaaliyeed kuna sugan Jowhar ayaa sheegtay in xubnaha kasoo jeeda "beelaha u badan deegaanka aanay u ogolayn barakacayaasha iyo dadka laga tirada badanyahay inay ka qayb-qaataan arrimaha [bulshada] ee muhiimka ah." Jawaab-bixiye kale, oo u ololeeya arrimaha dadka Bantu ee Soomaaliyeed kuna sugan Muqdisho, ayaa sheegay in "beelaha waweyn aanay doonayn in is-bedel dhaco."

34. Waxaa jira dareen ah inay jiraan awood la'aan iyo ictiraaf la'aan la iska dhaadhiciyay marka jawaab-bixiyeyaashu ay ka hadlayaan saameynta barakacayaashu ku leeyihiin tallaabooyinka ay qaaddo dowladda. Jawaab-bixiyeyaasha badankood (57 boqolkiiba) waxay tilmaameen in barakacayaasha aysan saameyn ku lahayn waxa ay dowladdu samayso.[66] Aragtida jawaab bixiyaha ee ah in barakacayaashu aanay saamayn ku lahayn tallaabooyinka dowladda ayaa qayb ahaan laga fahmi karaaa – iyadoo sababo kale oo waaqici ah ay jiraan, sida culayska ka heysta soo saarashada nolol maalmeedkooda iyo xaaladda adag ee hubanti la'aanta inay sii deganaanadaan halka ay joogaan – sababta uu gaabiska uga jiro in jawaab bixiyaha barakacayaasha ka tirsan ay ka qayb-galaan shirarka golaha deegaan/dowladda hoose: 78 boqolkiiba jawaab-bixiyeyaasha waxay sheegeen in aanay dhicin amaba ay yartahay in barakacayaashu ka qayb-galaan shirarkaas.[67]

35. Marka la fiiriyo jawaabaha ay bixiyeen dadka tilmaamay beelohooda, aragtiyadooda ayaan wax badan ku kala duwanayn marka ay ka hadlayaan ka-qaybgalka barakacayaasha ee shirarka goleyaasha deegaanada/dowladda hoose; dhamaantood si isku mid ah ayay diidmo uga bixiyeen. Tusaale ahaan, boqolkiiba 95 jawaab bixiyeyaasha isku tilamaamay inay yihiin Hawiye (beesha lagu sheego in ugu badan Muqdisho) waxay sheegeen in barakacayaashu aanay badanaa ka qeybgalin shirarka noocaas oo kale ah, xataa shirarka ka dhaca gobolka Banaadir oo ay ka dhisanyihiin maamuladii degmooyinka oo shaqeeya. Qaar ka mid ah jawaab-bixiyeyaasha ayaa u muuqday in xaddidnaanta ka-qaybgalka barakacayaasha ee shirarka golaha deegaanka/dowladda hoose ay u sababaynayeen fikradda mas'uuliyiinta dowladdu ay ka qabaan barakacayaasha. Marka la eego jawaabaha la bixiyay, mas'uuliyiinta dowladda hoose ayaan aqbalin amaba xataa aan u arkin barakacayaashu inay yihiin jaal hawsha lagula shirkoobo (amaba hawlwadeeno lala tashado) inta lagu guda jiro geedi-socodyada go'aan qaadashada, halkaas oo aragtiyadoodu ay ugu yaraan gacan ka geysan karaan in la qaato go'aanno ku salaysan xog-ogaalnimo.

65 Soddon iyo saddex jawaabeyaal.

66 Jawaab bixiyeyaasha shanta gobol ayaa aragtiyo xun celcelis ahaan dhamaan jawaab bixiyeyaasha: Hiraan, Hirshabelle (75 boqolkiiba), Galgaduud, Galmudug (boqolkiiba 74), Shabellaha Dhexe, Hirshabelle (boqolkiiba 70), Waqooyi Galbeed, Somaliland (69) boqolkiiba) iyo Banaadir (64 boqolkiiba).

67 Boqolkiiba jawaab bixiyeyaasha oo sheegaya in barakacayaashu aysan u badneyn ama ay yartahay ayaa saameyn kasta ka sarreysay celceliska dhammaan jawaab bixiyeyaasha wax ka badan 10 dhibcood gobollada soo socda: Awdal, Somaliland (boqolkiiba 94), Shabellaha Hoose, Koonfur Galbeed Gobol (93 boqolkiiba), gobolka Banaadir (91 boqolkiiba), iyo Galgaduud, Galmudug (boqolkiiba 90). Natiijooyinka ku saabsan Banaadir waa mid si gaar ah muhiim u ah, maadaama Barakacayaasha ku nool Muqdisho ay ka yihiin ku dhawaad 27 boqolkiiba tirada guud ee dadweynaha oo ay suuragal tahay inay tirada ugu badan ay tahay degmooyinka qaar. Marka loo eego sahanka qiyaasta tirada dadka ee Qaramada Midoobay (UNFPA) sahanka tirada dadka ee Soomaaliya (2014), dadka aan barakacayaasha ahayn ee Muqdisho waxaa lagu qiyaasay inay yihiin 1,280,939, halka dadka soo bara kacayna lagu qiyaasay inay yihiin 485,731. Ka eeg https://data2.unhcr.org/en/situations/cccm_somalia Markii ugu dambeysay ee la galay boggan 5 No-vember 2018).

36. In kasta oo boqolkiiba 11 jawaab-bixiyeyaashu ay aamminsan yihiin in Barakacayaashu ay saameyn ku leeyihiin tallaabooyinka ay qaaddo dowladda, ayaa haddana natiijooyinku waxay muujinayaan in Barakacayaashu ay ku sugan yihiin maqaam xoogaa uun (kaliya) ka wanaagsan kan hore oo ay saamayn ugu yeeshaan hawlaha ay beesha caalamku ka fuliso Soomaaliya gudeheeda. Celcelis ahaan, 18 boqolkiiba jawaabeyaasha ayaa sheegay in Barakacayaashu ay saameyn ku leeyihiin bulshada caalamka, iyadoo tirada boqolleyda ah ee dadka sidaas aaminsan ee ku sugan Banaadir ay gaareyso 33. Mid ka mid ah sababaha qayb ahaan xaqiijinaya natiijada dambe ayaa ah joogitaanka xooggan iyo dhaq-dhaqaaqa beesha caalamka ee gobolka Banaadir iyo is-dhexgalka joogtada ah ee ka dhexeeya hay'adaha caalamiga ah (ama hay'adda maxaliga ah shaqooyinka la qabo ) iyo barakacayaasha. Tusaale ahaan, jawaab-bixiye kamid ah barakacayaasha oo ku sugan Muqdishu ayaa muujiyay kalsoonida uu ku qabo muhiimadda uu leeyahay waxtarka barakacayaasha, wuxuuna sheegay in "xogta lagasoo ururiyo barakacayaasha ay gacan ka geysato hawlgallada beesha caalamka."

37. Sidaas oo ay tahay, weli ku dhawaad kalabar jawaab-bixiyeyaasha (49 boqolkiiba) waxay sheegeen in Barakacayaashu aysan wax saameyn ah ku lahayn hawlgalada bulshada caalamka ee dalka ku sugan. Gobollada qaarkood, jawaab celinta diidmada ah wey kasii xoog badnayd sidan: Shabellaha Dhexe, Hirshabelle (67 boqolkiiba), Galgaduud, Galmudug (60 boqolkiiba), iyo Waqooyi Galbeed, Somaliland (65 boqolkiiba). Jawaab-bixiye u ololeeya xuquuqul insaanka oo ku sugan Muqdisho ayaa sheegay in "Barakacayaashu aanay lahayn cod midaysan oo ay arrimohooda ugu doodaan isla markaana ula tagaan beesha caalamka si ay markaas kadib saamayn ugu yeeshaan qadiyaddooda."

38. Ururrada bulshada rayidka ahi waxay hawl-wadeeno muhiim ah ka ahaayeen Soomaaliya ilaa markii ay Dawladdii Dhexe burburtay sanadkii 1991. Waxay door muhiim ah ka cayaareen qaybo kala duwan oo ka mid ah nolosha guud, haddii ay ahaan lahayd bixinta adeegyada aasaasiga ah ee bani'aadanimo (caafimaadka, biyaha, waxbarashada, iyo badbaadinta bulsho) kor u qaadida horumarka iyo u-adkeysiga dhibaatooyinka, iyo nabadaynta iyo badbaadinta iyo kor u qaadista xuquuqda aadanaha. Ka-sokow arrintaas, in kabadan kalabar dhammaan jawaab-bixiyeyaasha (boqolkiiba 54) waxay sheegeen in barakacayaashu aanay u badnayn ama ku yaryihiin inay bulshada rayidka ah kala shaqeeyaan hawlohooda.[68] Dhinaca kale,, gobollada sida Banaadir iyo Baay, Koonfur Galbeed, jawaabaha la xiriira iskaashiga Barakacayaasha kala dhexeeya ururada bulshada ah iyo hay'adaha aan dowliga ayaa ah mid sarreeyay, oo leh 61 boqolkiiba iyo 60 boqolkiiba sid ay u kala horreeyaan.[69] Joogitaanka iyo dhaqdhaqaaqa hay'adaha aan dowliga ahayn ayaa ku xooggan gobolad Banaadir iyo Baay, oo ay joogaan tirada dadka barakacayaasha ah ee ku sugan dalka kuwooda ugu badan..

39. Marka la eego jawaabaha la bixiyay, kalama cadda in gacan-ka-geysashada barakacayaashu ay gacan ka geystaan hawlaha bulshada rayidka ah ay taageero u noqotay ama kor u qaadday ka-qaybgalka barakacayaasha ee arrimaha danta guud ee ka socda deegaanadooda ama bulshooyinkooda dhexdooda. Si kastaba ha ahaatee, waxaa loo qaadan karaa in iskaashigaas aan laga filan karin inuu dhiirrigeliyo kaqeybgalka noocaas ah, marba haddii hawshu ku koobantahay koox dad ah sida "irid-joogayaasha" iyo hoggaamiye dhaqameedyada. Si kasta ha ahaatee, doorka suurtagalka ah ee bulshada rayidka ah ee lagu taageerayo codadka Barakacayaasha ayaa ah wax loo baahan yahay oo ayna aqoonsan yihiin Barakacayaasha. Nin kamid ah barakacayaasha oo jawaab-bixiye ah kuna sugan Borama, gobolka Awdal, waxuu soo jeediyey in "hay'adaha [NGO-yada caalamiga ah] ay ku cadaadiyaan dowladaha sidii aan matalaad ku heli lahayn." Jawaab-bixiye haween ah oo ku sugan isla deegaankaas ayaa si cad u sheegtay sida hawlaha bulshada rayidka ah / NGO-yada ay faa'iido ugu noqon karaan Barakacayaasha: "marka hore, waa in Barakacayaashu midoobaan, markaa kadib ayaa

68 Waa in la ogaadaa in, sida ay sheegayaan warbixinnada, NGO-yo badan oo maxalli ah ayaa ka tarjumaya qaab-dhismeedka qabaa'il ee bulshada iyo, dhowr xaaladood, NGO-yada maxalliga ah waxaa maamula xubnaha qoyska haysta jagooyinka awoodda leh, kana duwan Barakacayaasha, oo ay u badan tahay inay yihiin kuwa ugu badan. qabiilooyinka waaweyn.


69 Oo ay ka mid yihiin jawaabo badan iyo kuwo aad u badan.

codadkeena la ixtiraamayaa. Caadiyan, ma naqaano xuquuqdeena, marka waa in hay'aduhu naga caawiyaan sidoo aan kusoo dhacsan lahayn xuquuqdeena."

40. Marka laga hadlayo ka-qaybgalka heerka deegaanka / bulshada, Barakacayaasha ka qayb-qaatay daraasadda waxay muujiyeen ka qaybgal xooggan oo ay ka qaybgalaan arrimaha deegaanadooda maxalliga ah. Jawaab-bixiyaashu waxay sheegeen in Barakacayaashu ay qayb ka ahaayeen qorshaynta waxyaabaha mudnaanta u leh bulshadooda, haddii ay ahaan lahaayeen arrimaha bani'aadanimada (oo ay ku jiraan asaaska/dhisidda xerooyin cusub, cunno qaybin iyo ka-qeybgalka ololaha fayadhowrka iyo ololayaasha nadaafadda ee xeryaha) ilaa arrimaha horumarinta (oo ay ka mid yihiin abuurista fursado nololeed iyo ganacsiyo yar-yar).

41. Markii su'aal laga weydiiyay tusaalooyin ku saabsan ka qeyb-qaadashada barakacayaasha ee howlaha la xiriira bulshooyinkooda, boqolkiiba 38 guud ahaan tusaalooyinka ay bixiyeen jawaab-bixiyeyaasha waxay tixraaceen howlaha hormarinta ee ka dhex jira bulshada Barakacayaasha iyadoo boqolkiiba 36 ay xuseen arrimaha gargaarka bani'aadanimo ee ka jira deegaanadooda. Jawaabahan ayaa muujinaya in Barakacayaasha la wareystay oo hawlwadeeno heer deegaan ah – suurtogal ay tahay inay qayb ka yihiin hawlo ilaa xad u saamaxaya inay ka baxsadaan gacan ku heynta "irid-ilaaliyeyaasha" ama hogaamiyeyaasha aan caqabad ku ahayn hawlohooda – in kastoo uu hooseeyo heerka wada-shaqayn ee ka dhexeeya mas'uuliyiinta iyo hay'adaha.

## 2.2 Natiijooyinka ugu muhiimsan ee la xiriira xuquuqda ka-qeybgalka siyaasadda




42. Jawaab-bixiyeyaal tiradoodu wax yar ka badantahay kala bar (51 boqolkiiba) waxay sheegeen in barakacayaasha aanay u suurto-gelin amaba aanay dhicin inay doortaan dad ku matala xeryaha ama heer degmo (oo sidoo kale looyaqaano wakiilkooda maxalliga ah), in kasta oo ay jiraan kala duwanaansho juqraafiyeed oo soo ifbaxay.[70] Jawaab bixiyeyaasha badankood ee ku nool Mudug (90 boqolkiiba), Puntland; Baay, Maamulka Koonfur Galbeed (77 boqolkiiba); iyo Jubbada Hoose, Jubaland (76 boqolkiiba), waxay tilmaameen in barakacayaashu ay u

70 Muwaadiniinta reer Somaliland oo ay ku jiraan barakacayaasha ayaa ka qaybgalaya doorashada duqa magaalada iyo xubnaha golayaasha deegaanka ee magaalooyinkooda iyo degmooyinka. Sidoo kale, Puntland, doorashooyin dadban ayaa lagu qabtay halkaas oo ay xubnaha deegaanku doortaan duqa magaalooyinka sida Bosaso laakiin doorka barakacayaasha ayaa la sheegay inuu yaryahay. Soomaaliya inteeda kale oo ay kujirto magaalada Muqdisho, majiraan wax doorasho deegaan ah oo heer kasta ah oo la qabto, waxaana hogaamiyaasha gudaha oo dhan soo magacaabay Dowlada Federaalka Soomaalya ama Dowladaha Xubnaha ka ah Federaalka. Heerka xerooyinka , sahanku wuxuu muujinayaa in Barakacayaasha ay saameyn xaddidan ku leeyihiin doorashada hoggaamiyeyaasha xerada iyo xubnaha guddiga xerada.

suurto gasho ama ay aad suurtagal ugu tahay inay doortaan wakillo maxalli ah. Si kastaba ha ahaatee, inta badan jawaab-bixiyeyaasha meelaha kale kala jooga waxay muujiyeen aragtiyo diidmo ah (aan suurtagal ahayn amay ay yartahay suurtagalnimada) isla qodobkaan: Banaadir (72 boqolkiiba); Waqooyi Galbeed, Somaliland (67 boqolkiiba); Hiiraan (boqolkiiba 73) iyo Shabellaha Dhexe (67 boqolkiiba) Hirshabelle.[71]

43. Marka la eego jawaab-bixiyeyaasha caddeeyay beelaha ay kasoo jeedaan, oo badankood kasoo kala jeeda beelaha Hawiye (60 boqolkiiba) iyo Soomaali Bantu (59 boqolkiiba) waxay sheegeen in barakacayaasha aanay u suurto gelin ama ay ku adagtahay inay doortaan wakiillo maxalli ah. Tani waxay - ugu yaraan qayb ahaan – sharaxaad ka bixin kartaa xaqiiqada ah in kooxahaan ay ku barakeceen deegaano sida Muqdisho oo kale ah oo uu ku xoog badanyahay dhaqanka “albaab ilaalinta”.

44. Boqolkiiba lixdan iyo shan jawaab-bixiyaashu waxay sheegeen in barakacayaasha aanay u suurto gelin ama ay yartahay suurtagalnimada inay la xiriiraan madax dowladeed ee heerarka kala duwan ee dowladda. Xitaa gobolka Banaadir, oo caasimadda Muqdisho ay ku taallo, dowladduna ay si buuxda u deggantahay, boqolkiiba 83 jawaab bixiyaashu waxay sheegeen in barakacayaasha aanay u suurto gelin inay la xiriiraan madax dowladeed ee heerarka kaladuwan ee dowladda.[72]

45. Sababaha qaybta ka qaadanaya xaddidnaanta xiriirka ka dhexeeya mas’uuliyiinta dowladda iyo barakacayaasha la wareystay ayaa noqon kara in barakacayaashu aanay u gudbin karin mas’uuliyiinta dowladda iyo weliba in hay’adaha dowladeed aanay xarumo ku lahayn goobaha ay degganyihiin barakacayaasha. Amniga ayaa sidoo kale ah caqabad weyn. Jawaab bixiyeyaasha barakacayaasha ah ee ku sugan magaalada Marka, ee Dowlad Goboleedka Koonfur Galbeed, waxay xuseen in xaaladda amni ee ka jirta deegaanadooda ay xaddidday xiriirkooda kala dhexeeya mas’uuliyiinta dowladda waxaana taas loo aanaynayaa joogitaanka xooggan ee ay goobta joogaan maleeshiyo beeleedyo iyo hawlwadeeno Al Shabaab ah. Sababta kale ee suurto galka ah ayaa ah in barakacayaasha la wareystay aanay heysanin xog ku filan oo ku saabsan in hay’aduhu ay caawin karaan iyo weliba adeegyada ay ka heli karaan, ama guud ahaan, hawlaha kaladuwan ee ay qabtaan hay’adaha.

46. Marka la eego wada-shaqaynta ka dhexeysa barakacayaasha la wareystay iyo ururada/ xisbiyada siyaasadeed,[73] natiijada cilmi baarista waxay tilmaamaysaa in wada-shaqayntaasi ay xaddidantahay: in kabadan sadex meelood laba meel (69 boqolkiiba) jawaab bixiyeyaasha waxay sheegeen in barakacayaashu aysan u suurto gellin amaba ay yartahay suurtagalnimada inay si toos ah ama si dadban ula xiriiraan ururo ama xisbiyo siyaasadeed.[74] Jawaab-bixiyeyaasha isku tilmaamay inay kasoo jeedaan beelaha Soomaali Bantu (boqolkiiba 83) iyo Hawiye (boqolkiiba 81) waxay u muuqdeen kuwo muujinaya aragtiyo doodmo ah oo ka kulul kuwa ay bixiyeen kooxaha kale marka laga hadlayo suurtagalnimada in barakacayaashu ay si toos ah ama si dadban ula xiriiraan ururo siyaasadeed. Natiijadan waa in loo tixgaliyaa xaaladda Soomaaliya oo dhowaan uun billowday diiwaan-gelinta xisbiyo siyaasadeed[75] iyo iyadoo dhamaan howlaha siyaasadeed iyo hababka awood-qeybsiga waayadii dambe loo maray nidaam beeleedka 4.5, oo ay weheliso ururo siyaasadeed curdun ah.

71 Isku-darka jawaabaha aan suurta galka aheyn iyo kuwa yara suurta galka ah.

72 Isku-darka jawaabaha aan suurta galka aheyn iyo kuwa yara suurta galka ah.

73 Bishii May 2019, wax ka bedelka lagu sameeyay Xeerka Axsaabta Siyaasadda ayaa loo gudbiyay Baarlamaanka.

74 Jawaab bixiyeyaasha gobolada soosocda waxay soo jeediyeen in ku lug lahaanshaha barakacayaasha ururada siyaasada iyo axsaabta xitaa aad u xadidanyihiin: Mudug, Puntland (boqolkiiba 94); Shabellaha Dhexe (89 boqolkiiba) iyo Hiiraan (88 boqolkiiba), Hirshabelle; Shabellaha Hoose, Dowlad Goboleedka Koonfur Galbeed (87 boqolkiiba); Galgaduud, Galmudug (boqolkiiba 83) iyo Jubbada Hoose, Jubaland (75 boqolkiiba).

75 Bishii Disembar 2017. Goobjoog News, Soomaaliya waxay si rasmi ah u diiwaangelisaa xisbiyadii markii ugu horreeysay muddo 50 sano ah, 4 Disember 2017, http://goobjoog.com/english/somalia-formally-registers-first-political-parties-in-50-years/ (markii ugu dambeysay waxaa la la galay boggan 17 Oktoobar 2018).

47. Waqooyi Galbeed, Somaliland ayaa ahayd meesha kaliya ee, marka loo eego jawaab-bixiyeyaasha, wada-shaqaynta lala leeyahay ururada siyaasadeed la sheegay inay ahayd mid wanaagsan: 57 boqolkiiba jawaab-bixiyeyaasha waxay sheegeen in ay suurto gal u tahay ama ay aad ugu suurto gasho inay si toos ah ama si dadban ula xiriiraan ururo ama axsaab siyaasadeed. Sharaxaadda laga bixin karo ayaa ah in nidaamka xisbiyada badan uu ka jiray Somaliland ku dhowaad labaatan sano iyadoo axsaabta siyaasadda ay si joogto ah ugu tartamayeen heerarka kaladuwan [ee dowladda] lagasoo billaabo sanadkii 2003dii, min dowlad hoose ilaa doorashooyin madaxweyne.[76]

48. Dhinacyada kale ee daraasaddu sahmisay waxaa kamid ah ka-qeybgalka barakacayaasha ee geedi-socodyada nabadeynta. Colaadda ayaa ahayd sababta ugu weyn ee sababta barakaca gudaha Soomaaliya,[77] sidaas darted, maadaama barakacayaashu ay ku jiraan dadka ugu badan ee ku waxyeelooba colaadaha, waxay qayb muhiim ah ka noqon karaan geedi-socodka nabadaynta, gaar ahaan marka beelohooda ay colaadda qayb ka yihiin iyo marka wadahadallada nabadeed ay ka dhacayaan goobaha barakacayaasha (sida xaaladda barakacayaasha beelaha Soomaali Bantu ee kasoo jeeda degmada Jowhar ee Shabeellaha Dhexe kuwaa oo ku barakacay isla duleedka magaalada Jowhar). Si kastaba ha ahaatee, boqolkiiba 73 jawaab-bixiyeyaasha waxay sheegeen in aanay u suurto gelin ama ay adagtahay suurtagalnimada inay ka qaybqaataan shirweynayaasha nabadda iyo dib-u-heshiisiinta.[78] Tusaale ahaan, laga soo bilaabo 2013dii, UNSOM HRPG waxay diiwaangelisay ugu yaraan sideed heshiisyo oo waaweyn oo ku saabsan nabadda iyo dib-u-heshiisiinta oo ay saxiixeen beelaha dega Shabeellaha Hoose, Shabellaha Dhexe, Hiiraan iyo Mudug.[79] Dadka rayidka ah ee ku barakacay dagaalada waa laga reebay wadaxaajoodka iyo qaabaynta heshiisyadan, waxaana dhamaan heshiisyadan astaan u wada noqday hirgelin la'aan.

49. In barakacayaasha la wareystay laga fogeeyo [loo diido] ka-qaybgalka geedi-socodyada nabadaynta ayaa macneheedu yahay inay mar kasta u arkaan in geedi-socodyada nabadaynta ay leeyihiin oo kaliya dhinacyada awoodda leh ee aadka u hubaysan ee qaybta ka ah colaadda,[80] arrinkaas oo albaabada u laabi kara ka-qaybgalka siyaasadeed ee mustaqbalka.[81] Taas waxay sababtay, inay sii socdaan faquuqidda iyo barakaca, ayna adkaato in guul laga gaaro xalka waara, oo ay ku jiraan soo laabasho iskeed ah oo la joogtayn karo oo barakacayaashu dib ugu laabtaan deegaanadii asal ahaan ay kasoo jeedeen.

50. Walaacyo kuwaa lamid ah oo ku saabsan ka-qaybgalka xaddidan ayaa laga muujiyay geedi-socodka dib-u-eegista Dastuurka Kumeelgaarka ah, iyadoo boqolkiiba 85 jawaab bixiyeyaasha ay sheegeen in barakacayaasha aanay u suurto gelin ama ay adagtahay suurtagalnimada inay ka qaybqaataan wadatashiyada dib-u-eegista [Dastuurka]. Qaybaha kaladuwan ee barakacayaasha ee la wareystay ayaa ka wada siman argtidan iyadoo aan loo eegeyn halka ay ku suganyihiin, jinsigooda (lab dhegid), inay sheegeen beelaha ay kasoo jeedaan iyo in aanay

---

76 Eeg Guddiga Doorashooyinka Qaranka Somaliland, Natiijooyinka doorashada, at https://www.slnec.com/elections/election-results/ (Markii ugu dambeysay ee la galay boggan 3-da Diseembar 2018).

77 Kooxda Bankiga Adduunka / Barnaamijka Caalamiga ah ee Barakaca qasabka ah, Falanqaynta Barakaca Soomaaliya, 2014,http://documents.worldbank.org/curated/en/889591468321538763/pdf/932380WP0P12640t0DC0edits009012014.pdf (Markii ugu dambeysay ee lahelay 17 Oktoobar 2018). Sidoo kale arag UNDP, Warbixinta Horumarinta Aadanaha ee Soomaaliya 2012: Awood siinta dhalinyarada ee Nabadda iyo Horumarka, farq.33, http://hdr.undp.org/sites/default/files/reports/242/somalia_report_2012.pdf (Markii ugu dambeysay ee la galay boggan 11 Disember 2018).

78 Ma aha wax aan la huri karin aheyn ama aan kadis ahayn: Saamaynta ku Yeelankarta heyb sooca Soomaaliya, Mashruuca isla-Xisaabtanka ee QM-Somalia, Cabashooyinka Qaranka, Khilaafka Maxalliga iyo Al-Shabaab, C. Hurst & Co. (Daabacayaasha) Ltd., 2018 by Michael Keating iyo Matt Waldman, eds., Ee p. 41.

79 Isla Tixraacaas.

80 Donald Steinberg, kursiga barakacaasha ee miiska Dib-u-eegista Muhaajiriinta sida khasabka ah ku barakacay, Lambarka 30, Abriil 2008, p. 70, ka eeg https://www.fmreview.org/sites/fmr/files/FMRdownloads/en/burma/steinberg.pdf (Markii ugu dambeysay ee la galay boggan 19 Noofambar 2018).

81 Mac-hadka [Daraasaadka] Nabadda ee Mareykanka, Arrimaha Barakaca oo Lagusoo Daro Geedi-socodyada Nabadaynta iyo Heshiisyada, Tabarrucaadda Mac-hadka [Daraasaadka] Nabadda ee Mareykanka iyo Hay'adda Brookings, 2010, p. 15.

sheegin, iyo inay barakacayaal yihiin iyo in aanay ahayn.[82] Jawaab bixiye ku sugan Muqdisho ayaa soo jeediyay in haddiii qodobo gaar ah oo ku saabsan xuquuqda Barakacayaasha lagusoo daro Dastuurka ay wax ka tari doonaan horumarinta badbaadadooda.

51. Geedi-socodkii doorasho ee 2016-2017dii wuxuu ahaa marxalad kalaguur siyaasadeed oo lahayd astaamo kooban oo doorasho waxayna soo jiitamaysay labo sanadooda oo lagu jiray wadaxaajoodyo ballaaran.[83] Sahankan wuxuu shaaca ka qaaday in barakacayaasha ay si joogto ah uga cawdeen faquuqa ka dhashay nidaamka beelaha ku saleysan. Daraasadda waxaa lagu ogaaday in tiro kabadan sadex meelood labo meel jawaab bixiyeyaasha (boqolkiiba 68) ay xuseen in barakacayaashu aanay u suurto gelin ama ay adkayd suurtagalnimada inay ka qayb-qaataan geedi-socodkii dooraso ee 2016-2017kii. Jawaab-bixiyeyaasha gobollada qaarkood waxay muujiyeensuurtagalnimo taas ka hooseysa ee ka-qaybqaadashada barakacayaasha ay ka qaybqaateen geedi-socodkaas: Hiraan, Hirshabelle (boqolkiiba 95); Galgaduud, Galmudug (boqolkiiba 94); Shabellaha Dhexe, Hirshabelle (92 boqolkiiba); Bari, Puntland (boqolkiiba 92); Mudug, Puntland (90 boqolkiiba); iyo Jubbada Hoose, Jubaland (boqolkiiba 81).

53. UNSOM HRPG waxay diiwaan-gelisay dhowr qofood oo ay u suurto gashay inay ka qaybqaataan geedi-socodkaas doorasho iyagoo ah ergo doorasho. Mudnaantaas laguma siin sabab la xiriirta xaaladdooda barakac, ee waxay usoo mareen beelaha ay kasoo jeedaan. Inkastoo ay jireen dadaallo loogu olaleynayey in la xaqiijiyo ka-qeybgalka Barakacayaasha iyagoo hal bulsho ah ay ka qaybgalaan geeddi-socodkaas doorasho,[84] ayaa Barakacayaashu aanay ka-qaybqaadanin Madashii Wada-tashiga Qaranka ee Soomaaliyeed taas oo lagu xaqiijiyay in bulshadu si ballaaran uga qayb-qaadato geedi-socodka una gaaraan go'aan wadar-ogol ah oo ku saabsan hanaanka doorasho. Sida ku cad Hagaha Fududeynta ee Madashii Wadatashiga Qaran ee Soomaaliya ee looga arrinsanayay Geedi-socodka Doorashadii 2016kii, waxaa ku qornaa in wadatashiyada "uu qabanayo Guddi Hawleed ayna ka qaybgelayaan wakiilo ka socda goleyaasha [baarlamaan] ee gobolada, odayaasha, bulshada rayidka, horjoogayaasha bulshada, ganacsatada, haweenka, dhalinyarada iyo dadka laga tirada badan yahay". Ma jirin meel kamid ah dokumentigaas muhiimka u ahaa geedi-socodka doorasho oo lagu xusay barakacayaasha.[85]

54. Inkastoo nidaamka 4.5 laga saaray Barakacayaasha, dadka qaar waxay u arkaan, inkastoo aanay sidii la rabay ahayn, in nidaamkaasi ugu yaraan uu dadka la faquuqo siiyay matalaad iyo ka-qaybgal ay ka qayb-galaan geedi-socodyadii nabadaynta iyo dowlad dhisidda ee dalka.[86] Beelaha iyo kooxaha la faquuqo waxay heleen 11 boqolkiiba (31 kuraas oo kamid ah 275ka kursi) ee Aqalka Hoose ee Baarlamaanka Federaalka ee hadda jira,[87] oo ku dhisan nidaamka 4.5. Tani waxay tusaale u tahay sida nidaamkani u xaqiijinayo ka-qaybgelka heerkiisu hooseeyo

82 Su'aashaas lays kama soo weydiinSomaliland sababta oo ah dabeecadda siyaasadeed ee su'aasha iyo dareenka ay xanbaarsantahay.

83 Eeg Warbixinta Dadweynaha ee UNSOM iyo OHCHR: ee Sugida Kaqeybgalka Siyaasadda: Xuquuqda Aadanaha ee hanaanka Doorashada ee Soomaaliya, Agoosto 2018 halkan https://unsom.unmissions.org/sites/default/files/13082018_somalia_report_on_hrv_in_the_electoral_process.pdf (Markii ugu dambeysay ee la galay boggan 29 Meey 2019). Sidoo kale eeg, SOMALIA 2016-2017 Hanaanka xadidan ee doorashada khabiir doorasho ee ka socda EU Warbixinta kama dambaysta ah waxaad ka heleysaa https://eeas.europa.eu/sites/eeas/files/eu_eem_somalia_final_report.pdf (Markii ugu dambeysay ee la galay boggan 29 Meey 2019).

84 Kulan u dhaxeeyay UNSOM, la-hawlgalayaasha caalamiga ah, mas'uuliyiinta dowladda federaalka Soomaaliya iyo kuwa dowlad-gobolleedyada oo ka dhacay magaalada Baydhabo, 23 Juun 2016.

85 Tilmaamaha Fududeeynta Madasha Wadatashiga Qaranka Soomaaliyeed waxaa soo saaray DFS oo hoos imaaneysa hoggaanka Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Federaalka (MoIFA) iyadoo la kaashanayaan Beesha Caalamka ee Soomaaliya. Kulamada NCF waxaa la qabtay intii u dhaxeysay Oktoobar 2015 iyo Janaayo 2016, Muqdisho, Garoowe, Puntland, Kismaayo, Jubaland, Cadaado, Galmudug, Baydhabo, DGKG, iyo Safaaradda Soomaaliya ee Nairobi.

86 *Warbixinta Caalamiga ah ee Xuquuqda dadka laga tiro badan yahay: Warbixinta malahan wax laga beddelo: Dadka laga tirada badan yahay ee la ilaaway ee Soomaaliya, Martin Hill (2010) bogga 14 ee https://minorityrights.org/wp-content/uploads/old-site-downloads/download-912-Click-here-to -download-full-report.pdf (Markii ugu dambeysay ee la galay boggan 8-da Juun 2019.) Warbixinta ayaa sameysay helitaanka in "In kasta oo nidaamka 4.5 uu siiyay beelaha laga tirada badan yahay cod ku yeeshaan go'aan-qaadashada siyaasadeed, way daciiftay oo inta badan lama maqlo iyada oo loo eegi karo sida ay u fashilmatay macnaha guud ee dowladda ku meel gaarka ah [Dowladda Ku Meel Gaarka ah ee Soomaaliya], oo ku jirtay khilaaf joogto ah iyo qalalaase. Waxay gacan ka gaysatay in xuquuqda dadka laga tirada badan yahay la dul dhigo ajandaha caalamiga ah ee dib-u-dhiska laakiin wali aan wax saameyn ah ku yeelan illaa iyo hadda.*

87 Kahor Janaayo 2017, Baarlamaanka Federaalka ee Soomaaliya wuxuu ahaa hal baarlamaan kaliya.

iyo in cod siyaasadeed go'aan gaaris oo ay yeeshaan beelaha la faquuqo inay tahay wax aan jirin oo kale. Tusaale ahaan, Aqalka Sare ee ee Baarlamaanka Federaalka ah ee hadda jira wuxuu leeyahay 54 senetarro ah, kuwaas oo lagu soo doortay doorasho dadban oo ay qabteen Baarlamaannada Dowlad Goboleedyada, wuxuuna leeyahay Aqalkaasi hal senator oo haween ah oo halkaas ku matasha beesha shanaad (beelaha la sheego in laga tirada badan yahay) ee dalka ku nool.[88] Beelaha kale ee waaweyn waxay matalaad fiican ku leeyihiin Aqalka Saree e Baarlamaanka Federaalka: Daarood waxay leeyihiin 17 Senetor, Hawiye 14 senetor, Dir 14 iyo Digil iyo Mirifle, sideed.[89] Haddii habka 4.5 loo adeegsan lahaa dhismaha aqalka sare, tirada senetarrada matalaya beelaha iyo bulshooyinka la faquuqo waxay ahaan lahayd lix.

55. Qaab-dhismeedka Madasha Hoggaanka Qaranka, taas oo ahay hay'ad muhiim u ahayd go'aan ka gaarista hanaanka doorashada 2016, waxay ahayd tusaale kale oo cad oo muujinaya sida maqnaanshaha nidaamka awood qaybsigu u saameeyay beelaha iyo bulshooyinka la faquuqo heyb sooco. Madasha Hoggaanka Qaranka kuma salaysnayn nidaamka 4.5 sidaas darteed, beelaha iyo bulshooyinka la heyb-sooco kuma lahayn wax matalaad ah maadaama xubneheedu ay iskugu jireen Madaxweynaha Dowladda Federaalka Soomaaliya, Madaxweynayaasha Dowlad Goboleedyada, Guddoomiyaha Baarlamaanka Federaalka iyo Ra'iisul Wasaaraha Dowladda Federaalka ah iyo Ku-xigeenkiisa – oo dhamaantood kasoo jeeda beelaha waaweyn.[90] Qaab-dhismeedka baarlamaanada Dowlad Goboleedyada kuma salaysna nidaamka 4.5 maadaama dhammaan beelaha aanay joogitaan siman ama saamayn siyaasadeed oo siman ku wada lahayn dhamaan gobolada. Gobol kasta, waxaa jira beelo la sheego inay ugu tira badanyihiin inkastoo ay jiraan beelo kale oo la deggan iyo in aan laheynin macluumaad la ogolaaday oo ku saabsan tirada dadka iyo sida loo kala degganyahay juqraafi ahaan, arrintaas oo adkenaysa caqabadda ka jirta sheegashada tira-badnida.[91]

56. Faa'iidada iyo khasaaraha nidaamka 4.5 iyo in uu yahay hanaan awood qeybsi oo macquul ah oo loo adeegsan karo geedi-socodyada nabadaynta iyo dowlad dhisidda ayaa dood ka dhex abuurtay dadka Soomaaliyeed iyo khubarada ku takhasustay arrimaha Soomaaliya. In kasta oo dadka qaar ay soo jeediyeen in nidaamkani uu xaqiijinayo habka ugu yar ee ka-qaybgalka siyaasadeed iyo codka dadka iyo kooxaha la heyb-sooco,[92] ayaa haddana dadka qaar waxay ku tilmaameen nidaamkan in uu yahay "qaab dhismeed dowladeed oo ku dhisan hanaan heyb-

88 Senator/ xildhibaand Fartuun Cabdulqaadir Faarax Karaama oo ka soo jeeda dowlad-gobaleedka Hirshabelle.

89 In kasta oo Digil iyo Mirifle ay ka mid yihiin beelaha waaweyn, hadana waxay heleen sideed kursi oo ka soo jeeda gobalka Koonfur Galbeed (7) iyo hal kursi oo ka soo jeeda Jubaland. Saddexda beelood ee kale ee waa weyn waxay heleen kuraas badan oo ka kala yimid laba gobol ama in ka badan mid kastaa wuxuu ka helay Dawladaha xubinta ka ah Dowlada Federaalka. Tusaale ahaan Daarood waxay kuraas ka heleen Puntland, Jubaland iyo Somaliland (Gobollada Sool iyo Sanaag). Waa in si gaar ah loo xusaa, in kasta oo Digil iyo Mirifle ay yihiin beel weyn, haddana taariikh ahaan la takooray inkasta oo lagu matalay nidaamyada siyaasadeed ee is-daba jooga ee dalka. Qabiilku aad baa loogu matalaa xeryaha dadka soo bara kacay, xubnahoodu ay weheliso Soomaali Bantus waxay ahaayeen dhibbanayaashii ugu badnaa abaartii 1992 iyo sidoo kale abaartii 2011/2012 (eeg Majid, N., McDowell, S., Dhinacyada qarsoon ee macaluusha Soomaaliya. Haqab-beelka Cuntada Adduunka (2012). Digil iyo Mirifle. waxaa lagu tilmaamay inay yihiin ' dhibanayaashii aamusnaa'. Waxaa kaloo la liiday sidii qabiilooyinka kale ee la fogeeyey iyo kooxaha sida Somali Bantus oo laga tiro badan yahay. Sababaha kale ee jira ayaa waxay noqon karaan lahjaddooda (Maay) iyo qaab nololeedkooda nololeed ee ka duwan marka loo eego beelaha kale ee reer guuraaga ah sida Hawiye, Daarood iyo Dir.

90 Eeg Warbixinta Dadweynaha ee UNSOM iyo OHCHR: Sugida Kaqeybgalka siyaasadeed: Xuquuqda Aadanaha ee hanaanka doorashada Soomaaliya, Agoosto 2018 halkan https://unsom.unmissions.org/sites/default/files/13082018_somalia_report_on_hrv_in_the_electoral_process.pdf p.21 p.21 (Markii ugu dambeysay ee la galay boggan 29 Meey 2019) .

91 Wakiilka qabaa'ilka laga tirada badan yahay ayaa ugu sarreeya Dowlad goboleedka Hirshabelle iyadoo wadarta 99 xubnood ee baarlamaanka (xildhibaano) ay 17 wakiil u yihiin qabiilooyinka la laga tirada badan yahay (17 boqolkiiba). Jubaland gudaheeda, marka loo eego 75 xildhibaano ah, sideed waxay matalaan laga tirada badan yahay (11 boqolkiiba). Maamulka Koonfur Galbeed, guud ahaan 145 xildhibaano ah, 13 waxay matalaan qabaa'il laga tirada badan yahay (sagaal boqolkiiba) iyo 66 baarlamaan ee Puntland ka kooban, laba waxay matalaan laga tirada badan yahay (saddex boqolkiiba wakiil) Marka la eego heerka wakiilnimada baarlamaannada Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka, qabaa'illada laga tirada badan yahay iyo mararka qaar beelaha laga tirada badan yahay, si wanaagsan looma matali karo mana laha cod ama tiro ku filan. Go'aanno muhiim ah oo quseeya noloshooda ayaa la sameeyaa marka ay codkooda maqnaadaan. Somaliland gudaheeda, kaliya qabiilka Gabooye oo ka mid ah beelaha laga tirada badan yahay, wuxuu xubin ku leeyahay aqalka Guurtida (Aqalka Sare). Warbixinta UNDP 2012 ee cinwaan looga dhigay Warbixinta Horumarinta Aadanaha eel Somaaliya 2012: Awood siinta dhalinyarada ee Nabadda iyo Horumarka, bogga 33 waxaa lagu ogaadey in Barakacayaasha intooda badani ay ka soo jeedaan qabaa'il la takooro.

92 Warbixinta Caalamiga ah ee Xuquuqda kooxaha laga tiro badan yahay: Magdhow malaha , Beelaha tirada yar ee Soomaaliyeed ee la ilaaway -download-full-report.pdf (Markii ugu dambeysay ee la galay boggan 8 Juunyo 2019).

sooc iyo kala-saarid hadba sida beeluhu u kala awood badanyihiin.[93] Habka 4.5 wuxuu dadka Soomaaliyeed u kala qeybiyay beelo iyo jufooyin. Xaqiiqadaas waxaa lagu ogaaday sahan daraasadeed la sameeyay oo loogu magac daray Aragtida Muwaadiniinta ee ku Aaddan Soo-xulista Baarlamaanka Soo-socda ee Soomaaliyeed, daraasaddaas oo la sameeyay muddadii u dhexeysay bilaha Oktoobar iyo Nofembar ee sanadkii 2015ka, waxaana daraasaddaas sameeyay Mac-hadka Heritage ee Daraasaadka Siyaasadda ee fadhigiisu yahay magaalada Muqdisho. Boqolkiiba lixdan iyo afar dadka la wareystay waxay sheegeen inay ka soo horjeedaan habka awood qaybsiga beelaha ee ku saleysan 4.5 halka 32 boqolkiiba ay sheegeen inay "ku faraxsan yihiin".[94] Natiijada daraasaddan laguma xusin aragtiyada Barakacayaasha, oo ah koox koox tilmaan-wadaag iyo xaalad-wadaag ah, iyo beelaha iyo kooxaha la heyb sooco ay ka qabaan nidaamka 4.5.[95] Natiijooyinka sahankan ayaa muujinaya in doodda ku saabsan nidaamka 4.5 aysan aheyn arrin fudud oo toos loo abbaari karo, sida loo arkana waxay ku xirantahay hadba beesha uu kasoo jeedo qofka aragtida ka bixinaya.[96]

57. Somaliland gudaheeda, doorasho madaxweynenimo oo gooni ah ayaa la qabtay bishii Nofambar 2017, doorashadaas oo ku salaysnayd nidaam qof-iyo-cod, taas oo ka duwaneyd doorashooyinka kale ee ka dhaca qaybaha kale ee Soomaaliya. Celcelis ahaan, boqolkiiba 68 jawaab-bixiyeyaasha la wareystay ee ku sugnaa sedexda gobol ee Somaliland waxay sheegeen in barakacayaashu ka qeybgaleen doorashadii madaxtinimada ee Somaliland ee dhacday sanadkii 2017. Ka-qeybgalka ugu ballaaran wuxuu ka dhacay gobolka Waqooyi Galbeed (boqolkiiba 85), oo ay ku jiraan laba magaalo oo muhiim ah - Hargeysa iyo Berbera — iyo Awdal (72 boqolkiiba).[97]

58. Ka-qeybgalka heerka sare ah ee Barakacayaasha la wareystay kaga qeybgaleen doorashada Somaliland, taas oo heerkeedu sarreeyo marka la barbardhigo qaybaha kale ee Soomaaliya, macneheedu ma aha kamana turjumayso in xiriirka ka dhexeeya barakacayaashaas iyo mas'uuliyiinta dowladda uu yahay xiriir dhow. Jawaab-bixiyeyaasha barakacayaasha ah ee ku sugan magaalada Borama, gobolka Awdal, oo caddeeyay inay ka qeybqaateen geedi-socodkii doorasho ee 2017kii iyagoo codeynaya ama qayb ka ahaa ololaha doorasho ee saddexda xisbi siyaasadeed ee ugu waaweyn Somaliland, waxay sheegeen in maalilntii ugu dambeysay ee ay arkeen mas'uuliyiin dowladeed ay ahayd maalintiin codeynta. Haweeney ka tirsan Barakacayaasha oo ku nool magaalada Burco, Somaliland, ayaa qabta isla aragtidaas, waxayna is-weydiisay sababta keentay in xubnaha golaha deegaanka ee magaaladeeda "ay u gusoo noqon waayeen kadib markii ay doorteeen."

59. Cilmi baaristan ayaa sidoo kale sahan ku sameeyay ka-qaybgalka barakacayaasha ee arrimaha dadweyne/siyaasadeed iyo sida ka-qaybgalkaasi uu ahaan jiray ka-hor ina aanay barakicin.

93 Eno, Mohamed A. iyo Eno, Omar A. (2011) "Maskax-ku-dirirnimadu markay dhex taal cunsuriyadda: Mukthar iyo Nidaamka 4.5," Bildhaan: Joornaaliista Caalamiga ah ee Daraasaadka Soomaaliyeed: Vol. 9, Qodobka 13. Waxaa laga heli karaa: https://digitalcommons.macalester.edu/bildhaan/vol9/iss1/13

94 Xulashada Barlamaanka Soomaaliya ee soo socota: Aragtida Muwaadiniinta, Machadka Heritage ee Daraasaadka Siyaasadda, Diisamber 2015. Ka eeg bogga 4-aad: http://www.heritageinstitute.org/wp-content/uploads/2015/12/Selection-of-the-Next-Somalia-Parliament-The-Citizens%E2%80%99-View.pdf (Markii ugu dambeysay ee la galay boggan 2019).

95 Isla Tixraacaas. Sahanku wuxuu sidoo kale qirey in "Inta badan magaalooyinka Soomaaliya waxaa ka taliya hal qabiil ama qabiilo laxiriira waxaana macquul ah in sahamintaas aysan qaban aragtida beelaha laga tirada badan yahay oo mararka qaar loo yaqaan qabiilka 5aad ama .5 qabiilada tan iyo qabiilooyinkan tirada yar. inta badan ayaa ku baahsan waddanka oo dhan." maadaama qabiilooyinkan laga tirada badan yahay ay badanaa ku baahsan yihiin dalka oo dhan

96 Tusaale ahaan, natiijooyinka sahmintan oo la mid ah waxay muujinayaan in boqolkiiba 71 dadka sahaminta lagu sameeyay ee Baydhabo, oo ah magaalo weyn oo ay ka taliyaan qabaa'illada Digil iyo Mirifle, ay sheegeen inay door bideen nidaamka 4.5. Maaddaama ay tahay beel taariikhi ahaan la takooray, xubnaha Digil iyo Mirifle waxay u arkaan in nidaamka 4.5 lagu siiyo fursad iyaga siineysa cod siyaasadeed gudaha Soomaaliya (eeg footnote 83) Kuwa sahaminta laga sameeyay magaalooyinka ay maamulaan Daarood iyo Hawiye, ayaa ka soo horjeestay adeegsiga qaaciddada. Intaas waxaa sii dheer, intii lagu jiray wada-xaajoodka qaabkii doorashada 2016, Dowladda Puntland waxay muujisay inay si adag uga soo horjeeddo adeegsiga nidaamka 4.5, taas oo dad badan oo reer Puntland ah [qabiilooyinka Puntland] ay aaminsan yihiin in ay khasaaro u keeneyso beelahooda deegaankaas ku badan. Eeg Warbixinta Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay Soomaaliya oo ku taariikhaysan 9ka Maajo 2016 bogga 1aad eel https://unsom.unmissions.org/sites/default/files/s_2016_430.pdf


97 Boqolkiiba tiro hoose ayaa laga diiwaan geliyey gobolka Togdheer, halkaasoo boqolkiiba 46 jawaabeyaasha ay sheegeen in Barakacayaasha ay ka qeybqaateen geeddi-socodka.

Ku dhowaad kalabar jawaab-bixiyeyaasha (boqolkiiba 49) waxay sheegeen in barakacayaasha ay kaqeybgeli jireen arimaha bulshada / siyaasada mararka qaar ama inta badan ay ka-qeybgei jireen ka-hor intaysan barakacin. Afartan iyo toddoba boqolkiiba waxay sheegeen in barakacayaashu aysan weligood ka-qeybgelin arrimaha dadweyne/siyaasadeed. Arrinta xiisaha leh ayaa ahayd, in barakacayaasha kasoo jeeda beelaha Soomaali Bantu ay aragtiyo diidmo ah ka muujiyeen ka-qeybgalka arrimaha dadweyne/siyaasadeed xataa ka-hor inta aanay barakicin, iyadoo boqolkiiba 57 ay sheegeen in waligood aanay ka qeybqaadan arrimahaas. Tani waxay noqon kartaa arrin la xiriirta dhibaatooyinka faquuqa iyo takoorka ah ee beelahani muddada dheer kusoo jireen.

60. Jawaab-bixiyeyaashu waxay talo ahaan usoo jeediyeen in la hagaajiyo ka-qaybgalka barakacayaasha ee arrimaha dadweyne/siyaasadeed. Konton iyo laba boqolkiiba waxaa soo-jeedintoodu la xiriirtay tayo-dhisid, tababarro, wacyi-gelin iyo sidoo kale in loo abuuro fursado shaqo. Boqolkiiba sagaal iyo toban jawaabaha waxay la xiriireen arrimaha muhiimka ah sida hubinta in Barakacayaashu helaan matalaad iyo ixtiraam iyo in la aqoonsado xuquuqdooda. Intaa waxaa sii dheer, boqolkiiba 15 jawaabaha waxay la xiriiraan hagaajinta xaaladaha nololeed ee barakacayaasha iyo in la daboolo baahida bani'aadan ee asaasiga ah. Soojeedinno kale ayaa jiray oo la xiriira xalka waara (boqolkiiba sagaal), sida is dhexgalka barakacayaasha bulshada deegaanka, iyo guriyaynta, xuquuqda dhulka iyo hantida ee barakacayaasha. Ugu dambeyn, waxaa laga dhawaajiyay dib-u-laabashada iskeed ah ee barakacayaashu dib ugu laabtaan [deegaanadoodii hore]. Tusaale ahaan, Barakace ku nool magaalada Kismaayo ayaa carabka ku adkeeyay muhiimadda ay leedahay "ka shaqeynta nabadda iyo amniga si aan dib ugu laabanno meelihii aan ka nimid."

# 3. XUQUUQDA XORRIYADDA RA'YIGA IYO AFKAARTA

## 3.1 Xogta ugu muhiimsan ee la helay




61. In ka badan saddex meelood laba meel (70 boqolkiiba) ee ah jawaab-bixiyeyaasha ayaa sheegay in dadka barakacayaasha ah aanay hawada marin karin aragtiyadooda ku aaddan dowladd iyo siyaasadda iyagoo adeegsanaya warbaahinta.[98] Waxaa arrintaas loo aanayn karaa walaaca laga qabo bed-qabkooda iyo amaankooda, sida uu soo jeediyay barakace la wareystay oo ku sugan Muqdisho kaas oo sheegay "in barakacayaashu ay dareemayaan in la beegsan karo ama la weerari karo" aragtiyada ay warbaahinta hawada u mariyeen awgeed.

62. Marka la eego jawiga/bey'ada khatarta leh ee ay ku suganyihiin barakacayaasha la wareystay, qaab-dhismeedka awoodeed ee jira iyo habka ay u dhisanyihiin xeryaha qoxootiga loona maamulo,[99] ayaanan u saamaxaynin barakacayaasha inay si furan uga hadlaan horjoogayaasha xeryaha iyo hab-dhaqankooda hogaamineed. Waxaa arrinkaan lagu ogaaday natiijooyinkii kasoo baxay wareysiyada, iyadoo 62 boqolkiiba jawaab-bixiyeyaashu aanay awoodin in, iyagoo adeegsanaya hab-dhismeedkooda, ay nala wadaagaan xogta ku saabsan horjoogayaasha xeryohooda iyo sida ay ku hogaamiyaan xeryaha.[100]

63. Marka laga hadlayo suurto-galnimada in barakacayaashu xog weydiistaan mas'uuliyiinta dowladda, 76 boqolkiiba jawaab-bixiyeyaasha waxay sheegeen in barakacayaashu aanay xog weydiisan. [101] Tirada jawaab-bixiyeyaasha ee sheegay in barakacayaashu aanay codsanin wax xog ah ayaa aad ugu badnaa saddex gobol: Shabeellaha Hoose, Dowlad Goboleedka Koonfur Galbeed (100 boqolkiiba);[102] Galgaduud, Galmudug (92 boqolkiiba); iyo gobolka Banadir (86

98 In ka yar saddex meelood meel jawaab-bixiyeyaasha waxay sheegeen in Barakacayaasha ay sidaas sameyn karaan, iyadoo 16 boqolkiiba ay sheegeen inay suurto gal tahay halka 11 boqolkiiba u akeen inay aad suurto gal u tahay. Saddex gobol, tirada boqolleyda ah ayaa si cad uga sarreysay tirada dhexdhexaadka ah: Mudug, Puntland (boqolkiiba 90); Waqooyi Galbeed (boqolkiiba 80), iyo Awdal (boqolkiiba 78), oo labadaba ah Somaliland. Tani waxay isku jirtaa jawaabaha dhahaya ma jiraan iyo kuwa dhahaya wey jiraan laakiin wey yartahay.

99 Bal eeg tusaale ahaan Xafiiska Qaramada Midoobay ee Isku-dubbaridka Arrimaha Bani'aadamnimada, Falanqaynta Baahiyaha Gargaarka Bani'aadminnimada, 2018 ka eeg https://reliefweb.int/sites/reliefweb.int/files/resources/20172911_somalia_humanitarian_needs_overview_2018.pdf , p. 22 (Markii ugu dambeysay ee la galay boggan 11 Oktoobar 2018).

100 Boqolkiiba jawaabeyaasha haweenka ee dhahaya barokacayaashu uma badna ama aad uu yar inay la wadaagaan macluumaadka ku saabsan hoggaamiyeyaasha xeradu aad ayey uga yaraayeen celcelis ahaan wayna aad uga sarreeyeen kuwa jawaab bixiyaasha lab (66 boqolkiiba waxay ka soo horjeedaan 57 boqolkiiba). Shanta gobol, boqolleydu waxay ka sarreeyeen celceliska dhammaan jawaab bixiyaasha: Galgaduud, Galmudug (78 boqolkiiba); Waqooyi Galbeed (76 boqolkiiba) iyo Awdal (74 boqolkiiba) Somaliland; Banaadir (boqolkiiba 71); iyo Hiiraan, Hirshabelle (70 boqolkiiba).

101 Qiyaastii 23 boqolkiiba jawaabeyaasha waxay sheegeen in barokacayaashu ay u badan tahay ama ay aad ugu badantahay inay macluumaad weydiistaan saraakiisha. Tani waxay isku daraysaa wax aan badnayn ama aad uu badnayn oo jawaabcelin ah.


102 Shabellaha Hoose, cilmi baaris - oo muunad laga helay (15 jawaab bixiyeyaal ah) — ayaa laga sameeyay Magaalada Marka: aag isku dhacyo ay ka jiraan jilaayaal fara badan oo ay ku jiraan Al Shabaab, iyo dowlad aan weli si buuxda u shaqeyn..

boqolkiiba). Inkastoo maamulka dowladnimo aanu si buuxda u sal-dhiganin Shabeellaha Hoose iyo Galgaduud iyadoo sababtu tahay dhismaha Dowlad Goboleedyada ee dhowaan la hirgeliyay iyo xaaladda amni oo ah mid aan cago badan ku taagnayn, xaaladda Banadir ayaase ah mid taa ka duwan. Qayb ballaaran oo kamid ah tirada ugu badan ee dadka la wareystay ee gobolka Banadir waxay tilmaameen in aanay suurto-gal ahayn in barakacayaashu xog weydiistaan mas'uuliyiinta dowladda taas oo loo qaadan karo in aanu jirin xiriir si buuxda u horumarsan oo ka dhexeeya mas'uuliyiinta dowladda iyo barakacayaasha ku sugan deegaanka.

# 4. XAQA XORRIYADDA KA-MID-NOQOSHADA IYO XORRIYADDA KULANKA[103]

## 4.1 Xogta ugu muhiimsan ee la helay

RIGHT TO FREEDOM OF ASSOCIATION AND FREEDOM OF ASSEMBLY, DEMONSTRATION, PROTEST AND PETITION




Creation Date: 30 April 2019 Source: United Nations Assistance Mission in Somalia (UNSOM)

64. Boqolkiiba lixdan jawaab-bixiyeyaashu waxay sheegeen in barakacayaashu aanay cabasho ama warqad codsi u qorin mas'uuliyiinta dowladda.[104] Waxaa la diiwaan geliyay jawaabo kala duwan oo ku salaysan hadba meesha uu joogo jawaab-bixiyaha: 92 boqolkiiba jawaab-bixiyeyaasha ee ku sugnaa Galgaduud, Galmudug, iyo 87 boqolkiiba oo ku sugnaa Shabeellaha Hoose, Dowlad Goboleedka Koonfur Galbeed, waxay sheegeen in aanay dhicin in barakacayaashu cabasho ama codsi u gudbiyaan dowladda. Sideetan boqolkiiba jawaab-bixiyeyaasha ee isku sheegay inay yihiin beesha Dir waxay sheegeen in barakacayaashu aanay cabasho ama codsi u qorin mas'uuliyiinta dowladda. Inkastoo tirada jawaab-bixiyeyaasha ee isku sheegay inay yihiin beesha Dir ay,[105] hadana xaqiiqada ah in 80 boqolkiiba sheegeen inay kasoo jeedaan jufada Biyomaal ee degta gobolka dagaalladu halakeeyeen ee Shabeellaha Hoose ayaa qayb ahaan gacan ka geysanaysa sharraxaadda natiijadaas .[106]

65. Sababaha ay leeyihiin natiijooyinkaan ayaa intaas ka badan kara: waxay noqon kartaa in barakacayaashu ka caga-jiidayaan inay la xiriiraan hay'adaha dowladda: in aanay aad u

103 Qodobka 21aad ee Axdiga Caalamiga ah ee Xuquuqda Madaniga iyo Xuquuqda siyaasadeed wuxuu aqoonsan yahay xaqa shirarka nabdoon. Qodobka 22-aad ee axdiga ayaa sheegaya in qof walbaa uu xaq u leeyahay xurriyadda ururrada. Waa in la sii ogaadaa in sharciga caalamiga ee xuquuqul insaanka uusan xaq u laheyn codsi sidan oo kale ah. 'Xuquuqda dacwada' waxaa laga soo qaatay sadarka VIII, kaasoo ah helitaanka cadaalada iyadoo la raacayo Mabaadi'da aasaasiga ah iyo Tilmaamaha ku Saabsan Xuquuqda Dacwadda iyo Magdhowga Dhibanayaashu Xadgudubyada Adag ee Sharciga Xuquuqul Insaanka Caalamiga ah iyo Xadgudubyada Adag ee Sharciga Caalamiga ah ee Bani'aadamnimada, oo ay ansaxisay oo ay ku dhawaaqday qaraarkii Golaha Guud ee 60/147 ee 16kii Diseembar 2005.

104 Combining not likely and less likely responses.

105 Soddon jawaabeyaal.

106 Waxay ka yimaadeen gobol la soo deristay iskahorimaad aad u weyn oo qabiil ah , oo cutubyo ka tirsan Ciidanka XDS ay garab istaageen maliishiyada Habar Gedir / Hawiye. Tani waxay astaan u noqon laheyd astaan la xiriirta xiriirka ay la leeyihiin maamulka. Eeg warbixinnada ay soo saareen Kooxda Korjoogteynta ee Ereteriya ee Soomaaliya ee 2014, oo ah at ka eeg https://undocs.org/S/2014/726, iyo 2016, oo ah ka eeg https://undocs.org/S/2016/919 (Markii ugu dambeysay ee la galay boggan 19 Nofembar. 2018).

aqoon habka loo qoro cabashooyinka ama qoraal ahaan loo gudbiyo codsiyada; [107] amaba in aanay garanayn cidda lagu hagaajinayo qoraallada. Sida lagasoo xigtay jawaab-bixiyeyaasha qaarkood, marka barakacayaashu u baahdaan kaalmo, waxay kaalmo u doontaan shabakadaha taageero ee odayaal dhaqameedkooda. Sida uu ku tilmaamay sarkaal sare ee dowladda ah oo ku sugan Galgaduud, Galmudug: "marka barakacayaashu dhibaato la kulmaan waxay la tashadaan beelohooda."

66. Marka la eego natiijooyinka sahanka, barakacayaashu uma gudbiyaan cabashooyinkooda hay'adaha dowladda xattaa haddii ay dhibaateeyaan "albaab ilaaliyeyaasha" iyo milkiilayaasha boosaska. Tani waxay badanaan ku dhacdaa dadka kasoo jeedo beelaha laga tirada badanyahay ama la caburiyo. Tusaale ahaan, jawaab-bixiye ayaa ka sheekeeyay sida "wardiyeyaasha" iyo milkiilayaasha boosaska loogu eedeeyo inay ka macaasheen shaqada ay qabteen koox ka tirsan qoysaska barakacayaasha ah ee kasoo jeeda qowmiyadda Soomaali Baantuu, oo doonayay inay helaan meel ay degaan oo ka tirsan aagga Weydow ee ku yaal waddada u dhexeysa Muqdisho iyo Afgooye. "Waardiyeyaasha iyo milkiilayaasha boosaska ayaa u sheegay qoysaskii barakacayaasha inay hawdka ka nadiifiyaan dhir ka baxday dhul ballaaran kadibna ay qayb ka degaan. Kadib markii ay muddo laba bilood ah ay nadiifinayeen ayna saldhigteen, ayaa qoysaskii Baantuu ee Soomaaliyeed si xoog leh looga saaray goobtii." Waxaa lasoo weriyay in dhacdadaasi ay dhacday 2013-kii, qoysaskii saameyntu gaartayna wax cabasho ah uma gudbin hay'adaha dowladda. Mid kamid ah sababaha ugu weyn ee aan dhacdada loogu wargelin booliska ayaa noqon karta in aanay jirin kalsooni lagu qabi karo hay'adda, sida lagu tilmaamay cilmi baaris hore.[108]

67. Waxaa muuqata in uu jiro ogaal ay qabaan jawaab-bixiyeyaasha ee ah in mas'uuliyiinta dowladdu ay leeyihiin mas'uuliyadda ugu horreyso ee xaqiijinta ku-naaloonshaha ilaalinta iyo kaalmada bani'aadanimo ee dadka barakacayaasha ah. Lixdan boqolkiiba jawaab-bxiyeyaasha waxay sheegeen haddiiba barakacayaashu fursad u helaan inay weydiiyaan su'aal taabanaysa noloshooda, waa in qofka wax la weydiinayo uu noqdaa madax dowlad oo xil kahaya heerarka kaladuwan ee dowladda.[109] Jawaabaha lasoo jeediyay waxay iftiiminayaan mudnaanta ay leeyihiin barakacayaasha ayna ku jiraan arrimaha bani'aadanimo (26 boqolkiiba), arrimaha hurumarinta (10 boqolkiiba), arrimaha siyaasadda (14 boqolkiiba), mustaqbakla barakacayaasha (sagaal boqolkiiba), iyo ilaalinta iyo amniga (labo boqolkiiba).

68. Marki diiradda loo weeciyay soo gudbinta cabashooyinka ee heer xero, 64 boqolkiiba jawaab-bixiyeyaashu waxay sheegeen in aanay diyaar u ahayn inay si banbaxsan (bulshada loo bandhigay) ay uga cawdaan sida loo maamulo xeryohoda, taa waxaa kasoo horjeeda tiro kale oo 32 boqolkiiba ah oo sheegay inay diyaar u yihiin inay sidaasi sameeyaan.[110] Iyadoo maanka lagu hayo hawlaha xakamaynta ah ee "waardiyeyaashu" ka wadaan xeryaha ku yaal Soomaaliya, ayaa,[111] ayaa cagajiidka barakacayaashu ay ka cagajiidayaan inay soo gudbiyaan cabashooyinkooda heer xero aanay ahayn arrin lala yaabo. Sid uu u dhigay jawaab-bixiye ku sugan [gobolka] Bay: "barakacayaashu ma danaynayaan inay si toos ah oo kor loo qaadayo uga cawdaan, laakiin waxay door-bidayaan [inay cabashooyinkooda u gudbiyaan] hay'adaha caalamiga ah ee aan dowlad ahayn (INGOs)."

107 Tani waxay sidoo kale sabab u noqon kartaa heerka akhris-qorista ee barokacayaasha. Tusaale ahaan, Barakacayaasha ku sugan Muqdisho, waxaa la soo sheegay in boqolkiiba 69 dadka isdiiwangeliyay ee jira 15 sano iyo wixii ka sareeya aysan wax akhrin karin waxna qori karin. Eeg diiwaangelinta Barakaca Gudaha ee Muqdisho, Abriil 2016 ka eeghttps://www.jips.org/jips-publication/profiling-report-mogadishu-somalia-2016/ (Markii ugu dambeysay ee la galay boggan 24 Oktoobar 2018).

108 Eeg diiwaangelinta Barakaca Gudaha ee Muqdisho, Abriil 2016, Faq. 43, ka eeg https://www.jips.org/jips-publication/profiling-report-mogadishu-somalia-2016/ (Markii ugu dambeysay ee la galay boggan 24 Noofambar 2018).

109 832 ka mid ah Jawaab bixiyaasha la wareystay, 657 jawaabeyaasha waxay ahaayeen barakacayaal.

110 Heerarka sare ee jawaabaha aan fiicnayn (76 boqolkiiba) ayaa laga diiwaangeliyay saddex aag: Waqooyi Galbeed iyo Awdal, Somaliland, iyo Galgaduud, Galmudug. Tani waxay isku daraysaa wax aan badnayn oo jawaabcelin aan aad u badnayn.

111 Eeg Isuduwidda Xerada iyo Maareynta Xerada, Istaraatiijiyadaha Kooxda CCCM ee Soomaaliya, July 2017, ka eeg https://data2.unhcr.org/es/documents/download/60059 (Markii ugu dambeysay ee la galay boggan 24 Oktoobar 2018).Waxaad kaloo eegtaa Xafiiska Qaramada Midoobay ee Iskuxirka Arrimaha Bani'aadamnimada, Falanqaynta Baahiyaha Gargaarka Bani'aadminnimada, 2018, eeg ka eeg https://reliefweb.int/sites/reliefweb.int/files/resources/20172911_somalia_humanitarian_needs_overview_2018.pdf,, Faq. 22 (Markii ugu dambeysay ee la galay boggan 24 Oktoobar 2018).

69. Ka-qayb-qaadashada bananbaxyada nabadeed ee dadweyne ayaa ah hab kale oo muwaadiniintu kor ugu qaadi karaan dareenkooda, codkoodana loo maqli karo. In ka badan saddex-meelood laba (71 boqolkiiba) jawaab-bixiyaashu waxay muujiyeen in barakacayaash aanay ka qeybgelin mudaaharaadyo, ay u jiraan banaanbaxyo cabasho ah.[112] Kuwa sheegay inay kasoo jeedaan dadka Baantuu ee Soomaaliyeed (84 boqolkiiba) halka Digil iyo Mirifle ay kayihiin (81 boqolkiiba) waxay muujiyeen aragtiyo aad uga diidmo badan kuwa ay bixiyeen jawaab-bixiyeyaasha kasoo jeeda beelaha kale ama kuwa aan sheegin beelaha ay kasoo jeedaan. Si kastaba ha ahaatee, qaar ka tirsan barakacayaasha la wareystay ayaa mararka qaar sameeya mudaaharaadyo dadweyne, gaar ahaan waxay ka sameeyaan meelaha ay ku nool yihiin, mudaaharaadyadaas oo la xiriira arrimaha sida tooska ah u saameeya iyaga. Sida uu xusay jawaab-bixiye ku sugan Shabeellaha Hoose: “Barakacayaashu way banaanbaxaan marka si khasab ah looga saaro xeyaha iyo marka la dilo mid iyaga kamid ah.”

70. Su’aal kale ayaa ku saabsanayd ogaanshaha haddii ay jirto suurta galnimada in barakacayaasha lagu khasbo inay abaabulaan ama ay ka qeyb galaan banaanbaxyo. Jawaab-bixiyeyaasha badankood (78 boqolkiiba) waxay sheegeen inay adagtahay inay dhacdo,[113] in barakacayaasha lagu khasbo abaabulka ama ka-qaybgalka mudaaharaadyo ay ku jiraan banaanbaxyo.[114] Tirada boqolleyda ah ee ragga ee tilmaamay in barakacayaasha lagu khasbay inay abaabulaan ama ay ka qaybgalaan babaanbaxyo ay sagaal keer ka badnayd tirada haweenka jawaab-bixyeyaasha ah. Farqiga noocan ahi wuxuu ka tarjumayaa dhacdooyinka dhabta ah ee sida tooska ah u soo maray ama ay ka sheekeeyaan dadka kale.[115] Qaar ka mid ah jawaab-bixiyeyaasha barakacayaasha ah ayaa ahaa kuwo aad isku muujiyay oo xusay in hogaamiyaasha xeryaha iyo milkiileyaasha boosaska ay ka mid yihiin kuwa ku khasbaya barakacayaasha in ay abaabulaan ama ka qeyb qaataan banaanbaxyada. Tusaale ahaan, jawaab-bixiye barakece ah oo ku sugan Muqdisho ayaa sheegay in “Inta badan, milkiileyaasha dhulka ayaa si dadban noo khasba, haddii aan nahay barakacayaasha”, halka jawaab-bixiye ka tirsan barakacayaasha kuna sugan Baydhaba, Dowlad Goboleedka Koonfur Galbeed, uu caddeeyey in “Hogaamiyayaasha xeryaha ay ku khasbaan barakacayaasha inay ka qeybqaataan banaanbaxyada.”

71. In ka badan saddex-meelood laba meel jawaab-bixiyeyaasha (72 boqolkiiba) waxay caddeeyeen in Barakacayaashu aanay awoodin inay samaystaan ama ay ku biiraan urur.[116] Aragtiyo aad u daran ayay bixiyeen jawaab-bixiyeyaasha sheegay inay kasoo jeedaan qowmiyadda Baantuuga ee Soomaaliyeed (82 boqolkiiba) halka Hawiye uu ka ahaa (81 boqolkiiba).[117] Inkastoo jawaabaha ay bixiyeen dadka kasoo jeedo beelaha Baantuu ay ka ka turjumayaan taariikhda heyb-sooca iyo ka-hor-istaagga ay lasoo kulmeen bulshadaas iyo weliba sidoo kale culayska ka haysta unkidda urur u dhaqdhaqaaqa xurmaynta xuquuqdooda.

112 Natiijooyinka ayaa shaaca ka qaaday kala duwanaansho celcelis ahaan celcelis ahaan dhowr gobol: 90 boqolkiiba jawaabeyaasha Mudug, Puntland, iyo 81 boqolkiiba Jubbada Hoose, Jubaland, ayaa doortay xulashooyinka aan badnayn ama aad aan badnayn. Dhanka kale, boqolleyda sareeya ee jawaab-bixiyeyaasha laba gobol - Shabeellaha Hoose, Koonfur Galbeed, (60 boqolkiiba) iyo Togdheer, Somaliland (42 boqolkiiba) - waxay muujiyeen aragti wanaagsan (oo laga yaabo inay aad u badan tahay ama aad u badan tahay). Tani waxay isku daraysaa wax aan badnayn oo jawaabcelin aan aad uu badnayn.

113 Isku-darka jawaabaha aan badnayn ama aad uu badnayn.

114 Saddex gobol, ugu yaraan saddex-meeloodow hal jawaab bixiyeyaasha waxay sheegeen in barakacayaasha ay u badan tahay ama ay aad u badantahay ugu qasbanaadeen in lagu qasbo abaabulka ama ka qeybgalka banaanbaxyada ama banaanbaxyada dadweynaha: Shabellaha Hoose, Koonfur Galbeed (40 boqolkiiba); Hiiraan, Hirshabelle (35 boqolkiiba); iyo Banaadir (35 boqolkiiba).

115 Labaatan-iyo-shan boqolkiiba sida ka soo horjeedda 16 boqolkiiba. Kala duwanaansho ayaa sidoo kale soo ifbaxday inta udhaxeysa kuwa aan barakacayaasha ahayn iyo jawaabeyaasha barokacayaasha, iyadoo boqolkiiba 29 boqolkiiba kuwa hore ee la sheegay in barokacayaasha ay u badan tahay ama lagu qasbay in lagu qasbo abaabulka ama ka qeybqaadashada banaanbaxyada ama mudaaharaadyada dadweynaha marka loo eego 18 boqolkiiba kan dambe.

116 Boqolkiiba jawaab bixiyeyaasha haysta aragtidan ayaa gaar ahaan ka sareeyay celceliska guud ee afar gobol: Mudug, Puntland (96 boqolkiiba); Hiiraan, Hirshabelle (93 boqolkiiba); Galgaduud, Galmudug (92 boqolkiiba) iyo Shabellaha Dhexe, Hirshabelle (84 boqolkiiba). Kaliya 24 boqolkiiba jawaabeyaasha dhammaantood waxay ku jawaabeen inay u badan tahay ama aad badantahay inay barokacayaasha sameystaan ama ku biiraan urur. Natiijooyinkaani waxay la jaan qaadayaan xaqiiqda ah inaysan jirin urur la yaqaan oo ay dhiseen ama ay u sameeyeen barakacayaasha.

117 Isku-darka jawaabaha aan badnayn ama aad u badanyn.

72. Natiijooyinka la xiriira awoodda barakacayaashu u leeyihiin inay samaystaan ama ku biiraan urur waxaa lagu sharxi karaa dhowr sababood: waxay iskugu jiraan xaqiiqda ah in barakacayaasha intooda badani ay xoogga saaraan arrimaha muhiimka u ah ee nolol maalmeedkooda (oo au ugusoo horreyso helidda quud nololeedkooda), ayna ku xigto inay doorbidaan istiraatiijiyadda shaqsiga ah ee isku dayga ah ee qofku isku dayo in uu xallisto arrimihiisa, waxaa sii wehliya xakamaynta ay adeegsadaan jilayaasha (sida "ilaaliyeyaasha albaabada") ee xakameeya sida barakacayaashu u qaabaynayaan arrimaha dantoodu ku jirto. Xaaladda nugul ee ay ku noolyihiin barakacayaasha, oo ay ku jiraan amni darri joogto ah ee muddadan iyo halkii ay ka yimaadeen asal ahan oo aanay ka jirin shabakado taageero bixiya oo dhisan, ayaa ku dhiirigelin karta (ama ku khasbi karta) barakacayaasha inay baadi goobaan xal shakhsiyadeed halkii ay qaadi lahaayeen tallaabooyin wadareed.[118]

73. Xataa haddii su'aashu ku saabsantahay dadaallo sida muuqdo aan aad u cakirnayn kana fudud samaysashada ama ku biirista urur, taas oo ah, qabanqaabinta shir looga hadlo arrimaha muhiimadda u leh ee saameeya noloshooda, ku-dhowaad 60 boqolkiiba jawaab-bixiyeyaashu waxay u arkeen in aanay awoodin inay sameeyaan sidaas.[119] Sodon iyo sideed boqolkiiba jawaab-bixiyeyaashu waxay sheegeen in ay awoodaan inay qabanqaabiyaan shir looga hadlo arrimaha muhiimadda u leh iyaga ee saameeya noloshooda.[120]

118 In kasta oo barakacayaashu aysan lahayn ururro matalaya nabadda iyo geedi socodka dhismaha dowladnimada, Hay'ada u dooda xuquuqda bulshada ee fadaraalka ah (MCA), oo ah hay'ad maxalli ah oo fadhigeedu yahay magaalada Muqdisho, una doodda xuquuqda barokacayaashaka soo jeeda Soomaalida Bantu, qeyb weyn oo ka mid ah dadka barakacayaasha ah, Barakacayaasha iyo haweenku waxay matalaan hogaaminta MCA hawlahoodana waxaa ka mid ah kobcinta awooda iyo wacyigelinta; la socodka, warbixinta iyo diiwaangelinta xuquuqul insaanka iyo arrimaha la xiriira ilaalinta / shilalka saameeya barakacayaasha. MCA waxay la wadaagtaa macluumaadka ku saabsan barokacayaasha Bantu ee Soomaaliyeed masuuliyiinta Soomaaliyeed, ururada qaranka iyo kuwa caalamiga ah ee u doodista iyo ujeeddooyinka la-xisaabtanka.

119 Boqolleyda sareeya ayaa laga diiwaan geliyey saddex gobol: Hiiraan, Hirshabelle (73 boqolkiiba); Galgaduud, Galmudug (73 boqolkiiba) iyo Shabellaha Dhexe, Hirshabelle (72 boqolkiiba).

120 Boqolleyda sareysa ayaa lagu diiwaan geliyey: Nugaal, Puntland (87 boqolkiiba, laakiin keliya 15 jawaab bixiye); Shabellaha Hoose, (60 boqolkiiba) iyo gobolka Baay (59 boqolkiiba), labadaba waxay ku sugan yihiin Koonfur Galbeed ; Bari, Puntland (49 boqolkiiba) iyo Awdal, Somaliland (47 boqolkiiba).

# 5. CAQABADAHA KU HOR-GUDBOON DADKA BARAKACAYAASHA AH IN AY KA-QAYBGALAAN ARRIMAHA KHUSEEYA BULSHOOYINKOODA

74. Jawaab-bixiyeyaasha waxaa la weydiiyay inay tilmaamaan saddex caqabadood oo waaweyn oo ka hortaagan barakacayaasha inay ka qaybgalaan arrimaha khuseeya bulshooyinkooda sida: Barakacayaasha si guud ahaan ah, Barakacayaal rag ah, iyo Barakacayaal haween ah. Foomka xog-wareysiga ayaa u ogolaanayay jawaab-bixiyeyaasha inay saddexda caqabadood ee waaweyn kasoo dhex xushaan liis ka kooban 10 caqabadood oo u gaar ah farac kasta (barakacayaasha, barakacayaasha ragga ah, barakacayaasha haweenka ah). Inkastoo jawaab-bixiyeyaashu ay xusheen dhamaan caqabadaha ku qornaa liiska, hadaana ma jirin hal caqabad oo u muuqatay mid aad u dhibaato badan keli ahaanteeda, laakiin waxaa la tilmaamay caqabado is-biirsaday oo hortaagan ka-qaybgalka.

## 5.1 Caqabadaha ku hor-gudboon Dadka Barakacayaasha ah in ay ka-qaybgalaan arrimaha khuseeya bulshooyinkooda, loona sababeeyo aqoonsigooda barakacanimo[121]

75. Natiijadu waxay tilmaamaysaa in tirada ugu badan ee jawaab-bixiyeyaasha (21 boqolkiiba) ay tilmaameen "in barakacayaashu aad ugu mashquulsanyihiin sidii ay ku heli lahaayeen waxyaabaha nolosha asaasiga u ah (cunto, biyo, hooy iwm.)"[122] taas oo ah caqabadda ugu horreyso ee ugu weyn ee ka hor taagan ka-qaybgalka arrimaha khuseeya bulshooyinkooda. Jawaab-celinnadan waxay ina xasuusinayaan in in baahida [gargaarka] bani'aadanimo uu weli dowr udub-dhexaad ah ka cayaarayo noloshooda, oo qanaacadooda ay tahay lagama maarmaan haddii la rajaynayo inay si muuqato uga qayb-qaataan nolosha guud. Sidoo kale, xaqiiqada ah in ku dhowaad kalabar qoysaska barakacayaasha (47 boqolkiiba) ay hormuud u yihiin haween, waxay culays gaar ah saaraysaa barakacayaasha waxayna arrintaasi caqabad kusii noqonaysaa ka-qaybgalkooda nolosha guud ay ka qaybgalaan.[123]

76. Caqabadda labaad ee ugu weyn, 16 boqolkiiba ee dhammaan jawaab bixiyeyaasha waxay doorteen in "barakacayaasha aan loo arkin dad wax qaban kara oo wax kusoo kordhin

121 832 jawaabeyaasha la wareystay, 768 waxay tixgeliyeen in aqoonsigu uu ka mid yahay seddexda caqabadood ee ugu weyn ee ka-soo-qeybgalka Barakacayaasha ee arrimaha beeshooda.

122 Xuquuqdaas waxaa lagu daray Axdiga Caalamiga ah ee Dhaqaalaha, Xuquuqda Bulshada iyo Dhaqanka oo ay Soomaaliya ay ka tahay dawlad ka mid ah.

123 Kooxda Bangiga Adduunka / Barnaamijka Caalamiga ah ee Barakaca qasabka ah, Falanqaynta Barakaca Soomaaliya, 2014, waxaad ka heli kartaa, at ka eeg http://documents.worldbank.org/curated/en/889591468321538763/pdf/932380WP0P12640t0DC0edits009012014.pdf (markii ugu dambeysay ee la galay boggan 12 Nofambar 2018). Faq 5.4.

kara arrimaha khuseeya bulshooyinkooda."[124] Doorashadan waxay ka tarjumaysaa isu dheelitirnaan la'aanta dhabta ah ee awoodda ka dhaxaysa Barakacayaasha jawaabaha bixiyay iyo hay'adaha maxalliga ah iyo horjoogayaasha bulshada martida loo yahay oo ay ku jiraan "irid ilaaliyeyaasha" oo dhab ahaan kasoo jeeda bulshooyinka/beelaha aagga y badan ee martida loo yahay. Xaaladaha qaarkood, arrintan waxaa sii hurin kara fikrad guud oo khaldan oo bulshada martida loo yahay ay ka aaminto barakacayaasha, sida ay tilaameen 62 boqolkiiba ee jawaab-biixiyeyaasha ku sugnaa magaalada Borama ee gobolka Awdal oo iyagu ka sheegtay hab-dhaqan liidid ah oo uga imaanaya bulshada ay martida u yihiin, waxayna dalbadeen in loo arko inay yihiin dad ay hawshu khuseyso.

77. Caqabadda labaad ee ugu weyn ee barakacayashu wajahayaan, ayaa 14 boqolkiiba jawaab-bixiyeyaashu waxay xusheen "in dadka barakacayaasha ah aan loo arkin inay yihiin dad muhiim ah, waxaana sidaas u arka hay'adaha maxalliga ah iyo horjoogayasha xeryaha oo aan doonayn in barakacayaashu ka qaybqaataan arrimaha khuseeya bulshooyinkooda." Todobaatan iyo saddex boqolkiiba barakacayaasha jawaabaha ka bixiyay waxay arrintan ku tilmaameen caqabadda saddexaad ee ugu weyn, waxaa sidaas si ka duwan sheegay 23 boqolkiiba dadka aan ahayn Barakacayaal.

78. Isku soo wada duub, halganka maalinlaha ah ee barakacayaasha la wareystay ugu jiraan helidda quud nololeed iyo hooy ayaa noqotay caqabadda koowaad ee ugu weyn. Caqabadaha labaad iyo saddexaad marka la eego, ku dhowaad saddex meelood meel (30 boqolkiiba) jawaab-bixiyaashu waxay  kala xushee caqabado ka jira qiimo iyo qadarin la'aan iyo awood xirfadeed la'aan kahortaagan inay dowr firfircoon ka cayaaraan arrimohooda, waxaana caqabadahaas loo aaneynayaa jilayaasha ka baxsan barakacayaasha, oo ay ku jiraan kuwa uu waajibka ka saarnaa inay u fududeeyaan ka qaygelintooda arrimaha khuseeya bulshooyinkooda (kuwaasina waa hay'adaha maxalliga ah iyo horjoogayaasha xerooyinka).

## 5.2 Caqabadaha ugu waaweyn ee ka hor taagan Barakacayaasha Ragga ah inay ka-qaybgalaan arrimaha khuseeya bulshooyinkooda

79. Boqolkiiba lix iyo toban jawaab-bixiyaashu waxay caddeeyeen in "ragga barakacayaasha ah oo aan helin xogta ku saabsan hawlaha, geedi-socodyada iyo dadaallada ka dhex socda bulshooyinkooda" ay tahay caqabadda koowaad ee ugu weyn ee ragga barakacayaasha ah ka hortaagan ka-qaybgalka arrimaha khuseeya bulshooyinkooda. Natiijadan ayaa laga yaabaa inay la xiriirto xaqiiqda ah in helitaanka xogta iyo daahfurnaanta ay wali yihiin arrimo taagan, maadaama dhowr shakhsiyaad oo aan lasoo dooranin kanasoo jeedo beelaha u badan deegaanga ay isku koobaan jagooyinka hoggaamin ee xeryaha barakacayaasha.

80. Waa muhiim in la tilmaamo, si kastaba ha ahaatee, in kala duwanaansho soo ifbaxday markii la falanqeynayay jawaabihii laga soo ururiyay deegaanno gaar ah iyo kooxaha beelohooda la caddeeyay. Jawaab-bixiyeyaasha ku sugan gobolka Banadir iyo kuwa ku sheegay beeshooda inay tahay Dir waxay sheegeen "cabsi laga qabo aargoosi ka yimaada dhanka Al Shabaab" inay tahay caqabadda koowaad ee ugu weyn ee ragga barakacayaasha ah ka hor taagan inay ka qaybqaataan arrimaha khuseeya bulshooyinkooda. Si kastaba ha ahaatee, jawaab-bixiyeyaasha loo aqoonsaday inay kasoo jeedaan beelaha Bantuu ee Soomaaliyeed ayaa u arko in "barakacayaasha ragga ah aan loo arkin inay dad muhiim ah yihiin, oo ay sidaas u arkaan odayaal dhaqameedkooda, horjoogayaasha xeryaha iyo hay'adaha maxalliga" ay tahay caqabadda koowaad ee ugu weyn. Jawaabaha ay bixiyeen dadka u dhashay beelaha Soomaali Bantu ayaa lala xiriirin karaa faquuqa weligood lagu hayay iyo heyb-sooca ka dhanka ah bulshadooda.

124 Boqolkiiba jawaab bixiyaasha barokacayaasha ee xushay jawaabtaan / ikhtiyaarka labaad ee carqalada weyn ayaa ka ah 56 dhibcood oo ka sareysa kuwa kaqaybqaatayaasha aan ahyn  barakacayaal (boqolkiiba 78 marka loo eego boqolkiiba 22).

81. Caqabadda labaad ee ugu weyn ee ay doorteen jawaab-bixiyeyaasha intooda badan (15 boqolkiiba) waxay ahayd in "ragga barakacayaasha ah aanay helin waqti iyo dhaqaale ay uga qaybqaataan arrimahan".[125] Jawaab-bixiyeyaasha gobolka Banadir badankood we ka duwanaayeen inta kale marka la eego xulashada caqabadda labaad ee ugu weyn, waxayna sheegeen in "in odayaad dhaqameedyada beelaha ee dadka barakacayaasha ah in aanay u ogolaanin ragga kale ee barakacayaasha ah inay ka qaybqaataan arrimaha khuseeya bulshada." Fikirkaas oo kale waxaa qaba jawaab-bixiyeyaasha isku tilmaamay inay kasoo jeedaan beelaha Dir iyo Baatuu Soomaali.

82. Caqabadda seddexaad ee ugu weyn marka la eego, boqolkiiba inta ugu badan ee jawaab-bixiyeyaasha (14 boqolkiiba) waxay doorteen "in odayaad dhaqameedyada beelaha ee dadka barakacayaasha ah in aanay u ogolaanin ragga kale ee barakacayaasha ah inay ka qaybqaataan arrimaha khuseeya bulshada." Jawaab-bixiyeyaasha ugu badan ee ka soo jeeda gobolka Banaadir iyo kuwa isku tilmaamay inay kaoo jeedaan beelaha Dir iyo Soomaali Bantu waxay doorteen "cabsi laga qabo maleeshiyo beeleed ku sugan xeryaha" inay tahay caqabadda saddexaad ee ugu weyn ee ragga barakacayaasha ah ka hortaagan ka-qaybqaadashada arrimaha khuseeya bulshada.

83. Isku soo wada duub, marka la eego labada caqabadood ee ugu horreeyo ee ay wajahayaan ragga barakacayaasha ah, ku dhawaad seddex meelood meel dadka la wareystey (31 boqolkiiba) ayaa u sababeeyey xog la'aan iyo dhaqaalaha iyo waqtiga oo xaddidan iyo waqtiga. Caqabadda saddexaad ee ugu weyn, jawaab-bixiyaashu waxay ku tilmaameen falal xakamayn/caburin iyo saamayn leh oo ay ku dhaqmaan xubnaha xilalka haaya una geystaan barakacayaasha, haddii aan tilmaanno waa odayaal dhaqameedyada beelaha. Intaa waxaa dheer, jawaab-bixiyeyaasha gobolka Banadir waxey doorteen labo kamid ah sadexda caqabadood ee ugu waaweyn ee soo food saara fursadaha ay heli karaan barakacayaasha ragga ah ee laxiriira xasilooni darida, waxayna ku tilmaameen "cabsi laga qabo maleeshiyo beeleed ku sugan xeryaha" iyo "cabsi laga qabo aargoosi ka yimaada dhanka Al Shabaab." Ma cadda in xulashooyinkaani ay muujinayaan xaalad lagu garto xasillooni darro oo ka jirta goobahan marka la barbardhigo goobaha kale ama in loo arki karo in aan si ku filan looga gaashaaman khatarahan, ama in arrimahani ay ka dhasheen sababo kale.

## 5.3 Caqabadaha ugu waaweyn ee ka hor taagan Barakacayaasha Haweenka ah inay ka-qaybgalaan arrimaha khuseeya bulshooyinkooda

84. Marka laga hadlayo saddexda caqabadood ee ugu weyn ee ka hor taagan haweenka barakacayaasha ah inay ka qaybqaataan arrimaha khuseeya bulshadooda, inta badan jawaab-bixiyeyaasha,[126] (26 boqolkiiba) waxay tilmaameen in caqabadda ugu weyn ee ugu horeeya ay yihiin "barakacayaasha haweenka oo aad ugu mashquulsan daryeelka carruurta iyo howlaha guriga." Jwaabtan waxaa doortay rag ka tiro badan haweenka (54 ayaa sidaas dooratay waxaana sidaas si ka duwan sheegay 46 boqolkiiba), sidoo kale waxaa jawaabtaas bixiyay tiro Barakacayaal ah oo ka badan dadka aan barakacayaasha ahayn (77 oo la barbardhigayo 23 boqolkiiba). Sida aan kor ku soo sheegnay, guud ahaan iyadoo haweenka barakacayaasha ah ay qabtaan hawlaha guriga, ayaa haddana waxaa intaas usii dheer inay quutul daruuriga usoo dhiciyaan ku dhowaad kala bar qoysaska barakacayaasha ah ee dalka ku sugan. Tani waa in sidoo kale loo arko inay sabab u yihiin dowrka jinsiga ee dhaqanka soo-jireenka ah laga dhaxlay sinaan la'aanta jinsiga ee Soomaaliya,[127] kaas oo haweenka ku koobo hawlaha guriga.

125 Kuwa doortay carqaladdan, kala duwanaansho ayaa laga duubay inta u dhaxaysa ragga (56 boqolkiiba) iyo haweenka (43 boqolkiiba) iyo sidoo kale iyo inay sii kordhayaan inta udhaxeysa barokacayaasha (boqolkiiba 80) iyo kuwa aan ahayn barokacayaasha (20 boqolkiiba).

126 832 jawaabeyaasha la wareystay, 698 ayaa ka jawaabay su'aashan.

127 Fiiri UNDP, Jinsiga ee Soomaaliya: warbixin Kooban II, 2014, faq. 3-4, at https://reliefweb.int/sites/reliefweb.int/files/resources/Gender%20in%20Somalia%20Brief%202.pdf (markii ugu dambeysay ee la galay boggan 27 Oktoobar 2018); UNDP (2012) Warbixinta Horumarinta Aadanaha ee Soomaaliya 2012: Awoodsiinta Dhalinta Nabadda iyo Horumarka, p. xviii, oo ah ka eeg http://hdr.undp.org/sites/default/files/reports/242/somalia_report_2012.pdf (Markii ugu dambeysay ee lagalay boggan 12 Nofeembar 2018).

85. Marka laga hadlayo carqaladda labaad ee ugu weyn ee haweenka barakacayaasha ah ka haysata ka-qaybgalka arrimahan, sagaal iyo toban (19) boqolkiiba jawaab-bixiyeyaasha waxay tilmaameen in “barakacayaasha ragga ah aanay u ogolayn haweenka barakacayaasha ah inay ku lug lahaadaan arrimaha khuseeya bulshadooda.” Caqabadda saddexaad ee ugu weyn ee haweenka barakacayaasha ah ka haysata ka-qaybqaadashada arrimahan waxay lagasoo dheehday hadba sida jawaab-bixiyeyaashu usoo xusheen (17 boqolkiiba) waxay u dhignayd in “haweenka barakacayaasha ah aan lagala tashanin arrimaha khuseeya bulshadooda.”

86. Isku soo wada duub, marka la eego labada caqabadood ee ugu horeeya uguna waaweyn ee haweenka barakacayaasha ah ka haysta inay ku lug yeshaan arrimaha bulshada, ku dhawaad kalabar jawaab-bixiyeyaasha (45 boqolkiiba) waxay u sababeeyeen qeyb qeybinta jinsiga ee shaqada ee dhaqan ahaan ka jira shaqo-bixinta hay’adaha dowladda iyo waaxda gaarka loo leeyahay iyo ad-adeyg/qallafsanaan ka dhan ah jinsiga oo raggu ku dhaqmaan. Caqabadda saddexaad ee ugu weyn (wadatashi la’aan) ayaa u muuqata inay ka turjumayso, dhibaato guud oo aan u gaar ahayn jinsiga isla markaana saamaynaysa barakacayaasha oo ah qayb kamid ah bulshada, sida ay caddeysay cilmi baaristan.

# 6. GUNAANAD

87. Xuquuqda barakacayaashu u leeyihiin inay ka qaybgalaan arrimaha iyaga saameeynta ku leh waxay ku xusanyihiin xeerarka iyo halbeegyada xuquuqul insaanka ee dalka iyo kuwa caalamiga.[128] Si kastaba ha ahaatee, barakacayaasha la wareystay ma helaan xuquuqda ka-qaybgalka, waxaana lasoo sheegaa in ka-qaybgalkooda/la-falgalkooda hayádaha iyo mas'uuliyiinta bulshada ee deegaanka ay hooseeyaan. Codadka barakacayaasha la wareystay waxaa lagu caburiyaa hab maamul (iyo xakamayn) la xakamaynayo deegaamada/xeryaha barakacayaasha taas oo ay geysanayaan dad aan lasoo dooranin sida "waardiyeyaasha albaabada" iyo dayacaad iyo xil iskasaarid la'aan lagala kulmo hay'adaha. Waxaa muuqda in farqi weyn uu u dhexeeyo barakacayaasha la wareystay iyo bulshada marti gelisay, dadaallada lagu doonayo in lagu daboolo farqigaas ayaa ah caqabad weyn oo taagan.

88. Natiijooyinka sahanka ayaa muujinaya in barakacayaasha la wareystay aanay si macno leh ugu lug yeelanin geedi-socodyada muhiimka ah, sida doorashooyinka iyo dib u eegista dastuurka. Codadkooda ayaa sidoo kale waxay ka maqan yihiin dadaallada nabadeed iyo dib-u-heshiisiineed ee heerarka kaladuwan, iyagoo xataa ka mid ahaa (inta bandanna ay soo noqnoqoto) dhibanayaasha colaadaha, wixii natiijo ah ee soo baxana waxay u badan tahay inay noloshooda saameyn weyn ku yeeshaan. Intaa waxaa sii dheer, barakacayaasha la wareystay waxay isu arkaan inay banaanka ka joogaan qaab-dhismeedka siyaasadeed ee hadda jira iyo awood qeybsiga, kaas oo ku dhisan nidaamka ku salaysan beelaha ee 4.5. [129] Waxay u muuqan kartaa in nidaamka ku salaysan beelaha ee 4.5 laga helayo xoogaa u-wada-dhamaan ah, laakin ma aha mid daboolaya ama wax ka qabanaya arrimaha qaab-dhismeedka ku saabsan ee dhumucda fog.

89. Barakacayaasha ka qaybgalay daraasaddan waxay la kulmaan caqabado guud oo ay la wadaagaan inta badan dadka Soomalaiyeed, oo ay ka mid yihiin culayska ka heysta helitaanka hab nololeed kufilan, yaraan ka jirto helitaanka adeegyo, khataro amni, xaal marin wax-ku-ool ah oo aanay ka helin xadgudubyada xuquuqul insaanka iyo takrifalka, iyadoo haweenkuna ay caqabado kala kulmaan qaab-dhismeedka ku adag jinsiga. Si kastaba ha ahaatee, barakacayaasha la wareystay ayaa sidoo kale waxay la kulmaan caqabado, in kastoo aanay iyaga gaar u ahayn, inta badan iyaga saameeya sababo la xiriiro xaaladaha ay ku suganyihiin: inay hiilo/badbaado ka waayaan beelohooda, u-nuglaanshaha hab-dhaqannada dhiig-miiratada/kafaa'iideystayaasha iyo amni la'aan muddo jirta oo ka dhalata hooy ama deegaan ka-saarista khasabka ah ee soo noqnoqota. Ka-qeybgalka geedi-socodka nabadeynta iyo dhismaha dowladnimo wuxuu u baahantahay ugu yaraan dareen lahaansho oo aad dareentin in aad dalka wax ku leedahay iyo odoros la odoroso mustaqbalka, waana arrimo, marka la eego xaaladaha ay ku suganyihiin barakacayaasha, ay adagtahay inay qaabeeyaan qorshooyinkooda, go'aannadooda iyo tallaabooyinkooda.

90. Inkastoo natiijooyinka kasoo baxay daraasaddan ay sharraxaad ka bixinayaan xaaladaha fuud ee ay ku suganyihiin Barkacayaasha Soomaaliya, ayaa hadana ka-sokow baahida loo qabo hawlaha bina-aadamnimo, waxqabadyo horumarineed iyo dadaallo siyaasadeed oo loogu hagaajinayo nolosha barakacayaasha ee xilligan la jooogo iyo muddada fog, waxay si taxadar leh u xaqiijinayaan in Barakacayaashu mudanyihiin lagusoo daro oo ay ka qaybqaataan

128 Warbixinta Wakiilka Xoghayaha Guud, Mr. Francis M. Deng, wuxuu u gudbiyay iyadoo la raacayo Guddiga xallinta Xuquuqul Insaanka 1997/39, Addendum, Mabaadi'da hagaysa ee barokaca gudaha, E / CN.4 / 1998/53 / Add.2 , 11 Febraayo 1998, oo ah ka eeg https://www.unhcr.org/protection/idps/43ce1cff2/guiding-principles-internal-displacement.html (Markii ugu dambeysay ee la galay boggan 28 Noofambar 2018).

129 Faahfaahinta qaab-dhismeedka qaab qabiil ee ku saleysan 4.5, fadlan ka eeg qoraal hoosaadka (footnote) 12 ee kore.

saaxada dadweynaha iyo nolosha siyaasadeed ee Soomaaliya iyadoo la tixgelinayo baaxadda ay leedahay qaybtan ka midka ah bulshada iyo iyagoo ku sugan guud ahaan dalka oo dhan.

91. Waa masúuliyad saaran hay'adaha Soomaaliyeed ee heer kasta leh, maadaama waajibka koowaad uu iyaga saaranyahay, inay si firfircoon ula shaqeeyaan barakacayaasha si faham wanaagsan looga qaato heerka ka-qaybgalkooda arrimaha siyaasadda iyo dadweyne. Tani waxay muhiimad gaar ah u leedahay marka go'aamada la gaaray ay si toos ah u saamaynayaan noloshooda, laakiin sidoo kale marka go'aamada guud ahaan loogu talagalay inay qaabeeyaan mustaqbalka dalka.

# 7. TALO SOO JEEDIN

Ku socoto Dowladda Federaalka Soomaaliya

92. Iyadoo lala kaashanayo beesha caalamka, isla markaana lagala tashanayo dadka deegaanka ee hawshu khusayso, oo ay ku jiraan barakacayaasha, xaqiiji ka-miro-dhalinta Dadaalka/ qorshaha Xalka Waara, oo ay ka mid yihiin ku-noqoshada iskeed ah, oo si bed-qab iyo sharaf leh barakacayaashu ugu noqdaan deegaanadii ay asal ahaan ka yimideen, iyo is-dhexgal bulsho oo waara.

93. Samee daraasado iyo cilmi baaris dheeraad ah si loo fahmo loona xaqijiyo in Barakacayaashu ay ku naaloodaan xuquuqda iyo xorriyadda aasaasiga ah ee ay leeyihiin muwaadiniinta kale ee Soomaaliyeed, sida ku xusan Dastuurka Soomaaliya iyo sharciga caalamiga iyo kan heer gobol xuquuqda aadanaha, oo ay ku jiraan xuquuqda ka-qeybqaadashada iyo tan siyaasadeed; xuquuqda xorriyadda ra'yiga iyo hadalka, ka-mid-noqoshada iyo kulanka.

94. Ansixi Heshiiska Midowga Afrika ee Ilaalinta iyo Kaalmaynta Dadka Barakacayaasha ah ee Afrika (Heshiiskii Kampala).

95. Xaqiiji ka-qaybgal firfircoon oo Barakacayaash uga qaybgalaan dejinta iyo meel-marinta siyaasadaha, ayna ku jiraan diyaarinta siyaasad xero-ka-bixin oo u danaynaysa dhibanayaasha, siyaasaddaas oo la hirgelinayo loona hogaansamayo haddiiba loo arko in xero-ka-saaristu noqoto lagama maarmaan go'aamaduna saamaynayaan barakacayaasha. Waana in tallaabooyinkaas waafaqsanyihiin Mabaadi'da Hagta Barakaca Gudaha iyo halbeegyada kale ee caalamiga ah ee xuquuqul insaanka oo ay ku jiraan Tilmaamaha loogu talagalay Dowladaha ee ku saabsan hirgalinta wax ku oolka ah ee xuquuqda kaqeybgalka arrimaha dadweynaha.[130]

96. Abuur jawi u saamaxaya barakacayaasha inay si macno leh uga qayb-qaataan geedi-socodyada qaran ee kadda socda iyo kuwa mustaqbalka, oo ay ku jiraan dib u eegista dastuurka, dib u habeynta waaxda amniga, doorashooyinka, oo uu ku jiro geedi-socodka diiwaangelinta cod-bixiyaha. Intaa waxaa sii dheer, in la aasaaso nidaam matalaad oo khuseeya doorashooyinka 2020 iyo doorashooyinka kale ee mustaqbalka, nidaamkaas oo ay u wada dhanyihiin dhamaan muwaadiniinta, oo ay ku jiraan barakacayaasha iyo qeybaha kale ee la faquuqo ee kamid ah bulshada Soomaaliyeed, iyo in lagu dhaqmo mabda'a qof-iyo-cod.

97. Horgee Baarlamaanka qabya-qoraal sharci oo ku saabsan helitaanka macluumaadka (xogta), sida ku xusan Dastuurka Federaalka ee Kumeelgaarka ah, kaas oo xambaarsan qodobo cad oo la xiriira hab waxqabad leh oo kor loogu qaadayo helidda macluumaadka ee barakacayaasha iyo kooxaha kale ee la takooro.

98. Hubi in dhaqannada dhiigmiirashada (ka faa'iideysiga) ah ee ka dhanka ah barakacayaasha, sida albaab-ilaalinta, lagu bedelo hogaan ay si xor ah usoo doorteen barakacayaasha, iyo in qaab-dhismeedka maareynta ay ka turjumto danaha iyo himilooyinka barakacayaasha.

100. Qaad talaabooyin munaasib ah si loo xaqiijiso in barakacayaashu ku naaloodaan xuquuqdooda la xiriirta bed-qabka jirka iyo sharafta, oo ay kujirto ka-hortagga iyo wax ka qabashada xadgudubka galmada ee ku saleysan jinsiga ee ka dhaca gudaha iyo hareeraha xarumaha ay barakacayaashu ku noolyihiin; xaqiijinta in ciidamada amniga ee Dowladda ee loo xilsaaro inay ilaaliyaan meelaha ay deganyihiin barakacayaasha ay ku jiraan saraakiil dumar ah oo loo carbiyay ka hortagga iyo wax ka qabashada xadgudubka galmada ee ku saleysan jinsiga, iyo sidoo kale inay ku jiraan xubno ka soo jeedo beelaha/bulshada la takooro.

130 Xeerarka qabyada ah ee Dowladaha ee ku saabsan hirgalinta wax ku oolka ah ee xuquuqda kaqeybgalka arrimaha dadweynaha, A / HRC / 39/28 ka eeg https://undocs.org/A/HRC/39/28 (Markii ugu dambeysay ee la galay boggan 23 Abriil 2019).

101. Fiiro gaar ah u yeeslo adeegsiga awoodda marka la qaybinayo gargaarka bini'aadminimo, waana in awoodda la adeegsado kaliya marka ay lagama maarmaan noqoto waana in awooddaas ay noqoto mid u dhiganta waxa loogu talo galay; iyo in la xaqiijiyo tababar iyo hab-fulinta wanaagsan oo lala wadaago hay'adaha dowladda ee sugaya amniga goobaha lagu qaybinayo gargaarka bani'aadanimo.

Ku socoto Dowlad Goboleedyada, Dowladaha Hoose iyo Goleyaasha Deegaanka

102. Xaqiiji kaqeybgal firfircoon oo barakacayaashu uga qaybgalaan diyaarinta, meel-marinta iyo hirgelinta shuruucda iyo siyaasadaha saameeynaya iyaga ee heer Dowlad Goboleed, waana in ka-qaybgalkaasi uu waafaqsanaadaa Mabaadi'da Hagta Barakaca Gudaha iyo halbeegyada kale ee caalamiga ah ee xuquuqul insaanka oo ay ku jiraan Tilmaamaha loogu talagalay Dowladaha ee ku saabsan hirgalinta wax ku oolka ah ee xuquuqda kaqeybgalka arrimaha dadweynaha.

103. Qaad tillaabooyin lagu horumarinayo wadashaqaynta hay'adaha dowladda ee ka hawlgala deegaanada barakacayaasha martigeliyay ay la leeyihiin barakacayaasha; inay xaqiijiyaan inay si joogto ah u siiyaan barakacayaasha xogta la xiriirta xaaladohooda, uguna gudbiyaa hab iyo af ay fahmi karaan; isla markaana xaqiiji in hay'adaha maxalliga ah iyo ciidamada amniga ay ka warqabaan xuquuqda barakacayaasha sida ku xusan Dastuurka Soomaaliya iyo sharciga caalamiga ee xuquuqda aadanaha.

104. Qaad talaabooyin ku habboon oo lagu xaqiijinayo bed-qabka iyo amniga barakacayaasha, gaar ahaan hawlaha la xiriira ka-hortagga iyo wax ka qabashada rabshadaha xadgudubka galmada ee ku saleysan jinsiga ee ka dhaca gudaha iyo hareeraha xarumaha ay barakacayaashu ku noolyihiin.

105. Fiiro gaar ah u yeelo adeegsiga awoodda marka la qaybinayo gargaarka bini'aadminimo, waana in awoodda la adeegsado kaliya marka ay lagama maarmaan noqoto waana in awooddaas ay noqoto mid u dhiganta waxa loogu talo galay; iyo in la xaqiijiyo tababar iyo hab-fulinta wanaagsan oo lala wadaago hay'adaha dowladda ee sugaya amniga goobaha lagu qaybinayo gargaarka bani'aadanimo.

106. Qaad tallaabo lagu sugayo amniga baakacayaasha inta ay ku jiraan xaaladdaas nololeed iyo in laga fogaado in si khasab ah looga saaro xeryaha ay ku jiraan; diyaarinta siyaasad xero-ka-bixin oo u danaynaysa dhibanayaasha, siyaasaddaas oo la hirgelinayo loona hogaansamayo haddiiba loo arko in xero-ka-saaristu noqoto lagama maarmaan, sida marka goobaha ay barakacayaashu degganyihiin ay noqdaan goobo aan nolol ku habboonayn, waana in dhamaan habraacyada jira loo maro, sidoo kalena deegaano kale oo lagu kaaftoomo loo helaa barakacayaasha, iyo in tallaab laga qaado kuwa amarka ku bixiya, ku lug yeesha ama fuliya xero-ka-kicinta (haddii ay Dowladda ka tirsanyihiin iyo haddoo aanay ka tirsanayn labduba) ee aan raacin halbeegyada xuquuqul insaanka ee khuseeya arrimahaas.

Ku socoto Beesha Caalamka

107. Ku bixi kaalmo maaliyadeed iyo mid farsamo barnaamijyada gacanta ka geysanaya Dadaalada Xalka Waara.

108. xaqiiji bixinta kaalmada iyo taakuleynta geedi-socodyada nabadaynta dhismaha dowladnimada ay tixgalin siiyaan baahida barakacayaasha isla markaasina wax ka qabtaan, sidoo kalen ay tixgeliyaan arrimaha badbaadinta oo ay ku jiraan ka-hortagga ka-faa'iideysiga jinsiga iyo gabood-fallada iyo heerarka takoorka iyo liididda eel ala beegsado deegaanadaas.

109. Sii wad dhiirigelinta madaxda Soomaaliyeed lagusii dhiirigeliyo xaqiijinta in barakacayaashu

ku naaloodaan xuquuqda ka-qeybgalka, oo ay ku jiraan hawlaha dib u eegista dastuurka, doorashooyinka, dib-u-habeynta waaxda amniga iyo geedi-socodyada nabadaynta iyo dib-u-heshiisiinta.

110. Ku martiqaad una fududee wakiilada barakacayaasha ka-qaybgalka, iyadoo dhaqaale lagu kaalmaynayo, shirarka caalamiga ah si ay [ka-qaybgalayaasha kale] ula wadaagaan aragtidooda ugana qeybgalaan qaabeynta siyaasadaha saameynta ku leh noloshooda.

111. Joogteey ka-go'naanshaha taabbagelinta u-wada-dhamaanshaha iyo ka-qaybgalka barakacayaasha iyadoo la taabba-gelinayo ilaalinta waxqabadkooda lana xaqiijinayo kaalmadu inay u gaartay si nabad ah oo lagu xisaabtami karo, isla markaana la siinayo barakacayaasha fursado macno leh oo loo simanyahay oo lagu helo adeegyo iyo awood-siinta bulshada.

112. Gacan ka geyso dib-u-heshiisiinta muddada fog ee laga dhex samaynayo barakacayaasha iyo bulshada ay martida u yihiin iyada oo loo marayo soo bandhigidda habab wanaagsan oo wax looga qabto arrimaha faquuqa iyo takooridda lagu hayo barakacayaasha loona bedelo waxqabad asaasi ah.

Ku socoto Ururada Bulshada Rayidka ah

113. Kordhiyo wadashaqaynta iyo wacyi-gelinta kooxaha bulshada rayidka ah ay la samaynayaan barakacayaasha ku nool deegaannadooda, iyadoo ujeeddadu tahay taageeridda iyo dhiirrigelinta kaqeybgalkooda siyaasadeed oo ay ka mid yihiin doorashooyinka maxalliga ah, kuwa heer gobol iyo kuwa heer qaran.

114. Hubi in mashaariicda, barnaamijyada iyo siyaasadaha ururada bulshada rayidka ah ay qayb ka yihiin baahiyaha gaarka ah ee barakacayaasha, iyada oo si gaar ah diiradda loo saarayo wax ka qabashada saameynta baaxaddeedu aanay isu dhigmin ee jinsiga, taas oo ka dhalata xalladda barakacnimo ee ay ku suganyihiin barakacayaasha.

115. Door weyn ka cayaaru-wada-dhamaanshaha bulshada si loo dardargeliyo kobcinta aqbalaadda ay bulshada martida loo yahay aqbasho barakacayaasha, si looga gun gaaro oo si dhamaystiran loogu xaqiijiyo xuquuqdooda.

# LIFAAQYO

### Hab-shaqo Sharciyadeed
### Xuquuqda Dadka Barakacayaasha aah

Barakacayaasha — iyo kooxaha kale ee nugul — waxay ku naaloonayaan xuquuq la mid ah tan dadka kale ee dalkiida ku nool ay ku naaloodaan. Heerka caalamiga ah, qoraalka ugu muhiimsan ee si gaar ah u khuseeya barakacayaasha ayaa ah Mabaadi'da Hagta Barakaca Gudaha,[131] kuwaas oo ka turjumaya sharciga caalamiga ah ee xuquuqul insaanka iyo sharciga caalamiga ah ee xilliyada colaadaha.[132]

Mabaadi'da Hagta Barakaca Gudaha waxay tilmaamayaan in Barakacayaasha aan lagu takoorin sababo la xiriira xaaladdooda barakac oo aan laga hor-istaagin ku-naaloonshaha, arrimo badan, oo ay ku jiraan xuquuqda soo socota: xaqa xorriyadda aragtida iyo hadalka; ka-mid-noqoshada ay si xorriyad leh uga mid-noqdaan oo ay si siman uga qaybqaataan arrimaha ka dhex jira bulshada; inay codeeyaan oo ay ka qaybqaataan dowladda iyo arrimaha dadweyne; oo ay ku jiraan inay fursad u helaan hababka lagama maarmaanka u ah ka-faa'iideysiga xuquuqdaas.[133]

Ajandaha Horumarinta Joogtada ah ee 2030-kii uu ansaxiyay Golaha Guud ee loo dhanyahay bishii Sebtember 2015 wuxuu aqoonsan yahay barakacayaasha iyo kooxaha kale iyo baahida loo qabo awood-siintooda.[134] Yoolalka Horumarka Joogtada ah (SDGs) waxaa sii xoojiya Ajendaha Bani'aadanimo, oo ay ka mid tahay ka-go'naanshaha *In Aan Cidna Laga Tegin*. Gaar ahaan, Ajendaha Bani'aadanimo wuxuu ugu baaqayaa dowladaha inay "wax ka qabtaan barakaca." `Habkan wax looga qabanayo laguna yaraynayo barakaca ayaa xoogga saaraya baahida loo qabo in la haqab tiro "baahida bani'aadanimo ee degdega ah iyo in la horumariyo u-adkeysiga iyo isku-filnaanshaha dadka barakacay iyo bulshada ay martida u yihiin." Dowladaha waxaa looga baahan yahay in ay si sharaf iyo amaan leh wax uga qabtaan una yareeyaan barakaca gudaha ugu yaraan 50 boqolkiiba marka la gaaro sanadka 2030.[135]

---

131 Warbixinta Wakiilka Xoghayaha Guud, Mr. Francis M. Deng, wuxuu u gudbiyay iyadoo la raacayo qaraarka Guddiga 1997/39, Addendum, Mabaadi'da Hanuuninta ee Barakaca Gudaha, E / CN.4 / 1998/53 / Add.2, 11 Febraayo. 1998,ka eeg https://www.unhcr.org/protection/idps/43ce1cff2/guiding-principles-internal-displacement.html (Markii ugu dambeysay ee lahelay 28 Noofambar 2018) . Mabaadi'da ayaa dejisay xuquuqda la xiriirta ilaalinta barakaca iyo ilaalinta inta lagu jiro barakaca iyo sidoo kale gargaarka bini'aadanimo iyo soo celinta dib-u-dejinta iyo dib-u-dhexgalka. Guddiga Xuquuqul Insaanka ee markaa ka dib 2004 wuxuu muujiyey sida ay ugu faraxsan yihiin mabaa'diida tilmaamaya inay yihiin aalad muhiim u ah wax ka qabashada barakaca gudaha isla markaana soo dhaweynaya xaqiiqada ah in tiro sii kordheysa oo Dowladaha, Hay'adaha Qaramada Midoobey iyo ururrada aan dowliga ahayn ay u adeegsanayaan heer. Eeg E / CN.4 / RES / 2004/55, 20 Abriil 2004, barta (markii ugu dambeysay ee la galay boggan 28 Noofambar 2018). Heer gobol, Soomaaliya waxay saxiixday heshiiska Midowga Afrika ee Ilaalinta iyo Kaalmada Dadka Gudaha Ku Barokacay ee Afrika (Shirkii Kampala) 23kii Oktoobar 2009. Laakiin ma ayan ansixin ama kuma biirin.

132 Warbixinta Wakiilka Xoghayaha Guud, Mr. Francis M. Deng, wuxuu u gudbiyay iyadoo la raacayo qaraarka Guddiga 1997/39, Addendum, Mabaadi'da Hanuuninta ee Barakaca Gudaha, E/CN.4/1998/53/Add.2, 11 Febraayo 1998, Faq 9, ka eeg https://documents-dds-ny.un.org/doc/UNDOC/GEN/G98/104/93/PDF/G9810493.pdf?OpenElement (markii ugu dambeysay ee la galay boggan 28 November 2018 ). Sidoo kale eeg Warbixinta Ergeyga Gaarka ah ee Qaramada Midoobay ee xuquuqda aadanaha ee dadka gudaha ku barokacay (A/72/202), 24 Luulyo 2017, Faq. 18, ka eeg https://www.ohchr.org/Documents/Issues/IDPersons/A-72-202.pdf (markii ugu dambeysay ee la galay boggan 28ka Nofeembar 2018). Ujeeddooyinka Mabaadi'da,"Dadka gudaha ku barakacay waa shaqsiyaad ama kooxo dad ah oo lagu qasbay ama ku qasbanaday inay ka cararaan ama ka baxaan guryahooda ama meelaha ay dagan yihiin sii aay uu degaan meel, in particular as a result of or in order to avoid the effects of armed conflict, situations of generalized violence, violations of human rights or natural or human-made disasters, and who have not crossed an internationally recognized State border." (Faq. 2). gaar ahaan sabab uu ah ama si looga fogaado waxyeelada iskahorimaadyada hubeysan, xaaladaha qalalaasaha guud, ku xadgudubka xuquuqul insaanka ama masiibo dabiici ah ama dad sameeysay, oo aan ka soo tallaabin soohdinta dawladdu aqoonsan tahay ee caalamiga ah. " (Faq. 2).

133 Warbixinta Wakiilka Xoghayaha Guud, Mr. Francis M. Deng, wuxuu u gudbiyay iyadoo la raacayo qaraarka Guddiga 1997/39, Addendum, Mabaadi'da Hanuunka ee Barakaca Gudaha, E / CN.4 / 1998/53 / Add.2, 11 Febraayo. 1998, Mabaadi'da 22 (a), 22 (c) iyo 22 (d), ka eeg https://documents-dds-ny.un.org/doc/UNDOC/GEN/G98/104/93/PDF/G9810493.pdf?OpenElement (markii ugu dambeysay ee la galay boggan 28 Noofambar 2018).

134 Qaraarka lagu ansixiyay Golaha Guud ee 25 September 2015 (A/RES/70/1), ka eeg ka eeg https://www.un.org/ga/search/view_doc.asp?symbol=A/RES/70/1&Lang=E (markii ugu dambeysay ee la galay boggan 4-ta Maarso 2019).

135 Ajandaha Wax-ka-qabashada Arrimaha Bani'aadanimada, 5ta Masuuliyadaha ee Muhiimka ah, 24 Wax soo kordhinta ka eeg https://agendaforhumanity.org/agendaforhumanity (markii ugu dambeysay waxaa la booqday boggan 4-tii Maarso 2019).

Heerka gudaha dalka, Dastuurka Federaalka Ku-meelgaarka ah kuma jiraan qodobo la xiriira barakacayaasha mana jiraan sharciyo iyo xeerar dalka ka jira oo khuseeya oo gudaha qaybtan weyn ee kamidka ah bulsh-weynta dalka ku nool. Qoraalka kaliya ee sharci ah ee heer federaal oo laxiriira barakacayaasha waa Sharciga Dhismaha Hay'adda Qaran ee Dib-u-soo-celinta Qaxootiga iyo Dib-u-dejinta Barakacayaasha, sharcigaas oo uu meel mariyey Baarlamaanka Faderaalka 3dii Febraayo 2016.[136] Dastuurrada u gaarka ah Dowlad Goboleedyada iyo Somaliland kuma jiraan qodobo khuseeya Barakacayaasha.

Arrinta ku saabsan barakaca gudaha ee Soomaaliya waxay ku qorantahay Qorshaha Horumarinta Qaran ee Soomaaliya ee loogu talo galay muddada u dhexeysa (2017-2019) kaas oo ay ansixisay Dowladda Federaalka Soomaaliya bishii Juun 2016.[137] Qorshuhu wuxuu tilmaamayaa caqabadaha ugu waaweyn ee heysta barakacayaasha,[138] wuxuuna xoogga saarayaa baahida loo qabo in xal waara oo loo helo arrintaas. Intaa waxaa dheer, Tubta/Khariidadda Xuquuqda Aadanaha ee Soomaaliya (HRRM), ee la ansaxiyay bishii Agosto 2013kii oo ay hormuudka u ahayd Wasaaradda Haweenka iyo Horumarinta Xuquuqda Aadanaha ee DFS, waxaa ku jira mowduuc ku saabsan xuquuqda barakacayaasha, qaxootiga iyo dadka baahiyaha gaarka ah qaba iyo kooxaha kale ee nugul. Qorshe Hawleedka Hirgelinta HRRM wuxuu saadaalinayaa howlaha wax looga qabanayo baahiyaha beni'aadanimo si xal waara loogu helo barakacayaasha.

### Xaqa ka-qaybgalka arrimaha danta caamka ah ne iyo xaqa ka-qaybgalka siyaasadda

Qodobka 25aad ee Axdiga Caalamiga ah ee Xuquuqda Madaniga iyo Xuquuqda Siyaasadeed wuxuu aqoonsanyahay xuquuqda muwaadiniintu u leeyihiin inay ka qeybgalaan arrimaha dadweyne, ayna codeeyaan lana doorto, [waxaa kale oo uu aqoonsanyahay] xaqa in si siman loo wada helo adeegga dadweyne.

Sharciga caalamiga ah ee xuquuqul insaanka ma oggola in lagu kala sooco ku salaysan arrimaha soda isirka, midab, jinsi, af, diin, aragti siyaasadeed ama aragti kale, dhalasho ahaan ama bulsho ahaan halka uu kasoo jeedo qofka, hanti, dhalasho ahaan ama xaalad kale.[139] Xayiraad kasta waa in lagu saleeyaa ujeeddo macquul ah iyo shuruudaha caqli gal ah (tusaale ahaan, in la xaddido da'da ugu yar ee xaqa codaynta), waana in aan la hakin ama aan la laalin xuquuqdaas ay muwaadiniintu gudanayaan, haddii la hakinayo ama la laalayo waa in loo maraa oo kaliya sababo sharcigu jideeyay o oleh ujeedooyin ahna kuwo caqli gal ah.[140]

In kasta oo Axdiga Caalamiga ah ee Xuquuqda Madaniga iyo Xuquuqda Siyaasadu uusan soo rogeynin/ dejinaynin nidaam gaar ah oo doorasho, ayaa haddana nidaam kasta ee doorasho waxaa laga doonayaa in uu la jaan-qaado xuquuqda lagu dhowray qodobka 25aad, waana in loo maro mabda'a qof-iyo-cod ah.[141] Guddiga Xuquuqda Aadanaha ee Qaramada Midoobay wuxuu caddeeyey in Axdigu uu ka doonayo Dowladaha inay meel-mariyaan tillaabooyin lagu xaqiijinayo in muwaadiniintu helaan fursad wax ku ool ah oo ay ugu naaloodaan xuquuqda ay ilaalinayso.[142]

Waajibaadka ku qeexan Axdiga waxay ku xusan yihiin Dastuurka Ku-meelgaarka ah ee Jamhuuriyadda

136 Waxaa saxiixay oo sharciyeeyay Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka ah ee Soomaaliya 21 February 2016.

137 Dowladda Federaalka ee Soomaaliya, Qorshaha Horumarinta Qaranka ee 2017-2019, Diseembar 2016. p. 152, ka eeg http://mop.gov.so/wp-content/uploads/2018/04/NDP-2017-2019-1.pdf (markii ugu dambeysay ee la galay boggan 4-ta Maarso 2019).

138 Waxay kala yihiin: xukunka sharciga iyo dowladnimada, helitaanka dhulka iyo deganaashaha amniga , horumar loo dhan yahay, dukumeentiyo shaqsiyeed, kaqeyb gal danta guud iyo kaqeybgal, marin u helka adeegyada iyo suuqyada shaqada, iyo awoodda dib ula qabsashada miyiga. Fiiri Dowladda Federaalka ee Soomaaliya, Qorshaha Horumarinta Qaranka ee 2017-2019, Diseembar 2016, p. 151, at ka eeg http://mop.gov.so/wp-content/uploads/2018/04/NDP-2017-2019-1.pdf (markii ugu dambeysay ee la galay boggan 26 Noofambar 2018).

139 Guddiga Xuquuqda Aadanaha ee Qaramada Midoobay, Faallooyinka guud ee lambarka 25: Qod. 25aad (Ka Qaybgalka Arrimaha Dadweynaha iyo Xuquuqda Codbixinta), 57aad (1994), Faq. 3. Isla Tixraacaas., Faq 4 iyo 10.

140 Isla Tixraacaas., Faq 4 iyo 10

141 Isla Tixraacaas., Faq 21.

142 Isla Tixraacaas., Faq. 1. Tallaabooyin wanaagsan ayaa la qaadayaa si looga gudbo dhibaatooyinka gaar ka ah, sida faqriga iyo carqaladeynta xorriyadda dhaqdhaqaaqa, arag Faq. 11 iyo 12. Xaaladaha ku habboon, tallaabooyin wax-ku-ool ah ayaa la qaadi karaa si loo hubiyo in si siman loogu helo adeegga dadweynaha dhammaan muwaaddiniinta, arag Faq. 23.

Federaalka ee Soomaaliya (Dastuurka Federaalka Ku-meelgaarka ah). Qodobka 3.4 ee Dastuurka Federaalka Ku-meelgaarka ah wuxuu qirayaa “xukuumad loo wada dhanyahay oo ku dhisan wadatashi”, qodobkaas oo ka mid ah Mabaadi’deeda Asaasiga ah. Qodobka 22aad wuxuu qirayaa xaqa ka-qeybgalka siyaasadda, kaasoo ka kooban: xaqa abaabulka xisbiyo siyaasadeed iyo kaqeyb-qaadashada hawlaha xisbiyada siyaasadeed, iyo xaquuqda aad u leedahay in laguu dooran karo jago kasta oo ka dhex jira xisbi siyaasadeed. Qodobka 46aad (“Awoodda Shacabka”) wuxuu tilmaamayaa in nidaamka matalaadda dadweynaha uu qof kasta fursad u siinayo ka-qaybqaadashada. Qodobka 38aad ee Dastuurka Federaalka Ku-meelgaarka ah wuxuu qeexayaa xaddidaad la ogolyahay oo lagu sameeyo ku-naaloonshaha xuquuqda.[143] Dhamaan Dastuurrada Dowlad Goboleedyada iyo Somaliland waxay aqoonsan yihiin xaqa ka-qaybgalka siyaasadda iyo xaqa ka-qaybgalka arrimaha danta guud .[144]

Qodobka 5 (c) ee Heshiiska Caalamiga ah ee Ciribtirka Dhamaan Noocyada Takoorka Isir Takoorka[145] wuxuu tilmaamayaa in Dowladaha Xubnaha ka ah Heshiiska ay ka shaqeeyaan mamnuucidda iyo ciribtirka isir-takoorka noocydiisa oo dhan, iyo inay damaanad qaadaan xuquuqda qof kasta, iyada oo aan loo kala soocin isir, midab, asalka dalka ama qowmiyadda uu qofku kasoo jeedo, sinnaanta sharciga hortiisa, iyadoo lagu naaloonayo xuquuq badan. Waxaa ku jira xuquuqdaas, xaqa ka-qeybgalka doorashooyinka (codaynta iyo u istaagida jagooyin doorasho) oo ku saleysan halbeeg caalim ah loona simanyahay, iyo ka-qeybgalka Dowlada iyo sidoo kale qabashada howlaha dadweynaha ee heer kasta, iyo in si siman loo helo adeegga dadweynaha.

Faqradda 20aad ee Tilmaamaha Qabyada ah ee Dowladaha ee ku saabsan hirgalinta wax ku oolka ah ee xuquuqda kaqeybgalka arrimaha dadweynaha,[146] (Tilmaamaha Qabyada ah) waxay tilmaamaysaa in “Dawladuhu ay aqoonsadaan, ilaaliyaan oo hirgeliyaan xuquuqda sinnaanta iyo takoorid la’aanta, ayna xaqiijiyaan u-wada-dhamaanshaha ku-dhaqanka xaquuqda ka-qeybgalka arrimaha dadweynaha.” Waxay sidoo kale sii saadaalinayaan in “tallaabooyinka sharci-dejinta iyo siyaasadaha lagama maarmaanka ah, oo ay ku jiraan tallaabooyin gaar ah oo ku-meelgaar ah, iyo qaban-qaabooyinka hay’adeed lasoo asteeyo, la isla qaato oo la xoojiyo, iyo in la xaqiijiyo sinaanta ka-qaybgal ee ay u simanyihiin shakhsiyaadka iyo kooxaha la hayb-sooco ama la takooro, ay ka qayb-qaataan dhamaan heerarka geedi-socodyada go’aan-qaadashada iyo hay’adaha.” [147]

143 Qodobka 26-aad ee dastuurka Hirshabelle wuxuu leeyahay qodobo la mid ah.

144 Axdi-qarameedka dowlad goboleedka Galmudug, qodobka 21aad, ee xuquuqaha wax la dooran karo iyo in la doorto; Dastuurka Hirshabelle, qodobka 25aad, ee xuquuqaha kaqeybgalka siyaasadeed iyo doorashada iyo iyo inuu codeey lana doorto; Dastuurka Jubaland, qodobka 22aad, ee ku saabsan xuquuqda wakiilnimada siyaasadeed iyo ka-qeybgalka arrimaha dadweynaha, iyo qodobka 25aad, ee xuquuqda doorashada; Dastuurka Puntland, qodobka 41aad, xuquuqaha kaqeybgalka geedi socodka doorashada, iyo inuu codeeyo iyoi la doorto, iyo qodobka 15aad, guud ahaan xuquuqaha kaqeybgalka (howlaha siyaasadeed laguma xusin liistada); Dastuurka Dawlad-goboleedka Koonfur Galbeed, Qodobka 13-aad, ee xuquuqaha cod-bixinta iyo inuu codeeyo iyo in la doorto, iyo Qodobka 9.6.b, sii guudahaan xuquuqaha kaqeybgalka (laakiin keliya kuwa ku dhashay gobolka); Dastuurka Somaliland, Qodobka 22aad, wuxuu xaq u leeyahay inuu ka qeyb galo siyaasada, dhaqaalaha, arrimaha bulshada iyo dhaqanka iyo inuu codeeyo oo la doorto.
Soomaaliya waxay ansaxisay 26kii Agoosto 1975. Marka la eego qoddobada lagu arrimaha ku xusan warbixinta hada, Heshiisku wuxuu quseyn karaa tusaale ahaan “midab takoor” sida lagu qeexay Qodobka 1.1.

145 Axdi-qarameedka dowlad goboleedka Galmudug, qodobka 21aad, ee xuquuqaha wax la dooran karo iyo in la doorto; Dastuurka Hirshabelle, qodobka 25aad, ee xuquuqaha kaqeybgalka siyaasadeed iyo doorashada iyo iyo inuu codeey lana doorto; Dastuurka Jubaland, qodobka 22aad, ee ku saabsan xuquuqda wakiilnimada siyaasadeed iyo ka-qeybgalka arrimaha dadweynaha, iyo qodobka 25aad, ee xuquuqda doorashada; Dastuurka Puntland, qodobka 41aad, xuquuqaha kaqeybgalka geedi socodka doorashada, iyo inuu codeeyo iyoi la doorto, iyo qodobka 15aad, guud ahaan xuquuqaha kaqeybgalka (howlaha siyaasadeed laguma xusin liistada); Dastuurka Dawlad-goboleedka Koonfur Galbeed, Qodobka 13-aad, ee xuquuqaha cod-bixinta iyo inuu codeeyo iyo in la doorto, iyo Qodobka 9.6.b, sii guudahaan xuquuqaha kaqeybgalka (laakiin keliya kuwa ku dhashay gobolka); Dastuurka Somaliland, Qodobka 22aad, wuxuu xaq u leeyahay inuu ka qeyb galo siyaasada, dhaqaalaha, arrimaha bulshada iyo dhaqanka iyo inuu codeeyo oo la doorto.

146 Tilmaamaha qabyada ah ee Dowladaha loogu talagalay hirgelinta wax ku oolka ah ee xuquuqda kaqeybgalka arrimaha dadweynaha A / HRC / 39/28 20 July 2018.

147 Tilmaamaha qabyada ah ee Dowladaha loogu talagalay hirgelinta wax ku oolka ah ee xuquuqda kaqeybgalka arrimaha dadweynaha A / HRC / 39/28 20 July 2018 Faq 20 (e).

## Xaqa xorriyadda aragtida iyo hadalka

Axdiga Caalamiga ah ee Xuquuqda Madaniga iyo Xuquuqda Siyaasadda wuxuu tilmaamayaa xuquuqda xorriyadda aragtida [qofka] iyadoo aan faragelin lagu samayn [148] iyo xuquuqda aad u leedahay xorriyadda hadalka, taas oo ka kooban xaqa aad u leedahay raadinta, helitaanka iyo qaybinta xogta iyo fikradaha nooc kasta oo ay yihiin.[149] Xaqa xorriyadda aragtida iyo hadalka waa xaq uu leeyahay "qof kasta", maqaamkuu doono ha joogee.

Sharciga caalamiga ah ee xuquuqul insaanka ma ogola in xayiraad la saaro aragtida.[150] Dhanka kale, xuquuqda xorriyadda hadalka waa la xaddidi karaa haddii la buuxiyo heerka ugu sarreeya shuruudaha ku xusan Qodobka 19 (3). Tan macnaheedu waa in xannibaaduhu yihiin kuwo "sharcigu tilmaamay" ayna lagama maarmaan u yihiin una dhigmaan hawsha loogu talo galay si loo ilaaliyo mid ka mid ah ujeeddooyinka sharciga ah ee ku xusan qodobbada [sharci],[151] kuwaas oo kala ah in la ixtiraamo xuquuqda ama sumcadda dadka kale, iyo in la ilaaliyo amniga qaranka, kala dambaynta guud, caafimaadka guud, ama anshaxa.[152] Si kastaba ha ahaatee, xannibaadahaan waa inaan loo fasiran [ama aan loo dhigin] qaab "wax u dhimaya" xuquuqda.[153]

Marka la yimaado sharciyada dalka, qodobka 18-aad ee Dastuurka Ku-meelgaarka ah ee Federaalka wuxuu tilmaamayaa xaqa xoriyadda ra'yga iyo afkaarta. Sidoo kalena, dhamaan Dastuurrada Dowlad Goboleedyada iyo Somaliland waxay aqoonsan yihiin xaqa xoriyadda ra'yga iyo afkaarta.[154]

148 Axdiga Caalamiga ah ee Xuquuqda Madaniga iyo siyaasadeed, Qodobka 19.1.

149 Axdiga Caalamiga ah ee Xuquuqda Madaniga iyo siyaasadeed, Qodobka 19.2. Guddiga Xuquuqda Aadanaha ee Qaramada Midoobay, Faallo guud ee No. 34 (2011), Faq. 11.

150 Axdiga Caalamiga ah ee Xuquuqda Madaniga iyo siyaasadeed, Qodobka 19.1.

151 Isla Tixraacaas., Faq. 22.

152 Axdiga Caalamiga ah ee Xuquuqda Madaniga iyo siyaasadeed, Qodobka 19.3.

153 Guddiga Xuquuqda Aadanaha ee Qaramada Midoobay, Faallo guud ee No. 34), Faq. 21.

154 Qodobka 20aad Axdi-qarameedka Dowlad-goboleedka Galmudug; Qodobka 20aad ee xuquuqaha aragtida, hadalka iyo hal-abuurka ee dastuurka Hirshabelle; Qodobka 20aad ee xorriyadda hadalka iyo aragtida ee dastuurka Jubaland; Qodobka 14aad ee xorriyadda hadalka ee dastuurka Puntland; Qodobka 12-aad ee xorriyadda hadalka ee dastuurka Maamulka Koonfur Galbeed; iyo Qodobka 32aad ee Xoriyadda Banaanbaxa Dadweynaha, Muujinta Ra'yiga, Saxaafadda iyo warbaahinta kale ee ku xusan dastuurka Somaliland.

## NOTES

## NOTES

## NOTES

## NOTES

